# DEGMADA DUGSIYADA MAGAALADA ROCHESTER
# XEERKA DHAQANKA
# Siyaasada 1400

## AQOONSASHO

Xeerkan Anshaxa wuxuu ka dhashay dadaal wadareed ay si wadajir ah u galeen waalidiinta, ardayda, macalimiinta, shaqaalaha Degmada, iyo xubnaha bulshada, kuwaas oo ujeedadoodu tahay in fasalada iyo dugsiyada ku yaala Degmada Dugsiyada Magaalada Rochester laga dhigo meelo amaan ah, taageero leh, isla markaana farxad leh oo ku haboon barida iyo barashada.

Xeerkan waxaa loogu talagalay in uu noqdo dukumeenti nool. Waxaan ku bilownay himiladeena hore ee ah in aan yareyno in ardayda laga saaro dugsiyada iyada oo loo marayo ganaaxyo ama xarig, kuwaas oo la cadeeyey in ay qeyb ka yihiin waxa loo yaqaan "xiriirka tooska ah ee dugsiga iyo xabsiga." Guusha iyo wanaaga ardayga waxaa saameeya dhowr arimood oo is biirsaday, kuwaas oo ay ka mid yihiin: in la dhiirigeliyo ka-qaybgalka waalidiinta sidii la-hawlgalayaal, iyo in la xaqiijiyo in shaqaalaha Degmada iyo kuwa heer dugsi ay haystaan taageerada iyo agabka ay u baahan yihiin si ay u hirgeliyaan Xeerkan cusub. Ujeedada ugu weyn ee dadaaladeena wadajirka ah, oo ay ku jirto hirgelinta Xeerkan iyo wax ka badan, waa in la abuuro jawi dugsiyeed oo firfircoon, taageero leh, isla markaana wax taraya dhamaan dugsiyada Degmada.

Waxaan baran doonaa Xeerkaan inta aan dhaqangelinayno. Waxaan u jihaysan doonaa gaarista himilooyinka ku jira, anagoo isla markaasna hubinayna in taageerada lagama maarmaanka ah si haboon loo dhisay oo loo diyaariyay. Waxaan samayn doonaa isbedelo, anagoo horumarinayna qaybaha u baahan shaqo dheeraad ah iyada oo ku saleysan waxyaabaha aan baranay. Waxaana si joogto ah u qiimeyn doonaa horumarkeena si aan u gaarno goolasha ah in ardaydu ay amaan yihiin, iskuulka ku sii jiraan, una koraan si buuxdo.

Cimilada ama jawiga dugsiga — heerka ay dadka iskuulka ku sugan ku dareemaan amni iyo qiimeyn, sida ay isgaarsiinta ugu arkaan mid furan, daacad ah oo daryeel leh, iyo ka helaan dareen lahaansho iyo masuuliyad wadajir ah oo ku wajahan daryeelka iyo wanaaga dadka kalale — waxa ay si weyn u saameyneysaa awooda dadka ee hal-abuurka, barashada, kobaca, iyo hormarinta dadka kale.

## JADWALKA MAWDUUCYADA


| | |
|---|---|
| DHAQANKA DUGSIGA IYO CIMILADA | 5 |
| CIDA, GOORMA IYO MEESHA XEERKA LOOGU TALAGALAY | 5 |
| DHIIRIGELINTA ARDAYGA DHAQAN WANAAGSAN | 5 |
| MABAADI’DA HAGAAYA | 6 |
| Xaqa Waxbarasho Tayo Sare Leh | 6 |
| Mabaadi'da Guud | 6 |
| QOYSASKA IYO WADA SHAQEYNTOODA | 10 |
| TAAGEERADA HORUMARINTA EE SHAQAALAHA ISKUULKA, XUBNAHA BULSHADA, WAALIDIINTA IYO ARDAYDA | 11 |
| MAS’UULIYAD WADAAGA | 12 |
| XUQUUQDA, MAS’UULIYADA IYO RAJOOYINKA | 13 |
| Xuquuqda & Waajibaadka Ardayda | 14 |
| Xuquuqda & Waajibaadka Waalidka | 16 |
| Rajooyinka Maamulayaasha & Shaqaalaha | 17 |
| Rajooyinka Iskuduwaha Xeerka Sharafta | 19 |
| Rajooyinka Kormeeraha Guud | 19 |
| Rajooyinka Gudiga Dugsiga | 20 |
| KA HORTAG, FARAGELIN IYO ANSHAX-MARIN HORUMARIS AH | 20 |
| Ka Hortag Balaaranoo Guud | 20 |
| Anshax Hormarsan | 21 |
| Hababka Hishiisiinta | 21 |
| Faragelinta Hagista Oo La Barbardhigo Jawaabaha Anshax-Marinta | 21 |
| HEERAARKA FARAGELINTA IYO JAWAABAHA ANSHAX-MARINTA | 22 |
| Qodobada Lagu Tixgelinayo Go'aaminta Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa | 22 |
| Hagitaanka Xirfadeed ee Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa | 22 |
| Baaxada Faragelinta, Jawaabaha Anshaxa iyo Kala-xadaynta Awooda | 22 |
| Jadwal Xirfadeed ee Hagida Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa | 24 |
| Sida Loo Adeegsado Hagida Dhaqamada iyo Jawaabaha | 24 |
| Heerarka Faragelinta iyo Falcelinta Anshaxa | 26 |
| Nidaamka Tusmada | 27 |
| Dhaqamada Aan Haboonayn, Foodeynta, Iyo Heerarka Jawaabtooda | 28 |
| Xeerarka Amaanka Ku Saleysan Iskuulka | 38 |
| Warbixinta Xadgudubyada | 38 |
| Dhaqangelinta Sharciga Burista Ardayda iyo Habraaca Sharciga | 38 |
| Qalabka Elektarooniga Ardayda | 38 |
| Qalabka Kumbuyuutarka Degmada/Website yada/Email ka Ay Isticmaalaan Qof Kasta | 39 |
| Hubka, Khamriga & Maandooriyeyaasha Sharcidarada ah | 39 |
| Ceyrinta Ardayda iyo Habraaca Sharciga | 40 |
| Ka Qaybgalka Joogtada ah Inta Lagu Gudajiro Ceyriska | 40 |
| Waxbarashada Badalan | 41 |
| Dib Usoo Noqoshada Iskuulka Kadib Ceyrinta | 41 |
| Baarista Ardayga | 41 |
| Nidaamyada Aqoonsiga Kumbuyuutarka iyo Baaritaanka Biraha Aan Qorshaysnayn | 43 |
| Taabashada Jirka ee Mamnuuca ah iyo Kan La Ogolyahay | 43 |
| Xariga iyo Gudbinta Sharci Fulinta | 43 |
| Anshaxa Dadweynaha Hantida Iskuulka | 44 |
| Dhaqan Darooyinka Mamnuuca Hantida Iskuulka | 45 |
| Booqdayaasha Iskuulada | 47 |
| XOG URURINTA | 47 |
| Ururinta iyo Dib-u-eegista Xogta Sanadlaha | 47 |
| Kormeerka Deegaanka Iskuulka iyo Anshaxa | 48 |

## JADWALKA MAWDUUCYADA


| | |
|---|---|
| DIB U EEGID SANADEEDKA, FAAFINTA, IYO XEERARKA<br>Faafin<br>Soo Saarista Xeerarka Maamulka<br>Xalinta Is waafaq La'aanta Siyaasadaha ama Xeerarka Kale<br>Kala Soocid | 48<br>49<br>49<br>49<br>49 |
| HIGELINTA IYO KORMEERKA | 49 |
| LIFAAQA A – XEERKA LABISKA | 52 |
| LIFAAQA B – HABKA DIB U HISHIISIINTA | 54 |
| LIFAAQA C – HANAANKA CADAALADA | 56 |
| LIFAAQA D – ARDAYDA NAFAFADA | 67 |
| LIFAAQA E – SHARCI FULINTA | 69 |
| LIFAAQA F – WARBIXINTA AMAANKA ISKUULKA IYO DEEGAANKA WAXBASHO (SSEC) | 71 |
| LIFAAQA G – QAAMUUSKA | 74 |

## DHAQANKA DUGSIGA IYO CIMILADA

Dhaqanka iyo Deegaanka Iskuulka waxay saameeyaan qof walba oo ka tirsan bulshada iskuulka. Marka la abuuro bulshooyin taageero iyo soo dhaweyn leh, waxaan nolosha xubnaha bulshada oo dhan ku dhisnaa qiyamka aan wada qiimeyno, waxbarasho tayo leh ee dhamaan ardayda iyo deegaan iskuul oo taageero iyo u wanaag u leh ardayda, waalidiinta, macalimiinta, shaqaalaha taageerada iyo maamulka. Asaasida noocan oo kale ee dhamaan xubnaha bulshada waxay saameyn wanaagsanaan dheeri ku leedahay ardayda, labadaba horumarkooda tacliimeed iyo xiriirkooda asxaabta iyo dadka waaweyn. Waxay si weyn u wanaajisaa tayada nolosha iyo deegaanka shaqo ee dhamaan shaqaalaha ku sugan dhismaha iskuulka. Waxay iskuulka ka dhigtaa meel soo dhoweyn leh oo ku haboon qoysaska iyo bulshada balaaran. Si waxbarashadu u guulaysato, iskuul kasta waa inuu dhisaa iyo ilaaliyaa dhaqan iskuul oo wanaagsan kaas oo taageera dhamaan xubnihiisa—ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha—iyaga oo wada shaqeynaya si ay u koraan, bulsho ahaan iyo tacliin ahaanba.

Dhisida dhaqanka wanaagsan ee iskuulka waxay u baahan tahay hawl firfircoon oo badan oo ay wada qabtaan dhamaan xubnaha bulshada iskuulka. Xubnuhu waa inay isugu yimaadaan si ay u go'aamiyaan qiyamka ay doonayaan inay ku noolaadaan, iyagoo hubinaya in codadka qof walba la maqlo. Waa inay isla baaraan noocyada dhaqamada ay aaminsan yihiin inay taageeri doonaan qiyamka wadajirka ah, iyo sidoo kale dhaqamada ay u arkaan inay dhaawici doonaan. Waa inay helaan—oo ka faa'iidaystaan—fursado joogto ah oo ay ku milicsadaan dhaqamada ay ku lug leeyihiin ama arkaan, isla markaana ka fiirsadaan sida loo adeegsan karo dhaqamo taageero badan leh. Waa inay si joogto ah uga doodaan arimaha dhaqanka bulshada, deegaanka, iyo dhaqanka guud ee iskuulka la xiriira xubnaha kale ee bulshada. Arimahan waa in lagu daraa barashada iyo manhajka iskuulka, si koritaanka bulsho, akhlaaq, iyo anshax loogu qaato qayb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada.

## CIDA, GOORMA IYO MEESHA XEERKA LOOGU TALAGALAY

Hadii si kale aan loo sheegin, Xeerkan wuxuu khuseeyaa dhamaan ardayda, shaqaalaha Degmada, waalidiinta, booqdayaasha iyo dadka kale ee ku sugan hantida iskuulka ama ka qaybgalaya waxqabad kasta oo iskuulka ah, wuxuuna khuseeyaa dhaqanka:

1. Inta lagu jiro waqtiga waxbarashada ee iskuulka;
2. Ka hor iyo ka dib waqtiga iskuulka, marka la joogo hantida iskuulka;
3. Inta lagu safraayo gaadiidka ay maalgeliso RCSD;
4. Dhamaan dhacdooyinka oo iskuulku martigeliso; iyo
5. Marka laga baxo goobaha iskuulka ama saacadaha caadiga ah ee iskuulka, hadii ay jirto sababo keeni karta carqalad ku timaada habka waxbarashada ama halis gelisa caafimaadka, amaanka, ama daryeelka xubnaha bulshada iskuulka.

## DHIIRIGELINTA ARDAYGA DHAQAN WANAAGSAN

Ujeedada ugu weyn ee anshaxa ardaydu waa in lagu dhiirigeliyo ardayda inay ka qayb qaataan ee mar kale ugu soo laabtaan hawlahooda waxbarasho. Anshaxa ardaydu waa inuu ku dhiirigeliyaa ardayda inay ka fiirsadaan dhaqamada u suurta geliya inay si wax ku ool ah u nidaamiyaan dhaqankooda iyo inay taageeraan koritaanka akhlaaqda iyo anshaxa. Anshaxa waa in lagu maamulaa rabitaan iyo ka go'naansho bulsho waxbarasho oo xoogan, taasoo ku dhisan xiriir qoto dheer oo daryeel leh iyo ka qaybgalka shaqo tayo sare leh.

### Ka-qaybgalka Ardayga

Ka qaybgalka ardaydu waa qeyb muhiim ah oo lagu dhiso dhaqanka iyo deegaanka wanaagsan ee iskuulka, kaas oo kor u qaada horumarka bulsho/ dareen iyo guusha tacliimeed ee ardayda. Bixinta fursado badan oo ardaydu ku qayb qaataan hawlo bulsho oo wanaagsan, iyaga oo qaadanaya mas'uuliyad iyo hogaamin

dejinta jawiga iskuulka, isla markaana la xiriira dadka waaweyn ee daryeelka iyo taageerada leh, waxay ka hortagi kartaa dhaqamada xun xun waxayna abuuri kartaa fursado waxbarasho oo firfircoon oo dhamaan ardayda ah.

Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara:

1. bixinta fursado macno leh oo ardaydu ku wadaagi karaan fikradahooda iyo welwelkooda, isla markaana ay door firfircoon uga qaataan hawlaha iyo go'aan qaadashada guud ee iskuulka;
2. horumarinta hogaaminta ardayda oo ku dhiirigelisa arday kala duwan oo leh danaha, shakhsiyada, iyo asalka dhaqameed ee kala duwan (tusaale ahaan, ma aha oo kaliya ardayda tacliinta fiican leh, kuwa bulshada ku lugta leh, ama ardayda loogu yeero "caanka ah") kuwaas oo adeegsanaya hal-abuurkooda, hibadooda, iyo saameynta saaxiibtinimo si ay uga qayb qaataan dejinta jawiga firfircoon ee iskuulka;
3. aqoonsi joogto ah oo lagu bixiyo guulaha ardayda ee dhinacyada tacliinta iyo hawlaha dheeraadka ah ee iskuulka;
4. ku celcelinta bixinta jawaab-celin wax dhisaysa;
5. nidaamyada guud ee iskuulka oo kor u qaada rajada, himilooyinka, iyo dhaqamada wanaagsan ee bulshada taageera.

Fursadahaas, oo ay weheliso barnaamij hagitaan oo dhameystiran oo ka hortag iyo faragelin ah, waxay ardayda siiyaan waayo-aragnimo, istiraatiijiyado, xirfado, iyo taageerooyin ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan.

## MABAADI'DA HAGAAYA

### Xaqa Waxbarasho Tayo Sare Leh

Dhamaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin waxbarasho tayo sare leh. Sidaas darteed, talaabooyinka anshaxa ee iskuulka waa in loo adeegsadaa sidii oo u caawin lahaa ardayda inay ka qayb qaataan una xaqiijiyaan xaqaasi, ee aan loogu talagelin in ardayda laga reebo iskuulka ama laga qaado fursada waxbarasho ee noocaas ah. Degmadu waxay ceyriska u adeegsan doontaa oo keliya xaaladaha ay talaabooyin anshaxeed oo isdaba-joog ah la adeegsaday iyadoo aan natiijo laga helin, ama marka ay jiraan duruufo halis gelin kara amaanka ardayda ama shaqaalaha, ama hakin kara socodsiinta habka waxbarasho.

### Mabaadi'da Guud

Siyaasadaha anshaxa iskuulka waa in ay diirada saaraan abuurista jawi iskuul oo wanaagsan, taageerida horumarka bulsho iyo dareen ee ardayda, iyo barida nabadgelyada iyo ixtiraamka dhamaan xubnaha bulshada iskuulka. Iyada oo horumarka bulshada loo arko inuu yahay qayb muhiim ah oo ka mid ah anshaxa, dugsiyada RCSD waxay filayaan oo ay uga jawaabi doonaan arimaha anshaxa iskuulka si waafaqsan sharafta iyo qiimaha nafeed ee ardayda.

Ujeedada anshaxu waa in la fahmo laguna xaliyo sababaha keena dhaqanka, lagu dhameeyo khilaafaadka, lagu hagaajiyo waxyeelada dhacday, lagu soo celiyo xiriirada, isla markaana ardayda dib loogu daro bulshada iskuulka. Intaa waxaa dheer, waa in fiiro gaar ah iyo taageero faragelin la siiyo qoysaska iyo dhalinyarada baahi gaar ah qaba ama halis ugu jira in la ceyriyo. Shaqaalaha iskuulka waa in si dhab ah loo taageeraa si ay u horumariyaan xirfadahooda loona xoojiyo ku-dhaqankooda, iyagoo si wadajir ah ula shaqeynaya ardayda, qoysaska, iyo asxaabtooda. Si dadaalkani u noqdo mid guuleysta, waa lama huraan in ardayda iyo qoysaskooda la qadariyo, lana siiyo awood iyo door muuqda oo ay kula shaqeeyaan shaqaalaha degmada dhamaan arimaha, ee aan ku ekeyn oo keliya kuwa la xiriira Xeerka Anshaxa, si loo gaaro goolasha la dejiyey.

Dugsiyada RCSD waxay u hoggaansami doonaan mabaadi'da guud ee soo socda marka la dhaqan gelinayo anshaxa dugsiga:

| MABAADIDA #1 – ABUURISTA DEEGAAN ISKUUL OO WANAGSAN | |
|---|---|
| **1.1: XIRIIRO WANAAGSAN** | Amaanka iskuulka iyo guusha tacliimeed waxaa la sameeyaa lana xoojiyaa marka dhamaan shaqaalaha iskuulka ay dhisaan xiriiro wanaagsan oo ay si firfircoon uga qaybqaataan nolosha iyo waxbarashada ardayda. |
| **1.2: CADAALAD IYO JOOGTAYN** | Shaqaalaha iskuulka waxay kor u qaadi doonaan anshaxa sare ee ardayda iyagoo waxbaraya, tusaale u noqonaya, kormeeraya dhaqanka, isla markaana si cadaalad iyo joogto ah u dhiirrigelinaya dhaqan wanaagsan. |
| **1.3: BARID DHIIRIGELIN LEH IYO MAAREYNTA FASAL WAXTAR LEH** | Waxbarid waxtar leh oo soo jiidasho leh iyo maarayn fasal oo tayo leh waa aasaaska anshax marinta waxtarka leh. |
| **1.4: TAAGEERADA ARDAYDA** | Dugsiyaashu waa in ay adeegsadaan faragalinta latalinta iyo adeegyada taageero ee ku haboon si ay u bixiyaan anshax iyo hanuunin waxtar u leh ardayda, gaar ahaan kuwa ka soo laabanaya ciqaab ceyris ah, si loo xoojiyo awoodooda ay ku gaari karaan heerarka bulsheed iyo waxbarasho ee bulshada dugsiga. |
| **1.5: TAKOOR-LA'AAN** | Anshaxa dugsiga waa in loo fuliyaa si aan takoor laheyn iyadoo aan lagu saleynin jinsiyad, qowmiyad, midab, diin, dhaqanka diimeed, caqiido, asal qaran, xaalada dhalashada, asal ahaan qoys, jinsi aqoonsiga ama muuqaalkiisa, qaabka galmada, da'da, miisaan/muuqaal, dabeecado, ama naafonimo.<br>*Eeg Siyaasada Degmada ee Mamnuucaysa Takoorka ama Cunsuriyada Ardayda ama Shaqaalaha (0100) wixii faahfaahin dheeraad ah ah.* |
| **1.6: SIYASADA HEERKA ISKUULKA** | Xeerarka iyo qawaaniinta heerka iskuulka waa in ay waafaqsan yihiin Siyaasadani, ogolaanshaha Maamulaha Guud ama qofka loo xilsaaray waa in la helo, sidoo kalena waa in si haboon loogu qaybiyo ardayda iyo waalidiinta iyadoo la raacayo habka Siyaasadani tilmaamayso. Sidoo kale, iskuulada waxaa laga filayaa inay sameeyaan qorshayaal lagu horumarinayo jawiga iskuulka. |
| **1.7: MAS'UULIYAD WADAJIR AH** | Dhamaan xubnaha bulshada iskuulka waa in ay isla xisaabtamaan, iyaga oo isku xisaabinaya midba midka kale, isla markaana ka masuul ah bulshadooda iyo himilada guud ee bulshadooda. Xubnaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si joogto ah uga fiirsadaan sida dhaqankooda uu u taageero qiyamka guud ee bulshada ama uusan u taageerin, isla markaana ay ka fiirsadaan dhaqamo ka sii taageeri kara qiyamka bulshada. |
| **1.8: TABABAR** | Dhamaan shaqaalaha Degmada waa in si joogto ah loo siiyo tababaro xirfadeed oo ku saabsan siyaasadan, maaraynta fasalka/iskuulka, xalinta khilaafaadka, hababka anshaxa ee aan ciqaabta ku salaysnayn iyo kuwa dib u soo celinta, caafimaadka maskaxda (tusaale ahaan, kaalmo degdeg ah oo caafimaadka maskaxda ah), waxbarashada gaarka ah, iyo ka hortaga takoorka ku saleysan cunsuriyada, kuwaasoo la jaan qaadaya doorkooda. Tababaradan waxaa si joogto ah sanad walba loogu qaban doonaa shaqaalaha hada jooga, iyo sidoo kale la siin doonaa marka shaqaale cusub la shaqaaleysiiyo. |
| **1.9: MAS'UULIYADAHA ARDAYDA** | Dhamaan ardaydu waxay mas'uuliyad ku leeyihiin inay ku dadaalaan sida ugu fiican awoodooda, joogaan iskuulka maalin kasta marka laga reebo marka si sharci ah loo fasaxay, ka qayb qaataan ilaalinta jawi iskuul oo nabadoon oo taageero leh, ixtiraamaan asxaabtooda iyo |

| | |
|---|---|
| | shaqaalaha iskuulka, qaataan mas'uuliyada ficiladooda, isla markaana isku hogaamiyaan heerarka ugu sareeya ee anshaxa iyo dabeecada, iyo inay kor u qaadaan jawi ixtiraam iyo karaamo wadajir ah oo isku hayaan dhamaan xubnaha bulshada iskuulka. |

| **MABAADIDA # #2 – ANSHAX CADAALAD AH** | |
|---|---|
| **2.1: KA HORTAGA IYO FARGELINTA** | Anshaxa dugsiga waxaa lagu gaaraa si wanaagsan iyadoo laga hortagaayo falalka khaldan ka hor inta aysan dhicin, iyo la adeegsado faragelin wax ku ool ah hadii ay dhacaan. |
| **2.2: ANSHAX IYO HAGID** | Anshaxa dugsiga oo lala socodsiiyo waxbarid iyo hanuunin macno leh ayaa ardayda siinaya fursad ay kaga bartaan khaladaadkooda isla markaana uga qayb qaataan bulshada iskuulka, taasoo kordhinaysa fursada ardayga uu mar kale ugu soo laabto waxbarashada si firfircoon. |
| **2.3: KOR U QAADIDA WAXBARASHADA IYO YAREYNTA BURINTA** | Anshaxa dugsiga ee waxtar leh wuxuu kordhiyaa waqtiga ay ardaydu waxbaranayaan, wuxuuna yareeyaa waqtiga laga ceyriyo fasalada, iyadoo la ilaalinayo amaanka bulshada dugsiga iyo habsamida u socodka waxbarashada. |
| **2.4: ANSHAXA KA REEBISTA ARDAYGA LOO ADEEGSADO XULASHADA UGU DAMBAYSA** | Isticmaalka Ganaaxyada Gudaha Dugsiga, Ganaaxyada Dibeda Dugsiga, Ceyrinta, iyo u Wareejinta Dugsiyada kale ee kale duwan ayaa la dhimayaa waxaana loo adeegsanaa si tartiib tartiib ah marka ay suurtagal tahay. Mudnaanta ugu weyn waxay ahaan doontaa in ardaydu ay sii joogaan fasalka hadii ay suuragal tahay iyadoo la ilaalinayo amaanka dugsiga iyo sii socoshada habsanka waxbarashada. |
| **2.5: DOORKA TAAGEERADA SHAQAALAHA AMAANKA DUGSIGA** | Shaqaalaha Degmada ayaa sii hayn doona mas'uuliyada dhamaan arimaha loo arko kuwo la xiriira anshaxa dugsiga. Iyadoo la raacayo Qorshaha Amaanka Dugsiga ee Degmada, Degmada waxay shaqaaleysiisaa shaqaale amniga si ay uga caawiyaan dugsiyada la tacaalida dhamaan arimaha la xiriira amniga iyo badbaadada. Doorka ugu weyn ee shaqaalaha amniga waa in ay ka ilaaliyaan ardayda, shaqaalaha, iyo booqdayaasha dhibaatooyin; ka hortagaan, ogaadaan, ka falceliyaan, kana warbixiyaan jabinta Xeerka Anshaxa Degmada iyo Xeerarka Dowlada Gobolka New York; iyo in ay ka ilaaliyaan hantida Degmada xat iyo dhibaatooyin. Shaqaalaha amniga ee ay shaqaaleysiisay Degmada waxaa loo ogol yahay inay u gutaan waajibaadkooda si waafaqsan Siyaasadaha iyo Xeerarka Degmada, Sharciga Gobolka New York ee khuseeya, iyo tababarka ay bixiso Degmada.<br><br>Mar kasta oo ciidamada sharcigu ay kaga jawaabaan dhacdo ka dhacday hanti ama goob ka tirsan Degmada dugsiga, maamulaha dugsiga ama masuul kale oo ka tirsan shaqaalaha degmada ayaa si firfircoon u sii hayn doona masuuliyada deegaanka, isla markaana siin doona hagid shaqaalaha, ardayda, iyo cid kasta oo goobta joogta, marka laga reebo xaalado degdeg ah oo halis ah oo u baahan in ciidamada sharcigu si ku meel gaar ah ula wareegaan maamulka goobta. Ka qaybgalka ciidamada sharcigu waa inuu waafaqsanaadaa lifaaqa E ee siyaasadan. |
| **2.6: KA HORTAG KALA DUWANAANSHAHA JINSIGA ANSHAXA DUGSIGA** | Degmadu waa inay wax ka qabataa kuna jawaabtaa sinaan la'aanta ku saleysan midabka, cunsuriyada hay'adaha iyo noocyada kale ee takoorka ama eexda ee lagu garto nidaamka anshaxa dugsiga. Si taas |

| | |
|---|---|
| | loo sameeyo, waa in la sameeyaa hanaan u saamaxaya xubnaha bulshada dugsiga oo dhan inay si daacad ah ugala falgalaan arimahan, iyagoo ujeedadu tahay bogsiinta iyo xoojinta xiriirka, isla markaana la mideeyo go'aanka lagu beddlayo hab-dhaqanka jira iyo in la saxo dhaawacyadii ka dhashay cunsuriyada nidaamaysan iyo eexda qarsoon. |
| **2.7: HANAANKA SAXDA** | Anshaxa waxtar leh waxaa kaliya oo lagu dabaqi karaa iyadoo si buuxdo loo ixtiraamayo xuquuqda geedi-socodka cadaaladda ee ardayda iyo waalidiinta, taasoo waafaqsan Qaanuunka Waxbarashada ee Gobolka New York § 3214 iyo Dastuurka Mareykanka. Tani waxa ay ka mid tahay, balse kuma eko, xaqa lagu helo ogeysiis ku saabsan ciqaabta la qorsheeyay iyo fursad dhab ah oo lagu soo bandhigo aragtida ardayga ee dhacdadii keentay arintaas. |

| **MABAADIDA # #3 – WADASHAQAYNTA BULSHADA** | |
|---|---|
| **3.1: QAYBINTA SIYAASADA** | Ardayda, waalidiinta, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee dugsigu waa in si wanaagsan loogu wargeliyaa siyaasadaha anshaxa ee dugsiga. Degmadu waxay qayb ka mid ah Siyaasadan u qaybin doontaa dhamaan ardayda iyo waalidiintooda, waxayna ku daabici doontaa Siyaasada boga internetka ee Degmada iyo meel si fudud loo heli karo gudaha dugsiyada. |
| **3.2: FAMILY ENGAGEMENT** | Schools exist to support families in the education of their children and all staff should embrace reciprocity and meaningful engagement. School staff will keep parents informed of their children's behavior—both positive and negative, enlist them as partners in addressing areas of concern, and always inform them directly when exclusionary discipline is called for.<br><br>Dugsiyadu waxay u jiraan inay ku taageeraan qoysaska waxbarashada caruurtooda, dhamaan shaqaaluhuna waa inay kor u qaadaan wada-shaqayn dhab ah iyo is-kaashi macno leh. Shaqaalaha dugsigu waxay waalidiinta la socod siin doonaan dhaqanka caruurtooda—mid fiican iyo mid xunba, waxayna ula shaqayn doonaan sidii loola tacaali lahaa meelaha ay cabashooyinka ka jiraan, iyagoo had iyo jeer si toos ah u wargelin doona marka la adeegsanaayo ciqaab ceyris ah. |
| **3.3: COLLABORATION AND SHARING OF RESOURCES** | Dugsiyadu waa in ay la shaqeeyaan ururada shaqaalaha, bulshada, iyo hay'adaha si shaqaalaha dugsigu uga warqabaan kheyraadka iyo taageerada gacan ka geysan doono horumarkooda shaqsiyadeed, isla markaana kor loogu qaado awoodooda ay ku dabooli karaan baahiyaha waxbarasho iyo bulsheed ee ardayda ku nool bulshada Rochester. |

## QOYSASKA IYO WADA SHAQEYNTOODA

Ardayda, waalidiinta, iyo shaqaalaha dugsigu dhamaantood waxay leeyihiin door ka ciyaaraya sidii dugsiyada loo ilaalin lahaa amaankiisa, waxaana muhiim ah inay iska kaashadaan sidii loo gaari lahaa ujeedadan. Wacyigelinta joogtada ah ee waalidiinta waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku koobnayn, wicitaan telefoon, isgaarsiin qoraal, iyo/ama kulan. Waalidiinta iyo shaqaalaha dugsigu waa inay muujiyaan dhaqamada ay doonayaan in ardaydu ku daydaan.

Si waalidiinta loogu taageero inay noqdaan wada-hawlgalayaal firfircoon oo ka qayb qaata kor u qaadida deegaan dugsiyo oo amaank iyo taageero leh, waa in ay yaqaanaan Xeerka Anshaxa. Masuuliyiinta dugsigu waxay mas'uul ka yihiin la wadaagista macluumaadka ku jira dukumintigaan iyo siyaasadaha heer dugsi ee la sameeyey oo lala wadaago ardayda, waalidiinta, iyo shaqaalaha. Waxaa lagu dhiirigelinayaa dugsiyada inay qabtaan aqoon isweydaarsiyo waalidiinta lagu barayo fahamka Xeerka Anshaxa iyo sida ugu wanaagsan ee loola shaqeyn karo dugsiga si loo taageero koritaanka bulshada iyo dareenka caruurtooda. Macalimiintu waxay mas'uul ka yihiin wargelinta waalidiinta ku saabsan dhaqanka caruurtooda iyo korinta xirfadaha ardayda u baahan yihiin si ay ugu guuleystaan dugsiga iyo bulshada.

Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay kala hadlaan macalimiinta caruurtooda iyo shaqaalaha kale ee dugsiga arimaha saameyn kara dhaqanka ardayga iyo xeeladaha waxtarka leh ee lagu taageeri karo ardayga.

### Xaadirida

Xaadirida dugsiga waa mid muhiim u ah horumarka iyo guusha waxbarasho ee ardayga. Shaqaalaha dugsigu waa in ay hubiyaan ardayda muujinaya dhibaatooyinka la xiriira imaanshaha kuwaas oo noqon kara maqnaansho aan fasax lahayn ama muuqaalo muujinaya dayacaad waxbarasho, waa in ay siiyaan wacyigelin, faragelin, iyo taageero ku haboon. Marka ay dhacdo maqnaansho joogto ah, shaqaalaha dugsigu waa in ay la kulmaan ardayga iyo waalidkiisa si loo go'aamiyo taageerada loo baahan yahay iyo talaabooyinka ku haboon ee la qaadi karo, kuwaas oo ka mid noqon kara, laakiin aan ku koobnayn: faragelin latalin, u gudbin lataliye, iyo/ama u gudbinta barnaamijyada waqtiga dugsiga ka dib.

Dugsi kasta waa in uu dib u eegaa kiisaska maqnaanshaha joogtada ah, ka saarista fasalka, iyo/ama maqnaanshaha aan sababta lahayn, wuxuuna hawsha xalinta ku soo dari karaa macalimiinta soo xaadirinta, maamulayaasha, lataliyeyaasha dugsiga, macalimiinta, shaqaalaha bulshada, iyo shaqaalaha kale ee dugsiga.

Waa muhiim in ay jirto wadatashi iyo isgaarsiin xoogan oo u dhaxaysa dugsiga iyo guriga. Shirarka talo bixinta oo uu ka soo qayb galo maamulaha ama qof uu u xilsaaray, lataliyaha dugsiga, waalidka ardayga, iyo mid ama in ka badan oo ka mid ah macalimiinta ardayga, waa hab waxtar leh oo lagu dhiirigeliyo aragtida waalidiinta, waxaana la qaban karaa shirarkaasi markay ku haboon yihiin ardayga. Waalidiinta doonaya inay ka wada hadlaan faragelinta la xiriirta dhaqanka ardayga waa inay la xiriiraan dugsiga caruurtooda ama xiriiriyaha waalidka/kaaliyaha dugsiga ee guriga, ama hadii loo baahdo, Xafiiska Wacyigelinta Waalidiinta.

Hadii arday uu ku dhaqmo dhaqan si weyn uga baxsan anshaxa, maamulaha ama qofka uu u xilsaaray waa inuu wargeliyaa waalidka ardayga. Hadii la aaminsan yahay in ardaygu galay dambi, waa in waalidka lala xiriiro ***ka hor*** inta aan la wicin laamaha sharciga, marka laga reebo hadii ay jirto halis degdeg ah ee amaanka ah.

## TAAGEERADA HORUMARINTA EE SHAQAALAHA ISKUULKA, XUBNAHA BULSHADA, WAALIDIINTA IYO ARDAYDA

Jawiga iyo dhaqanka dugsiga ee la bedelay si qorshaysan waa inuu xooga saaraa taageerada dhamaan xubnaha bulshada dugsiga si loo ilaaliyo firfircoonidiisa. Gaar ahaan, hogaanka dugsiga iyo shaqaalaha ka shaqeeya dhismayaasha waa in la siiyo agabyo iyo xeelado kala duwan oo u fududeynaya inay wax bartaan oo ay horumariyaan isbedelada iyo kobaca loo baahan yahay. Sidoo kale, ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada waxay u baahan yihiin isla taageeradan si ay u helaan fursad ay wax ku bartaan kuna horumariyaan kobacooda. Dhamaan dadka ku lugta leh dugsiyadeena waa inay helaan waxyaabaha soo socda ee la isku haleyn karo:

1. **Fursado badan oo lagu shaqeeyo koox koox,** taasoo xoojinaysa fikirka is dhexgalka iyo iskaashiga ku dhisan.

2. **Fursado korriin xirfadeed** (oo ay ka mid yihiin tababaro, horumarinta xirfada, la socodka shaqaalaha kale ama booqashooyinka dugsiyada tusaalaha ah, iwm) oo loogu talagalay in lagu gaaro ujeedooyinka iyo yoolalka hagaajinta jawiga iyo dhaqanka dugsiga. Tababarada muhiimka ah waxaa ka mid ah: sida loo hirgeliyo hab raacyada dib u heshiisiinta; falanqaynta heerarka kala duwan ee takoorka la qabsaday, midka dhex dhexaadka ah iyo kan nidaamsan ee sababa kala duwanaanta jinsiyadeed ee ciqaabta iyo guusha; jawaabaha ku saleysan fahamka dhaawacyada nafsadeed; iyo kuwa kale ee ay aqoonsadaan macalimiintu.

3. **Fursado kobcinta bulsho** oo u suurtagelinaya qoysaska, ardayda, iyo xubnaha kale ee bulshada inay fahmaan--oo ay ka qeyb qaataan--hagaajinta jawiga dugsiga, taasoo ah ujeeddada ugu weyn ee dadaalkan.

4. In kasta oo aan wax ka baranayno dadka si qoto dheer uga fahamsan dhinacyada aragtida shaqadan, hadana horumarka iyo bedelida dhaqanka waa in *LALA* qabto dadka, in *LAGU* sameynin dadka. Ka qaybgalka dhabta ah wuxuu ka yimaadaa marka dadka si rasmi ah loogu casuumo *inay la* **wadaagaan abuurista wadada cusub ee horey loo qaadayo.**

5. **Waa in laga fogaadaa qabashada "halmar aan la sii wadayn."** Waxaa loo baahan yahay fursado iyo waqti lagu naqshadeeyo laguna tababarto iyadoo lala shaqeynayo kooxaha wada abuurka ah iyo daneeyayaasha kale, si joogto ahna loo helo hagis iyo taageero asxaabeed.

6. **Agabyo gaar ah oo si wadajir ah loo fahmi karo loona adeegsado erayo isku mid ah** (tusaale ahaan: hab dhaqannada dib u heshiisiinta, ladagaalanka takoorka, fahamka dadka dhaawaca maskaxeed qaba, iyo dhiirigelinta gudaha ah).

7. Isla markaana, **aqoonsiga in ay jiraan habab kala duwan** oo lagu gaari karo yoolalka, iyo dhiirigelinta in la isla arko sidii kheyraad la iskaga barto halkii laga arki lahaa sidii hanjabaad, si loo balaariyo aqoon, xirfado, iyo agab.

8. **Goob leh shaqaale taageero leh,** sida Agagaarka Caawimaada Ardayga ama meel kale, halkaas oo shaqaale ama lataliyeyaal tababaran ay ka caawin karaan ardayda in ay la tacaalaan dhibaatooyinkooda, iyada oo ujeedadu tahay in ay si dhaqso ah ugu laabtaan fasalka una diyaar garoobaan in ay si wanaagsan ula falgalaan asxaabtooda iyo shaqaalaha dugsiga.

9. **Rumeyn la wadaago oo ah in horumarka akhlaaqda, anshaxa, iyo bulshada uu yahay ujeedo aasaasi ah** oo waxbarasho, iyadoo sidoo kale la aqoonsan yahay in hababka waxbarasho ee hada jira iyo nidaamyada imtixaanada ay hoos u dhigayaan awooda lagu diirada saari lahaa dhisida horumarka shakhsiyeedka.

10. **Waqti iyo dhiirigelin lagu taageero danaha ardayda,** sida latalin, tababar, iyo horumarinta naadiyo iyo hawlo kor u qaada isku xirnaanta iyo sharafka ay u qabaan dugsigooda.

11. **Calaamado joogto ah oo muujinaya in Degmadu maalgelin ku sameyneyso taageerooyinka** lagu bedelayo jawiga dugsiyada si ay uga faa'iidaystaan dhamaan. Aragtiyaha ku saabsan jawiga dugsiga waa in si joogto ah looga hadlaa dhamaan heerarka isgaarsiinta, sumada, agabka, iyo taageerada Degmada, iyadoo si isdaba joog ah loo xusuusinayo in habkani bini'aadantinimo iyo awood leh uu mudan yahay maalgelinta joogtada ah ee waqtiga iyo dadaalka.

12. **Dadaal lagu yareynayo bedelka shaqaalaha dhamaan heerarka** iyadoo la raadinayo siyaabo lagu adkeeyo balanqaadkan hay'ad ahaan.

13. **Qalab lagu cabiro saameynta hab dhaqanada** dib u heshiisiinta iyo kuwa kale ee macalimiinta, dugsiyada, iyo qoysasku hirgeliyaan.

RCSD waxay ka go'an tahay inay si wadajir ah uga shaqeyso guud ahaan degmada si loogu hirgeliyo taageeradan, anagoo wadajir u shaqeyneyna si aan si aasaasi ah u bedelno dugsiyadeena, una noqdaan kuwo dib u heshiisiin, xalinta dhibaatooyinka, iyo soo dhoweyn leh.

## MAS'UULIYAD WADAAGA

### *Ujeedada*

Jawiga dugsiga—taas oo ka tarjumaysa heerka ay dadka iskuulku ku dareemaan amaan iyo qiimo, sida ay u arkaan isgaarsiinta mid furan, daacad ah, daryeel leh, iyo sidoo kale inay dareemaan masuuliyad iyo ka mid ahaansho midba midka kale daryeeliisa—waxa ay si weyn u saameeyaan awooda dadka ee hal abuurka, barashada, kobaca iyo kobcinta dadka kale.

Dadka waaweyn way khaldami karaan. Nidaamyada heerarka sare leh sida dugsiyada, iyo sidoo kale wadan ay ka jiraan sinaan la'aan, takoorka jinsiyada, midka raganimada iyo dumarnimada, awood la'aanta, da'da, iyo kuwa laga tirada badan yahay, ficilada dadka waaweyn iyo khaladaadkooda waxay si weyn u saameeyaan ardayda.

Dadka waaweyn waa in ay awoodaan in ay ardayda u noqdaan tusaale wanaagsan, taas oo ay ku jirto qaadashada mas'uuliyada ficiladooda. Mas'uuliyada ayaa sidoo kale dhisaysa kalsoonida u dhexeysa ardayda iyo dadka waaweyn. Mas'uuliyad wadaag waxay kor u qaadaa isgaarsiin wanaagsan. Marka qof walba oo ka tirsan bulshada dugsigu uu dareemo in uu ka faa'iideysto isgaarsiin furan iyo firfircoonida ay keento joogitaanka arday xiisaynaya waxbarashada, waxaa suurtagal noqonaysa in la abuuro jawi caafimaad qaba oo waxbarasho.

1. tayada nolosha iyo deegaanka shaqada ayaa kor u kacda;
2. waxbarashadu way hagaagtaa; iyo
3. qof walba wuxuu kasbadaa ixtiraam dheeraad ah oo uu u hayo dadka kale, taas oo sahleysa in si wadajir ah loogu shaqeeyo danta iyo guusha ardayda.

### *Maxaa loola jeedaa " mas'uuliyad wanaaga"*

Dugsigu waa nidaam heerar awoodeed leh taasoo ka dhigaysa mid adag in dadka si siman mas'uuliyad looga qaado. Si kastaba ha ahaatee, waa in aan ku dadaalnaa mas'uuliyad wadaag. Mas'uuliyada la wadaago waxay u baahan tahay in dadka waaweyn iyo caruurta labadaba lagula xisaabtamo ficiladooda, isla markaana ay awoodaan inay is xisaabiyaan. Waxaan dib u eegi doonaa ficiladeena si aan u falanqeyno in aantaageero dhab ah u nahay bulshadeena iyo in kale.

Sidee ***mas'uuliyad wanaaga loogu dhaqamaa?***

Si loo hirgeliyo isla xisaabtan wadajir ah, waa in qiyamka lala wadaago bulshada dugsigu si cad ah iyo loo muujiyo dhamaan xubnaha, isla markaana hormuud u noqdo maamulaha dugsiga ama qofka xilka u wakiilsan.

Qiyamkaas waxay si adag diirada u saari doonaan bedelida duruufaha waxyeelada u geystay ama naga hor istaagay in aan gaarno kartideena buuxda si shaqsi ahaan, bulsho ahaan, iyo hay'ad ahaanba.

Xubnaha bulshada dugsiga waxay aqbali doonaan oo ay muujin doonaan mahadnaq marka qof uu dhaafo heerka caadiga ah.

Xubnaha bulshada dugsiga waa in ay diyaar u yihiin in ay raali gelin bixiyaan oo ay falalkooda dib u eegaan. Dhamaan xubnaha bulshada dugsiga waxaa lagula xisaabtami doonaa iyada oo la adeegsanayo hab dhaqanada dib u heshiisiinta, marka ay suuragal tahay.

Dadka waaweyn waxay ku leeyihiin awood sare ardayda, taasina waxay adkayn kartaa in si dhab ah loola xisaabtamo. Sidaa darteed, dugsikasta waa in uu magacaabaa qof iyo meel gaar ah oo ardaydu si nabad ah ugu cabiri karaan walaacooda, isla markaana loogu qabto kulan dib u heshiisiin ah oo ay la yeeshaan dadka waaweyn iyo asxaabtooda hadii ay arimo soo baxaan.

Waxaan hiigsaneynaa in aan wadaagno mas'uuliyada xisaabtanka gudaha Degmadeena iyo bulshooyinka dugsiyada. Waxaan ognahay in isbedelo waaweyn oo dhinaca dhaqanka iyo dhismaha nidaamka loo baahan yahay si arintan loo gaaro. Sidaas darteed, waxaan balanqaadaynaa inaan si joogto ah u barano, u dhaqano, una talaabsano xitaa marka ay nagu adkaato ama aysan noogu fiicneyn si aan u dhisno jawi dugsi oo taageera koriin joogto ah iyo farxad ku jirta waxbarashada iyo barida.

## XUQUUQDA, MAS'UULIYADA IYO RAJOOYINKA

Degmadu waxay balanqaadaysaa in ay abuurto bulshooyin waxbarasho oo xubnahooda oo dhan lagu arko inay yihiin dad koraya, naxariis leh, oo ixtiraam badan. Sidaas darteed, dhamaan xubnuhu waxay xaq u leeyihiin inay ka filaan:

1. Deegaan si buuxo u taageera waxbarashada iyo barida.
2. Loo wada maro daryeel cadaalad ah oo xushmad leh dhamaan xubnaha bulshada, iyadoo qof walba heli karo fursad buuxda oo codkiisa lagu maqlo.
3. Ln la iska ilaaliyo takoorka iyo in si siman loola dhaqmo dhamaan arimaha iyo hawlaha dugsiga.
4. Isgaarsiin furan oo hufan, iyo sharaxaad cad oo ku saabsan habraacyada, xeerarka, iyo siyaasadaha dugsiga.
5. Balanqaad guud ahaan dugsiga oo ku wajahan siyaasado kor u qaadaya kobaca bulsho waxbarasho iyo horumarka xubnaha shaqsiyadeed ee bulshada dugsiga.
6. Deegaan qiimeeya oo ku dhaqma isla xisaabtanka wadajirka ah.

**Sharciga Karaamada Ardayda (Sharciga Karaamada)** wuxuu farayaa in arday kasta laga ilaaliyo takoor iyo dhibaato iyadoo loo eegaynin jinsiyadooda dhabta ah ama mid loo malaynayo, midabkooda, culeyskooda/muuqaalkooda, asal ahaan qaran, qabiil, diin, dhaqanka diimeed, naafonimo, jinsi, Cyberbullying/dumarnimo, ama jihada galmada. Ma jiro shaqaale ama arday dugsiga ka tirsan oo ku dhibaateyn kara arday kale gudaha dhismaha dugsiga, baska dugsiga, hawlaha dugsiga ama xataa meel ka baxsan dugsiga hadii ficilkaasi saameyn taban ku yeelan karo awooda ardayga uu dhibka saameeyay inuu ka

qayb qaato ama ka faa'iidaysto waxbarashada ama barnaamijyada waxbarasho ee dugsiga[1].

Caatinta iyo Caatinta internetka, iyo arimo kale, ee istcmaalka hantida gudaha ama dibada iskoolka, si kas ahaan, dhaqan dayac iyo/ama naceyb wata, kaas oo qof kale u dhaawici karo jir ama niyad ahaan, iyo waxaa lagu qeexaa awood kala sarayn oo u dhexeysa ardayda. Hadii laba arday ay si siman uga qayb qaataan isqabqabsi ama muran, tani ma aha xaalad caatin, balse waxaa loo arkaa "khilaaf" u dhexeeya labada arday. Marka ay jirto kala sarayn awoodeed, waxee muujin kartaa siyaabo yaryar in mudo dheer ah ama si weyn hal mar ah. Caatinta waxaa ku jiri karto hadal, ficil jir ah, ama qoraal cabsi gelinaya ama si xun u cabsiinaya qof kale. Caatinta internetka waxay ku lug leedahay isticmaalka tiknoolajiyada xogta iyo isgaarsiinta (tusaale: email, taleefoonada gacanta, fariimaha qoraalka ah, baraha bulshada, wicitaanada muuqaalka leh, ciyaaraha elektarooniga ah, fariimaha degdega ah, bogaga internetka ee shakhsiga ah ama baloogyada, ama isku darka dhamaan kuwaas) si loo taageero dhaqan si kas ama naceyb wata oo uu sameeyo qof ama koox si qorsheysan iyo dayacnimo leh wax u yeelaya ama u cabsi gelinaya dadka kale si jireed ama maskaxeed.

Shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, ardayda, ama qof kasta oo arka ku xadgudub, caatin, iyo/ama takoorka ama helo warbixin qoraal ah ama mid afka ah oo ku saabsan falalkaas waa inay si degdeg ah ugu wargeliyaan Maamulaha Dugsiga ama Isku duwaha Xeerka Karaamada, iyadoo la raacayo Siyaasada Gudiga 0100 iyo 0100R. Ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta caruurta ee goobjooga u ah ku xadgudub, caatin, iyo/ama takoorka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan Isuku duwaha Xeerka Karaamada, oo laga heli karo dugsigaaga (liiska waxaa laga heli karaa boga internetka ee Degmada, qeybta Diiwaangelinta DASA).

## Xuquuqda iyo Waajibaadka Ardayda[2]

Degmadu waxay ka go'an tahay ilaalinta xuquuqda ardayda sida hoos ku xusan. Ardaydana waxaa laga filayaa inay gutaan masuuliyadooda si ay si buuxda uga qayb qaataan waxbarashadooda, sida hoos lagu cadeeyay.

| XUQUUQDA | MAS'UULIYADAHA ARDAYDA |
|---|---|
| **1.** In ardaygu si sharci ah ugu xaadiro dugsiga uu ka diiwaan gashan yahay, sida uu sharciga qabo. | **1.** In ay maalin walba, si joogto ah oo waqtigiisa ku yimaadaan dugsiga, qabtaan shaqooyinka, dadaalaan inay qabtaan shaqo tayo leh, diyaar u noqdaan inay wax bartaan, isla markaana ka qayb qaataan waxbarashadooda. |
| **2.** In codkiisa la maqlo marka uu u baahdo taageero. | **2.** La xiriir shaqaalaha dugsiga ee ku haboon marka caawimaad loo baahan yahay. |
| **3.** In laga filan karo in dugsigu noqdo meel amaan ah, nidaamsan, lehna ujeedo waxbarasho oo dhamaan ardaydu ka faa'iideysan karaan waxbarashada, isla markaana si cadaalad ah loola dhaqmo. In la helo xeerarka, qawaaniinta iyo siyaasadaha dugsiga, loona sharxo marka loo baahdo, ayadoo ay cadaynayaan shaqaalaha dugsigu. | **3.** In ay ka warqabaan dhamaan xeerarka, filashooyinka, iyo cawaaqibta lagu maamulayo anshaxa ardayda, ayna u dhaqmaan si waafaqsan tilmaamahaas. |

[1] Marka lagu daro DASA, Degmada Dugsiyada Magaalada Rochester waxay ardayda ka ilaalisaa takoorka ku saleysan caqiidadooda, heerka muwaadinimo, asal reereed, naafonimo, astaamo hide side ah oo sababi kara cudur, aqoonsiga ama muujinta jinsigooda, ama da'dooda.

[2] Tixraac aan toos aheyn: Siyaasada Degmada ee Mamnuucaysa Takoorka ama Dhibaateynta Ardayda ama Shaqaalaha (0100); Siyaasada Ka Hortaga iyo Faragelinta Dhibaateynta iyo Caatinta Ardayda (0115)
Tixraaca: 8 NYCRR 100.2(l)(2)(ii)(o)

| | |
|---|---|
| **4.** In loo ixtiraamo sida qof gaar ah, lagulana dhaqmo si edban, cadaalad ah, oo xushmad leh aragti ahaan iyo ficil ahaan iyada oo ay u siman yihiin ardayda kale iyo shaqaalaha dugsiga. | **4.** In la ixtiraamo qof walba oo ka tirsan bulshada dugsiga loona dhaqmo si edeb leh, cadaalad ah, oo xushmad leh. |
| **5.** In fikradooda ugu dhiiban karaan hadal, muuqaal ama qoraal ahaan. | **5.** In ay fikradahooda iyo aragtidooda u muujiyaan si xushmad leh, si aysan u aflagaadeyn, sumcad dilin, ama u xadidin xuquuqda iyo mudnaanta |
| **6.** In ay u labistaan si ay u muujiyaan aqoonsigooda iyo shakhsiyadooda. | **6.** In ay si haboon u labistaan iyadoo la raacayo xeerka labiska. |
| **7.** In la siiyo fursado waxbarasho oo siman oo ku habboon, oo ay ku jiraan helitaanka barnaamijyada dheeraadka ah iyo kuwa dugsiga | **7.** In ay ka warqabaan barnaamijyada waxbarasho ee la heli karo si ay u isticmaalaan ugana horumariyaan awoodahooda si buuxda. |
| **8.** In si siman uga qaybqaataan dhamaan hawlaha dugsiga iyadoon loo eegin jinsiyad, midab, caqiido, miisaan/muuqaal, diin, dhaqamada diimeed, jihaynta galmada, jinsi, aqoonsiga ama muuqa jinsiga, asal qaran, koox qowmiyadeed, asal qabiil, heerka jinsiyadeed, xisbinimada siyaasadeed, da'da, xaalad guur, dabeecado hido sideed hore loo ogaa, ama naafonimo. | **8.** In ay si wanaagsan uga shaqeeyaan dhamaan hawlaha waxbarasho iyo kuwa dheeraadka ah, isla markaana u cadaalad iyo taageero siiyaan dadka kale. |
| **9.** In ay helaan xog sax ah oo khuseysa oo la xiriira mukhaadaraadka iyo khamriga, iyo sidoo kale inay la xiriiri karaan shaqsiyaad ama hay'ado si toos ah u caawin karo ardayda la tacaalaya dhibaatooyin shakhsiyeed oo culus. | **9.** In ay ka warqabaan macluumaadka iyo adeegyada, isla markaana raadsadaan caawimaad marka ay ku haboon tahay si ay uga gudbaan dhibaatooyinka shakhsiyeed. |
| **10.** In la ilaaliyo in la cabsi geliyo, lagu xadgudbo, ama lagu takooro iyadoo lagu saleynayo midabka, jinsiyadda, culeyska/muuqaalka, diinta, dhaqamada diimeed, aragtida jinsiga, nooca jinsiga, muujinta jinsiga, asal qaran, koox qowmiyadeed, asal reereed, heerka muwaadinimo, taageerada siyaasadeed, da'da, heerka guurka, astaamo hide sideed horey u muujiyey, ama naafonimo ee shaqaalaha ama ardayda, ee gudaha dhismaha dugsiga ama munaasabad, hawl ama dhacdo uu dugsi qabanqaabiyey. | **10.** Inay isu ixtiraamaan iyo si cadaalad ah ula dhaqmaan dadka kale iyadoo la raacayo Xeerka Dhaqanka ee Degmada iyo qodobada Sharciga Sharafta. Inay isu maamulaan si kor loogu qaado jawi ka madax bannaan cabsi gelin, handadin, ama takoorka. Inay soo sheegaan isla markaana ku dhiirigeliyaan kuwa kale inay soo sheegaan dhacdooyinka cabsi gelinta, handadida, ama takoorka. |
| **11.** In ay helaan xoriyada hadalka iyo saxaafada, iyo xuquuqda lagu gudbin karo cabasho ama lagu abaabuli karo si nabad ah oo lala wadaagayo ardayda kale, iyadoo ujeedadu tahay horumarinta dugsiga, fasalka, iyo/ama jawiga waxbarashada. | **11.** In si wadajir ah ula shaqeeyaan asxaabta iyo shaqaalaha dugsiga si loo ilaaliyo jawi wanaagsan oo dugsiga ah. |
| **12.** In loo maro hab cadaaladeed, in loo arko inaysan dambi laheyn ilaa laga soo cadeeyo dambiga, iyo inee helaan hab cabasho xal u ah oo cadaalad ah oo aan eex lahayn si wax looga qabto walaacyada ardayga. Inuu ardaygu fursad u helo inuu soo bandhigo dhinaciisa dhacdada marka talaabo edbin ah laga fiirsanayo. | **12.** In ay dhamaystiraan shaqada dugsiga, iyagoo u hogaansamaya xeerarka dugsiga ee ku saabsan daacadnimada tacliinta sida ku cad Xeerka Dhaqanka. |

| | |
|---|---|
| **13.** In ardaydu si wadajir ah isu abaabuli karaan oo ay isu meteli karaan marka la gaarayo go'aamada muhiimka ah ee la xiriira dugsiga. | **13.** In uu qofku xuquuqdiisa u adeegsado si amaan ah oo waafaqsan Xeerka Dhaqanka. |
| **14.** In la helo damaanad qaad ku saabsan cunto jaban oo nafaqo leh oo maalin walba laga helo deegaanka dugsiga (tusaale ahaan, qadada). | |

## Xuquuqda & Waajibaadka Waalidka

Degmadu waxay ka go'an tahay inay la shaqeyso waalidiinta iyagoo ah lamaane waxbarashada caruurtooda.

| XUQUUQDA | MAS'UULIYADAHA ARDAYDA |
|---|---|
| **1.** Inay si firfircoon uga qeyb qaataan waxbarashada caruurtooda. | **1.** Inay hubiyaan in caruurtoodu si joogto ah oo waqtigeeda ah u tagaan dugsiga, isla markaana hadii ay maqnaadaan, ay la socdaan dugsiga sababta maqnaanshahooda.<br>Inay la shaqeeyaan Degmada si loo horumariyo fursadaha waxbarasho ee caruurtooda. |
| **2.** Inay si edban, cadaalad ah, oo xushmad leh loola dhaqmo dhamaan shaqaalaha dugsiga iyo xubnaha bulshada | **2.** Inay u muujiyaan ixtiraam iyo asluub shaqaalaha, waalidiinta kale, mas'uuliyiinta, iyo ardayda marka ay joogaan goobaha dugsiga ama munaasabadaha dugsiga, ama marka ay la xiriirayaan shaqaalaha degmada ee arimaha shaqada. |
| **3.** Inay helaan xog cad oo kooban oo ku saabsan siyaasadaha Gudiga Waxbarashada Rochester iyo habraacyada la xiriira waxbarashada caruurtooda. | **3.** Inay akhriyaan iyo la socdaan siyaasadaha Gudiga Waxbarashada, xeerarka maamulka, iyo Xeerka Dhaqanka. Inay caruurtooda fahamsiiyaan xeerarkan iyo filashooyinka, si ay uga qeyb qaataan abuurida jawi dugsiyeed oo amaan ah oo taageero leh. |
| **4.** Inay si joogto ah uga helaan warbixino qoraal ama af ah shaqaalaha dugsiga oo ku saabsan horumarka waxbarasho ama dhaqanka caruurtooda, oo ay ka mid yihiin warqadaha darajooyinka, warbixinaha anshaxa, iyo kulamada waalidka iyo macalinka. | **4.** Inay mas'uuliyiinta dugsiga si ixtiraam leh oo waqtigeeda ah ugu soo gudbiyaan cabashooyinka ama walaacyadood |
| **5.** Inay helaan xog iyo ogeysiis degdeg ah oo ku saabsan dhaqan xumo ama dhibaatooyin ay sababaan ama saameeyaan caruurtooda, iyo talaabooyinka anshaxeed ee ay qaadeen maamulayaasha ama shaqaalaha dugsiga. | **5.** Inay la shaqeeyaan maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsiga si loo xaliyo wax kasta oo dhibaatooyin waxbarasho ama anshaxeed ah oo caruurtoodu la kulmaan |
| **6.** Inay helaan xog ku saabsan habraacyada xuquuqda anshaxa ee la xiriira caruurtooda, oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan kulamada iyo rafcaanada, iyo sidoo kale natiijooyinka talaabooyinka dib u heshiisiinta iyo jawaabaha kale ee la xiriira caruurtooda. | **6.** Inay siiyaan Degmada Dugsiyada Magaalada Rochester iyo dugsiyada caruurtooda xogta xiriirka ee hada jirta iyo la cusbooney. |

| | |
|---|---|
| **7.** Inay helaan xog ka timaada shaqaalaha dugsiga oo ku saabsan siyaabaha lagu horumarin karo waxbarashada ama anshaxa caruurtooda, oo ay ka mid yihiin latalinta, gacansiinta waxbarashada, barnaamijyada dugsiga ka dib, barnaamijyada waxbarasho, iyo adeegyada caafimaadka maskaxda ee ka jira Dugsiyada Degmada Magaalada Rochester iyo bulshada. | **7.** Inay caruurtooda siiyaan meel ku haboon oo ay ku dhamaystaan shaqada guriga ama u ogolaadaan ka qaybgalka barnaamijyada dugsiga kadib ee u suurtageliya inay shaqada guriga dhamaystiraan. Inay caruurtooda baraan ixtiraamka iyo sharafta naftooda iyo ardayda kale, iyadoon loo eegin ama loo maleeyo midabka, muuqaalka/jirka, diinta, caadooyinka diimeed, caqiidada, jinsiga, aqoonsiga ama muujinta jinsiga, asalka qaranimo, koox qowmiyadeed, asal reereed, heerka muwaadinimo, aragtidooda siyaasadeed, da'dooda, xaaladooda guur, astaamaha hidaha la is leeyahay inay horseedi karaan cuduro, ama naafonimadooda. Tani waxay xoojin doontaa kalsoonida ilmaha waxayna kor u qaadi doontaa waxbarashadiisa, iyadoo la raacayo Sharciga Sharafta Ardayda oo dhan. |
| **8.** Inay helaan macluumaad ku saabsan adeegyada loogu talagalay ardayda naafada ah iyo kuwa baranaya luqada Ingiriisiga, marka ay khuseyso. | **8.** Inay dugsiga ku wargeliyaan wixii walaac ah ee carqaladayn kara waxbarashada ilmahooda (tusaale ahaan, naafonimo, caqabado luqadeed). |
| **9.** Inay helaan isgaarsiin, hadal iyo qoraal, luqadooda hooyo. | **9.** Inay la xiriiraan Degmada iyo dugsiyada si ay ugu sheegaan baahiyahooda isgaarsiineed (tusaale ahaan, turjumaad luqadeed). |

## Rajooyinka Maamulayaasha & Shaqaalaha

Maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsigu waxay leeyihiin waajibaad gaar ah oo ka saran ardayda iyo waalidiinta deegaanka waxbarashada.

1. Inay hirgiliyaan dugsiyo amaan leh oo nidaamsan iyagoo adeegsanaya xeelado ka hortag iyo faragelin kuwaasoo waafaqsan hab dhaqanada dib u heshiisiinta, isla markaana raacaya Xeerka Anshaxa ee *Degmada Dugsiyada Magaalada Rochester*.

2. Inay u muujiyaan ardayda, waalidiinta, mas'uuliyiinta sharciga ah, iyo xubnaha kale ee bulshada ixtiraam, cadaalad iyo akhlaaq wanaag; isla markaana ay tusaale u noqdaan ardayda.

3. Qof weyn oo u shaqeeya ama metelaya RCSD marnaba lama ogola inuu si jir ahaaneed ama hadal ahaan u yaso xubnaha kale ee bulshada dugsiga, ama uu ku dhaqmo falal ka reeban siyaasada 0100, xitaa marka uu ku akhrinayo cod dheer.

4. Inay shaqada yimaadaan maalin kasta, waqtigana ilaaliyaan, ay isticmaalaan qorshayaal waxbarasho hal abuur iyo ka qaybgel u leh ardayda maalin kasto, waafaqsan Buuga Shaqaalaha ee Dugsiga Degmada Magaalada Rochester[3].

5. Inay u muujiyaan xiiso iyo kalgacayl waxbarista, fahamka habka waxbarashada ee ardayga, iyo welwelka ku saabsan in dhamaan ardaydu si siman u gaaraan guulaha waxbarasho

[3] https://www.rcsdk12.org/cms/lib/NY01001156/Centricity/Domain/11959/RCSD%20Staff%20Handbook%209.5.23.pdf

6. Ka qaybqaataan fursadaha horumarinta xirfadeed iyo ku dabaqaan wixii laga bartay si wax ku ool ah loogu horumariyo waxqabadka shaqada iyo/ama waxbarashada ardayda.

7. Ka warhayaan siyaasadaha Gudiga Waxbarashada iyo xeerarka maamulka, kana dhaqan geli si cadaalad iyo joogtayn leh.

8. Ilaaliyaan sirta macluumaadka iyadoo la raacayo shuruucda federaalka iyo tan gobolka.

9. Ka warhayaan shuruucda federaalka iyo gobolka ee nidaamka anshaxa ee ardayda naafada ah

10. Gudbiyaan siyaasadaha, filashooyinka, iyo welwelka, kana jawaab cabashooyinka ama welwelka ka imanaya ardayda iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta si dhaqso leh iyo luqad ay fahmayaan.

11. Hubiyaan in ardayda loo gudbiyo gudiyo, waaxyo, xafiisyo, qaybo, hay'ado, ama ururo ku haboon marka taageero dibada ah loo baahdo. Waalidiinta iyo ardaydaba u sheeg ilaha bulshada ee caawin kara baahidooda.

12. Ka caawiyan ardayda la qabsiga cadaadiska saaxiibada iyo dhibaatooyinka shakhsi, bulsho, ama dareen ee soo kordha.

13. Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ku wargeli horumarka waxbarasho iyo dhaqanka ardayga, abuur fursado macno leh oo ay kaga qayb qaataan, kuna sii wad isgaarsiinta joogtada ah luqad ay fahmaan.

14. Bixiyaan macluumaad ka caawinaya ardayda qorsheynta xirfadaha mustaqbalka.

15. Siiyaan ardayda maqnaanshaha sharciyeysan shaqooyin dib loo sameyn karo, oo ay ku jiraan ardayda u maqan sababo anshaxeed.

16. Inay hirgiliyaan iyo la dhiiigeliyaan jawi isixtiraam iyo karaamo wadajir ah oo dhamaan ardayda, iyadoon loo eegin midab, qowmiyad, diinta, culeyska/jirka, caqiidada, dhaqamada diimeed, jihada galmada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga ama muujintiisa, asal qaran, koox qowmiyadeed, awoowe iyo awoowayaal, xaaladda dhalashada, xisbiyada siyaasadeed, da'da, heerka guurka, astaamaha hide side ee hore u saameeya, ama naafo, iyadoo la fahamsan yahay labiska, luqada, iyo dhaqanka ku haboon goobta dugsiga, taas oo xoojin doonta isku kalsoonida ardayda iyo dhiirigelin doonta inay wax bartaan.

17. Ka hortagaan arimaha takoorka iyo dhibaataynta xaalad kasta oo khatar ku ah caafimaadka maskaxda ama jirka ama amaan qabka arday kasta, shaqaalaha dugsiga, ama qof kasta oo si sharci ah ugu sugan hantida dugsiga ama ka qeybgalaya hawl dugsiga.

18. Ka shaqeeyaan in la saxo fikradaha iyo xagjirniada shakhsiga ah ee laga yaabo inay ka hor istaagaan in si siman dhamaan ardayda loola dhaqmo goobta dugsiga ama fasalka.

19. Ka warbixiyaan dhacdooyinka takoorka iyo dhibaataynta ee la arkay ama loo sheegay macalinka, lataliyaha dugsiga, shaqaalaha taageerada ardayda, ama shaqaalaha kale ee dugsiga, si dhaqso leh ula socodsii maamulaha dhismaha iyo/ama Isuduwaha Sharciga Karaamada (DAC) iyo/ama Madaxa Hawlaha Horumarinta Shaqaalaha.

20. Si wadajir ah ula shaqeeyaan ardayda iyo waalidiinta si loo ilaaliyo jawi dugsi oo wanaagsan.

21. Maamulaha: Si macno leh oo waqtiyeesan uga jawaab dhacdo kasta oo takoor iyo dhibaatayn la arkay ama loo soo sheegay maamulaha, iyadoo lala kaashanayo Isuduwaha Sharciga Karaamada (DAC) ama

Madaxa Hawlaha Horumarinta Shaqaalaha, sida ku haboon.

22. Maamulaha: Hubi in ardayda iyo shaqaalaha ay fursad u helaan inay si joogto ah ula xiriiraan maamulka dugsiga, iyo ay helaan wado sahlan ay kula wadaagaan cabashooyinkooda maamulaha.

**Rajooyinka Iskuduwaha Xeerka Sharafta**

Kormeer iyo isku dubarid hawlaha kahortaga caatinta ee ka socda heerka dhismaha dugsiga.

1. In si qoto dheer loo tababaro si loola tacaalo xiriirada bini'aadantinimo ee la xiriira midabka, caqiidada, culeyska/jirka, diinta, dhaqamada diimeed, jihada galmada, jinsiga, aqoonsiga ama muujinta jinsiga, asal qaran, koox qowmiyadeed, awoowayaal, xaaladda dhalashada, aragtida siyaasadeed, da'da, heerka guurka, astaamaha hidde-side ee hore u saameeya, ama naafo.

2. In la aqoonsado agabka manhajka ee taageeraya kor u qaadida edbinta iyo isixtiraamka gudaha casharada iyo maareynta fasalka; iyo la siiyo shaqaalaha tilmaamo ku saabsan sida agabkaas loo heli karo iyo loo hirgelin karo si dib u habeyn leh.

3. In mas'uul laga noqdo kormeerida iyo soo tebinta waxtarka hawlaha kahortaga caatinta ee dugsiga.

4. In si macno leh oo waqti ku haboon lola tacaalo arimaha dhibaataynta ama xaaladaha khatar ku ah caafimaadka maskaxda ama jirka iyo nabadqabka arday kasta oo si sharci ah ugu sugan hantida dugsiga ama ka qeybgalaya hawl dugsiga.

5. In si fudud u helaan ardayda, waalidiinta, iyo xubnaha shaqaalaha.

**Rajooyinka Kormeeraha Guud**

Kormeerayaasha guud waxay door hogaan ah ka ciyaaraan taageerida hogaamiyeyaasha dugsiyada iyagoo ku dadaalaya inay dhisaan jawi dugsiyeed oo wanaagsan.

Waxa la filayo waxaa ka mid ah:

1. Promote a safe, positive, orderly, respectful and stimulating environment, free from intimidation, discrimination and harassment, supporting active teaching and learning.

2. Provide building level staff with appropriate administrative support.

3. Review with District administrators the policies of the Board of Education and state and federal laws relating to school operations and management.

4. Inform the School Board about educational trends, including student discipline.

5. Work to create instructional programs that reduce instances of misconduct and are sensitive to student and teacher needs.

6. Work with District administrators to educate staff and school community about the Code of Conduct, enforce the Code of Conduct and ensure that all cases are resolved promptly and fairly.

7. Address all areas of school-related safety concerns.

8. Address personal biases that may affect equal treatment of students and staff.

9. Maintain confidentiality in accordance with federal and state law.

**Rajooyinka Gudiga Dugsiga**

The School Board is obligated to ensure that the District has a Code of Conduct that effectively supports positive school climates.

1. Kor u qaadida jawi amaan ah, togan, nidaamsan, ixtiraam leh, oo dhiirigeliya barashada, kana fayoow cabsi gelin, takoorka, iyo dhibaataynta, si uu u taageero waxbarid iyo waxbarasho firfircoon.

2. Sii shaqaalaha heerka dhismaha dugsiga ah loogu helo taageero maamul oo ku haboon.

3. Dib u eeg siyaasadaha Gudiga Waxbarashada iyo shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka ee quseeya hawlgalka iyo maaraynta dugsiyada, iyada oo lala kaashanayo maamulayaasha Degmada.

4. Gudiga Dugsiga la socodsii isbedelada waxbarasho ee socda, oo ay ku jiraan anshaxa ardayda.

5. Ka shaqee abuurista barnaamijyo waxbarasho oo yareeya anshax xumada ee ku wajahan baahiyaha ardayda iyo macalimiinta.

6. La shaqee maamulayaasha Degmada si loo wacyigeliyo shaqaalaha iyo bulshada dugsiga ee Xeerka Anshaxa iyo fuli xeerkaas iyadoo la hubinayo in dhamaan arimuhu si cadaalad iyo waqti munaasab lagu xaliyo.

7. La tacaal dhamaan arimaha khuseeya amaanka dugsiga.

8. Ka shaqee in la aqoonsado iyo la wajaho fikradaha shakhsiyeed ee laga yaabo inay saameeyaan sinaanta loola dhaqmo ardayda iyo shaqaalaha.

9. Ilaali xogta sirta ah sida uu dhigayo sharciga federaalka iyo kan gobolka.

## KA HORTAG, FARAGELIN IYO ANSHAX-MARIN HORUMARIS AH

**Ka Hortag Balaaranoo Guud**

Hanaanka guud ee heer Degmo ee lagu dhiirigelinayo anshaxa wanaagsan waa aasaaska lagu dhisayo iyo lagu ilaaliyo dhaqan fiican oo ka dhexjira dugsiyada. Qaab dhismeedka horumarinta dhalinyarada ee mideysan, joogtada ah, firfircoon, iyo ku saleysan awoodaha iyo kartida ardayda oo dhan, oo ay Degmadu si rasmi ah u qaadatay iyo lagu hirgeliyey gudaha fasalada iyo dugsiyada, ayaa siinaya dhamaan ardayda taageerooyin kahortag ah. Istaraatiijiyadaha kahortaga ee lagu daro hawlaha maalinlaha ah ee fasalka iyo manhajka waxbarashada waxay xoojiyaan dhisida xiriiro wanaagsan, horumarinta xirfadaha bulsheed iyo kuwa shucuureed, kobcinta maskax togan, iyo barashada xeelado is maamulid — kuwaasoo dhamaantood saldhig u ah nidaamka anshxa ee dugsiga.

Istaraatiijiyadaha firfircoon waxay mudnaanta siinayaan dhisida xiriiro wanaagsan, iyo waxaa si joogto ah loogu daraa hawlaha maalinlaha ee fasalka iyo manhajka. Istaraatiijiyadahan firfircoon waxay taageeraan horumarinta xirfadaha bulsheed iyo kuwa shucuureed, kobcinta maskax fiican, iyo barashada xeelado is maamulid, waxayna saldhig u yihiin qaab dhismeedka nidaamka anshaxa.

## Anshax Hormarsan

Fahamka anshaxa inuu yahay "fursad waxbarasho" ayaa asaasi u ah habka anshaxa RCSD. Anshaxa horusocodka wuxuu adeegsadaa talaabooyin isdaba joog ah si loola tacaalo dhaqanka aan haboonayn, iyadoo ujeedadu tahay in la baro ardayda dhaqanka bulshada ku haboon. Anshaxa horusocodka wuxuu isku mar xambaarsan yahay isla xisaabtan, waxbarasho, iyo isbedel dhaqameed.

Anshaxa horusocodka wuxuu xooga saaraa abuurista fursado waxbarasho oo togan oo ku saabsan arimaha anshaxa, akhlaaqda, iyo qiimaha. Tani waxay gacan ka geysan kartaa ka hortaga dhaqamada xunxun iyadoo la barayo ardayda inay ka bartaan khaladaadkooda. Si loo hirgeliyo anshaxa horusocodka, waxaa loo baahan yahay in shaqaalaha dugsigu ay ka taageeraan ardayda ku kacay anshax xumo:

1. Fahmaan dhaawaca ay dhaqankaasi geystay;
2. Fahmaan sababta dhaqankaasi u dhacay iyo waxa ay xaaladaas ku samayn lahaayeen si ka duwan;
3. Mas'uuliyada ficiladooda qaataan;
4. Fursada u isticmaalaan inay bogsiyaan dhaawaca, dib u dhisaan xiriirka, iyo inay bartaan xeelado iyo xirfado ay mustaqbalka adeegsan karaan;
5. Fahmaan in ay jiri doonaan ciqaabo sii adkaanaya hadii dhaqankaasi mar kale soo laabto.

Xeerkani Anshaxa wuxuu qeexayaa talaabooyin iyo ciqaabo ku haboon si loogu jawaabo dhaqamada ardayda.

## Hababka Hishiisiinta

Dhaqamada dib u heshiisiinta waxay kor u qaadaan xiriir caafimaad qaba oo ka dhex jira bulshada dugsiga iyo waxaay dhiirigeliyaan anshax wanaagsan iyaga oo xalinaya khilaafaadka, dadka iyo kooxaha mas'uul ka dhiga, dhaawaca bogsiinaya, taageeraya dhaqanka bulshada ku haboon, iyo ka jawaabaya baahiyaha dhamaan dhinacyada ku lug leh. Hababka dib u heshiisiinta waxay qaadan karaan noocyo kala duwan, hase yeeshee asalkoodu waa in la ogaado waxa dhacay, cida uu dhaqanku waxyeelo u geystay, waxa loo baahan yahay in la sameeyo si loo saxo ama dhaawaca loo bogsiiyo, iyo sida dadka mustaqbalka u dhaqmi karaan si ka duwan. Tusaalooyinka dhaqamada dib u heshiisiinta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn, wada hadalka ardayda ku saabsan falalkooda, goobo fadhiyo wada hadal ah, iyo dhexdhexaadin dhexdooda ah. Shaqaalaha dugsiga iyo la hawlgalayaasha dhismaha ayaa qaadan doona hab dib u heshiisiin ah si wax looga qabto anshax xumada ardayda, iyadoo loo raacayo tababarkooda, waxayna la xiriiri doonaan waalidiinta si loo taageero lana dhiirigeliyo natiijada hababka dib u heshiisiinta.

Inkastoo hababka dib u heshiisiintu aysan qasab ahayn, hadana waxaa ugu wanaagsan marka ay ka qeyb qaataan dad si diyaar ah uga qaybgalaya si looga fogaado jebinta anshaxa sida ku cad shaxda ciqaabta. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Lifaaqa B Dhaqamada Dib u heshiisiinta.

## FARAGELINTA HAGISTA OO LA BARBARDHIGO JAWAABAHA ANSHAX-MARINTA

Ka jawaabida dhaqamada ardayda iyadoo la adeegsanayo faragelin hore oo nidaamsan marka arimuhu ugu horeyn soo ifbaxaan waxay ka hortagi kartaa in ay sii kacsamaan ama soo noqnoqdaan. Talaabooyin yaryar ayaa la isku dayaa marka hore, hadii aysan guuleysanina talaabooyin ka xoog badan ayaa lagu xijiyaa. Dhamaan faragelinadu waa in ay la jaanqaadaan qiyamka, mabaadi'da, filashooyinka, iyo xeeladaha uu diirada saarayo qaab dhismeedka kahortaga ee heer Degmo iyo heer dugsi, si caruurtu uga fikiraan ficiladooda iyo u xiriiriyaan xeeladaha kahortaga guud ee la barayo iyo lagu dhaqmo.

Faragelinta taageerada iyo wacyigelinta ayaa la doorbidaa marka loo eego hababka ciqaabta iyo ka saarista, hase yeeshee waxaa jiri doona xaalado weli sababi kara in arday lagu qaado ciqaab anshaxeed ama laga saaro waxbarashada. Xeerka Anshaxa wuxuu adeegsadaa erayga "falcelin anshaxeed" si uu u tilmaamo talaabooyinka ay ka mid yihiin: digniinta, luminta xuquuqo gaar ah, xabsi fasaleedka, ganaaxyada, iyo ciqaabo

kale, taas oo ka duwan "faragelin hagitaan" oo loola jeedo falcelino gaar ah oo dib u heshiisiin iyo taageero ku dhisan si loo saxo dhaqanka ardayga.

## HEERAARKA FARAGELINTA IYO JAWAABAHA ANSHAX-MARINTA

### Qodobada Lagu Tixgelinayo Go'aaminta Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa

Shaqaalaha dugsigu waa inay tixgeliyaan arimaha sababo dhaqanka adag iyo in dhaqankaas lagu yarayn karo iyadoo ardayga la caawinayo si uu u fahmo ugana shaqeeyo arimaha keena dhaqankaas.

1. Da'da, caafimaadka, iyo naafo ama xaalada waxbarasho ee gaarka ah ee ardayga.
2. Ku haboonaanta meelaynta heerka waxbarasho ee ardayga.
3. Dhaqankii hore ee ardayga iyo diiwaanka anshaxiisa.
4. Fahamka ardayga ee saameynta uu dhaqankiisu yeeshay.
5. Diyaarinta ardayga ee ku saabsan in uu saxo dhaawaca uu sababay dhaqankiisu.
6. Daranimada falka anshax xumada iyo heerka dhaawaca uu sababay.
7. Hadoo dhaqanku jebiyey DASA iyo, hadii ay sidaas tahay, waxa looga baahan yahay in Degmadu fuliso si ay u buuxiso waajibaadkeeda DASA.
8. Duruufta/anshaxa uu dhaqanku ku dhacay.
9. In ardaygu uu ku dhaqmay isdifaac.
10. In falka ardayga uu khatar geliyay badqabka arday ama xubin shaqaale.
11. Saameynta dhacdada ee guud ahaan bulshada dugsiga.
12. Fursada ay leedahay in faragelin ka yar ay si ku filan uga jawaabto jebintaas.
13. In dugsigu isku day sameeyay kahor dhacdada si uu uga shaqeeyo dhaqanka ardayga isagoo adeegsanaya habab togan oo kahortag ah.
14. Duruufo kale oo yarayn kara ama sii adkayn kara xaalada oo laga yaabo inay khuseeyaan.
15. Hadii maxkamad soo saarto amar ilaalin oo u faa'iidaya arday ama shaqaale ka tirsan Degmada, ardayga loo soo saaray amarkaasi waxaa loo wareejin karaa dugsi kale hadii loo baahdo si waafaqsan amarka.

### Hagitaanka Xirfadeed ee Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa

Shaqaalaha dugsigu waxay haystaan xoriyad ay ku doortaan faragelinta iyo ciqaabta ku haboon ee ku jirta heerkaas, balse xoriyadooda waxaa hagi doona qodobadan:

1. Marka ay suuragal tahay oo ay ku haboon tahay, ka jawaabista anshax xumadu waa inay ku bilaabataa heerka ugu hooseeya ee falcelinta, iyadoo mudnaanta la siinayo dhaqamada dib u heshiisiinta iyo faragelinta hagitaan ee ku haboon.
2. Marka ay suuragal tahay oo ay ku haboon tahay, kahor inta aan la adeegsan ciqaab ceyrin, maamulka dugsigu waa inuu dhameystiraa dhamman fursadaha faragelinta hagitaan iyo falcelino anshaxeed oo aan aad u culusayn.
3. Faragelinta hagitaan ee xoogan iyo u gudubka heer ciqaab anshaxeed oo sare ayaa loo adeegsan doonaa ardayda ku kacda dhaqan aan haboonayn oo si joogto ah u soo noqnoqda.

### Baaxada Faragelinta, Jawaabaha Anshaxa iyo Kala-xadaynta Awooda

1. Digniin afka ah – qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha Degmada.
2. Digniin qoraal ah – darawalada baska, kormeerada hoolalka iyo qadada, tababarayaasha, lataliyayaasha, macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee shahaadada leh, Maamulaha, Ku xigeenka Maamulaha, Kormeeraha Guud.
3. Dhaqamada dib u heshiisiinta – wareega fasalka – macalimiinta, lataliyayaasha, maamulaha ama qof uu magacaabay, iyo xubnaha kale ee bulshada ee la magacaabay.

4. Ogeysiis qoraal ah oo loo diro waalidka – darawalka baska, kormeerrada hoolalka iyo qadada, tababarayaasha, lataliyayaasha, macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee shahaadada leh, Maamulaha, Ku xigeenka Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
5. Xabsi fasaleed – Macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee shahaadada leh, Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
6. Ka ceyrinta adeega gaadiidka – Agaasimaha Gaadiidka, Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
   (Ogeysiis: Ardayda Naafada ah, ganaaxida gaadiidka ama ka saarista gaadiidka gaarka ah ee ay Degmada bilowdo waxay noqon kartaa ka saarida waxbarasho. Sidaas darteed, habraacyo gaar ah oo cadaaladeed ayaa khusayn kara – Eeg Lifaaqyada C iyo D.)
7. Ka ceyrinta ka qaybgalka ciyaaraha isboortiga – Tababarayaasha, Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
8. Ka ceyrinta hawlaha bulshada ama kuwa dheeraadka ah ee dugsiga – Agaasimaha hawsha, Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa. Macalimiintu waxay ka saari karaan ardayga hawlaha bulshada ama kuwa dheeraadka ah ee uu macalinkaasi qabanqaabiyo oo uu kormeero.
9. Ka ceyrinta xuquuqo kale – Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
10. Ka ceyrinta ama ka qaadid xuquuqda ardayga ee isticmaalka kombiyuutarada Degmada iyo isku xirka Internet ka – Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
11. Xabsi gudaha dugsiga ah – Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa.
12. Ka saarid fasalka oo uu sameeyo macalin – Macalimiinta.
13. Hakinta waxbarashada mudo gaaban (shan maalmood ama ka yar) – Maamulaha, Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa, Gudiga.
14. Hakinta waxbarashada mudo dheer (in ka badan shan maalmood) – Maamulaha (waxuu soo jeedin karaa), Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa, ama Gudiga (waxay ka qaadi karaan hakinta mudada dheer).
15. Ka saarid barnaamijka waxbarashada caadiga ah ee dugsiga – Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa, Gudiga.
16. Ka ceyrin joogto oo dugsiga ah – Kormeeraha Guud ama wakiilkiisa, Gudiga.
17. Talaabooyin kale oo uu sharci ogol yahay – Mas'uulka uu magacaabay sharciga ama xeerka khuseeya.

## Jadwal Xirfadeed ee Hagida Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa

Xeerka Anshaxa wuxuu ardayda ka dhigayaa kuwo mas'uul ka ah dhaqankooda. Anshax xumada waxaa loo kala saaray afar heer iyadoo lagu saleynayo daranimada dhaqanka. Heer kasta wuxuu ka kooban yahay noocyo kala duwan oo faragelin iyo ciqaab ah oo shaqaalaha dugsigu u adeegsan karaan inay kaga jawaabaan dhaqanka ardayga. Xeerka Anshaxa wuxuu bixiyaa talaabooyin isla xisaabtan oo tartiib tartiib ah oo loogu talagalay ardayda ku celceliya dhaqamada xun inkastoo horey loogu qaaday faragelin ama ciqaab.

Gudaha Jadwalkan, shaqaalaha dugsigu waxay uga jawaabaan dhaqanka ardayda iyagoo adeegsanaya faragelino hagitaan iyo, iyadoo ku xiran duruufaha, falcelino anshaxeed. Shaqaalaha dugsigu waxay dooran karaan mid ka mid ah faragelinada hagitaan ee kala duwan si ay uga caawiyaan ardayda hagaajinta dhaqankooda. Heer kasta, ardaydu waxay heli karaan gudbin aan ciqaab ahayn oo loo gudbiyo shaqaalaha taageerada ee dhismaha dugsiga.

Jadwalku si ula kac ah ayuu u xadidayaa dhaqamada keeni kara in ardayga laga saaro waxbarashada, sida ka saarista fasalka, hakinta waxbarashada mudo gaaban ama dheer, ama ka saarista joogtada ah. Ardayda ku kacda anshax xumo aan ku jirin Jadwalka waxaa lagu dabaqi doonaa talaabooyin anshaxeed oo ku haboon oo ay go'aamiyaan maamulka dugsiga, taas oo waafaqsan heerarka anshaxeed ee dhaqamada la midka ah ee ku cad jadwalka.

Ardayda Pre-kindergarten lama ganaaxi karo.[4] Ganaaxyada loo adeegsado ardayda dugsiga hoose (fasalada K ilaa 3) ama ardayda naafada ah (fasalada K ilaa 12) waa in marka hore lagala tashadaa Madaxa Dugsiyada

| | | |
|---|---|---|
| Heerka 1 | Dhaqan aan iskaashi lahayn / aan u hogaansamin | Faragelinta Fasalka; Faragelinta Kooxda Taageerada Ardayga |
| Heerka 2 | Dhaqan fowdo ah / wax carqaladeynaya | Shaqaalaha Taageerada Xoogan; Faragelinta iyo Falcelinta Maamulka |
| Heerka 3 | Dhaqan gardaro ama dhaawac / waxyeelo leh | Faragelinta Gudbinta; Falcelinta Ceyrin |
| Heerka 4 | Dhaqan aad u khatar badan ama rabshado wata | Faragelinta Gudbinta; Falcelinta Ceyrin Dheereysan |

## Sida Loo Adeegsado Hagida Dhaqamada iyo Jawaabaha

Marka ay ka jawaabayaan anshax xumada, shaqaalaha dugsigu waa inay adeegsadaan jadwalka hoose, iyagoo isku daraaya jadwalka kore, sida soo socota:

1. **Tiirka "Koodhka" ee "Jadwalka Mawduuca Shaxda" wuxuu tilmaamayaa:**
   a. **SSEC: Koodhadhka looga baahan yahay in loo gudbiyo gobolka (fiiri Lifaaqa F, "Warbixinta Amnaanka Dugsiga iyo Deegaanka Waxbarashada (SSEC)", wixii tilmaam iyo qeexid dheeraad ah).**
   b. **NS: Koodhadhka Degmada ee aan loo baahnayn in loo soo sheego gobolka.**

2. Shaqaalaha dugsigu waa inay helaan dhaqanka ku haboon Jadwalka.

3. Sanduuqyada lagu calaamadeeyey "X" ee Jadwalka waa la adeegsanin xaalad kasto.

[4] Tixraac: https://www.nyssba.org/news/2025/01/10/on-board-online-january-13-2025/commissoner-pre-k-students-should-not-be-suspended/

4. Marka ugu horeysa ee dhaqan aan haboonayn ama carqaladeyn oo dhaco, shaqaalaha dugsigu waa inay adeegsadaan hal ama in ka badan faragelino hagitaan ah, iyo falcelino anshaxeed hadii ay haboon tahay, laga bilaabo heerka ugu hooseeya ee Jadwalka ee dhaqankaas (ama hal ama in ka badan oo faragelino ama falcelino anshaxeed oo ka socda heer ka hooseeya). (Eeg jadwalka kore ee faragelinada iyo falcelinada.)

5. Hadii dhaqankaas lagu soo celceliyo si joogto ah isla sanad dugsiyeedka gudahiisa, shaqaalaha dugsigu waxay isticmaali karaan hal ama in ka badan faragelino ama falcelino anshaxeed oo ka socda heerka xiga ee Shaxda ee dhaqankaas, ama heer ka hooseeya hadii sanduuqa heerka xiga aanu lahayn "X". Hadii hal heer oo keliya lagu tilmaamay dambigaas, faragelin kasta ama falcelin anshaxeed waa in laga soo doortaa heerkaas ama heer ka hooseeya.

6. Marka laga reebo kiisaska lagu soo noqnoqdo iyo xadgudbka ee joogtada ah ee nooc isku mid ah, shaqaalaha dugsigu ma adeegsan karaan faragelino iyo falcelino anshaxeed oo ku qoran sanduuqyada leh "Waxaa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada". Kiisaskaas, falcelinta anshaxeed ee sanduuqyadaas waa in weli la tixgeliyaa dhaqamada dib u heshiisiinta qayb ahaan. Shaqaalaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay adeegsadaan faragelino hagitaan markasta oo suurtagal ah.

7. Hadii ciidamada ammanka la waco, waa in gudbin loo sameeyaa adeegyada Degmada ee ku takhasusay aagaas. Hadii aanu jirin adeegyo Degmo oo ku saabsan aaggaas, waa in gudbin loo sameeyaa ururka bulshada ee ku takhasusay aaggaas. Ujeedada gudbintu waa in lagu taageero ardayga sidii dhaqan dib u heshiisiin ah.

*Fiiro gaar ah: Barnaamijyada iyo hay'adaha dibada ee qandaraaska la leh Degmada waxay yeelan karaan habraacyadooda ka saarista.

**Tusaale ahaan**

1. Hadii arday uu muujiyo dhaqan ixtiraam daro ah oo la go'aamiyo in loo baahan yahay faragelin ama falcelin anshaxeed, macalinku waa inuu adeegsadaa hal ama in ka badan oo ka mid ah faragelinada Heerka Koowaad.

2. Hadii ardaygaas mar kale noqdo mid carqalad sameeya isla sanad dugsiyeedkaas, macalinku wuxuu adeegsan karaa hal ama in ka badan oo ka mid ah faragelinada Heerka Koowaad ama Heerka Labaad.

3. Hadii faragelinadu ku guuldareystaan oo ardaygu mar sadexaad galo isla xadgudubka, macalinku wuxuu adeegsan karaa hal ama in ka badan oo ka mid ah faragelinada Heerka Koowaad iyo Heerka Labaad.

4. Xaaladaha uu ardaygu si isdaba joog ah oo joogto ah ugu kaco xadgudubyo isku mid ah ama isku dhow, waxaa la adeegsan karaa faragelinada heerarka ku qoran "Waxaa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada" hadii la ogolaado.

## HEERARKA FARAGELINTA IYO FALCELINTA ANSHAXA

**Ka Hortaga Guud ee Dhamaan Ardayda**. Degmadu waxay qaadataa hab dhismeedka oo dhan ee dugsiga si loo dhiirigeliyo dhaqan wanaagsan. Barashada bulsho shucuurta ayaa lagu dhex daraa manhaj ka jawaabaya dhaqamada kala duwan oo hawlgeliya ardayda. Shaqaaluhu si joogto ah ayey u kulmaan si loo xaqiijiyo in uu jiro barnaamij taageero ardayda oo dhameystiran, kaas oo ka kooban adeegyo hagitaan, fursado barashada bulsho shucuurta, fursado ka qaybgalka ardayga iyo taageerooyinka ka hortaga iyo faragelinta dhaqanka si loo dhiirigeliyo loona kiciyo dhaqan bulsho wanaag leh oo ardayda iyo xiriir wanaagsan oo bulshada dugsiga. Wareegyada dib u heshiisiinta iyo habraacyada kale ee dib u heshiisiinta ayaa si joogto ah loo adeegsadaa si loo dhiso xiriiro, loo abuuro is faham iyo kalsooni, loona sameeyo bulsho. Dugsigu wuxuu leeyahay nidaam waqti hore lagu ardayda u baahan faragelin iyo/ama adeegyo taageero.

**FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOOSEEYO EE LA TILMAAMAY MARKA KOOWAAD**

| | Nooca Faragelinta | Hagida Faragelinta * | | Anshaxa Falcelinta |
|---|---|---|---|---|
| Heerka 1 | **Faragelinta iyo Falcelinta Fasalka**. Faragelinadani waxay ujeedadoodu tahay in lagu baro dhaqan sax ah iyo dabeecad nooc kale si ardaydu u bartaan iyo u muujiyaan dhaqan amaan iyo ixtiraam leh. Macalimiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay tijaabiyaan xeelado kala duwan oo waxbarid iyo maareynta fasalka. Macalimiintu waa inay adeegsadaan falcelinadan si tartiib tartiib ah oo heerar koraayo leh. | • Xusuusin iyo dib u hagid<br>• Saxitaan afka ah<br>• Door ka ciyaar<br>• Tusaale & Tababar<br>• Xiriir waalidka ama mas'uulka<br>• Qoraal fikircelin<br>• Raaligelin qoraal ah | • Kursi Bedel<br>• Warqada horumarka maalinlaha ah ee dhaqanka<br>• Shirka macalinka iyo ardayga<br>• Nidaamka saxiib macalinka<br>• Shirka Macalinka/Waalidka | • Ka qaadista waqtiga fasalka dhexdiisa<br>• Ka qaadista xuquuqaha fasalka<br>• Xayiraad |
| Heerka 1 | **Faragelinta Kooxda Taageerada Ardayga**. Faragelinadani badanaa waxay ku lug yeeshaan shaqaalaha taageerada, kuwa dugsiga ama ka tirsan bulshada balaaran, iyo ujeedadoodu waxay tahay in lagu hawlgaliyo nidaamka taageerada ardayga si loo xaqiijiyo guusha waxbarashada iyo joogteynta faragelinada, iyo la bedelo duruufaha gacan ka geysanaya dhaqanka aan haboonayn ama carqaladeynta ardayga. Shaqaaluhu waa inay adeegsadaan falcelinadan si tartiib tartiib oo heerar koraayo. | • Mid ka mid ah faragelinada kor ku xusan<br>• Waalidku wuxuu ula soconaa ardayga dugsiga hadii waalidku ogolaado iyo qayb ka mid ah shuruudaha qandaraaska<br>• U gudbinta xarunta taageerada guud ee dhismaha<br>• U gudbinta barnaamijka ka bacdi saacadaha dugsiga<br>• U gudbinta Kooxda Taageerada Ardayga<br>• U gudbinta barnaamijka latalinta<br>• U gudbinta xarunta caafimaadka ama caafimaadka maskaxda dugsiga<br>• U gudbinta ururka bulsho ee deegaanka ah<br>• U gudbinta adeegyada daaweynta isticmaalka maandooriyaha<br>• Bedelka jadwalka ama fasalka hadii ay khuseyso<br>• Qiimaynta Dhaqanka Shaqeynta iyo abuurista Qorshaha Faragelinta Dhaqanka<br>• U gudbinta Kooxda CSE ama 504<br>• Dhexdhexaadinta asxaabta<br>• Hababka dib u heshiisiinta, oo ay ku jiraan adeegyada bulshada ama magdhawga<br>• Xalinta khilaafaadka<br>• Dhexdhexaadinta bulshada<br>• Shirarka bulshada | | |
| Heerka 2 | **Faragelinta iyo Falcelinta Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka**. Faragelinadani waxay ku lug yeelan karaan maamulka dugsiga, iyo ujeedadoodu waa in lagu saxo dhaqanka iyadoo la muujinayo culayska iyo muhiimada ay leedahay arinta, iyadoo ardayga lagu sii hayo dugsiga. Shaqaaluhu waa inay adeegsadaan falcelinadan si tartiib tartiib oo heerar koraayo. | | | • Mid ka mid cawaaqibta kor ku xusan<br>• Eedayn ka timaada maamule ku haboon<br>• Lumin xuquuqaha dugsiga<br>• Xayiraad<br>• Ka saarista fasalka (ilaa ½ maalin) |
| Heerka 3 | **Faragelinta iyo Falcelinta Ceyrinta iyo Gudbinta.** Faragelinadani waxay ku lug yeelan karaan ka saarista ardayga deegaanka dugsiga mudo gaaban sababo la xiriira culayska dhaqanka. Hadii la soo rogo ceyrinta mudo gaaban, mudadaas waa in la yareeyaa inta suurtagal ah iyadoo si ku filan loo xalinayo dhaqanka. Shaqaaluhu waa inay adeegsadaan falcelinadan si tartiib tartiib oo heerar koraayo. | | | • Mid ka mid cawaaqibta kor ku xusan<br>• Ceyrinta mudo gaaban (hal ilaa shan maalmood) |
| Heerka 4 | **Falcelinta Hakinta Dheereysa iyo Gudbinta**. Faragelinadani waxay ku lug leeyihiin ka ceyriska ardayga deegaanka dugsiga sababo la xiriira culayska dhaqanka. Waxaa ku jiri karo in ardayga lagu meeleeyo deegaan amaan ah oo leh nidaam dheeraad si wax looga qabto dhaqanka. Faragelinadani waxay diirada saarayaan ilaalinta amniga bulshada dugsiga iyo joojinta dhaqanka is waxyeelaynta iyo kan khatarta ah. Shaqaaluhu waa inay adeegsadaan falcelinadan si tartiib tartiib oo heerar koraayo. | | | • Mid ka mid cawaaqibta kor ku xusan<br>• Ceyrinta mudo gaaban |

***Liiska faragelinta hagida ma ahan mid dhameystiran. Xulashooyin kale oo taageera ardayda gudaha fasalka iyo dugsiga iyada oo aan laga saarayn deegaanka waxbarashada waa la tixgelin karaa iyo la adeegsan karaa.**

| NIDAAMKA TUSMADA | | | |
|---|---|---|---|
| **Qaybta** | **Boga** | **Xeerka** | **Dhaqanka aan haboonayn** |
| WAXBARASHADA/ FASALKA | 28 | NS05 | Waxbarasho Daacad la'aan (tusaale ahaan, khiyaano ama koobi gareyn) |
| | 28 | NS01 | Qashqashaadka Fasalka |
| | 28 | NS09 | Dhaqanka Ixtiraam la'aanta Ee Shaqalaha Iskoolka |
| | 28 | NS15 | Isticmaalka Qalabka Elektarooniga Waqtiga Aan La Ogolayn |
| | 28 | NS15 | Isticmaalka Qalabka Dugsiga Ogolaansho La'aan |
| AAN WAXBARASHADA AHAYN/ MAAMULKA | 29 | NS02 | Maqnaanshaha |
| | 29 | NS12 | Jarjaritaanka Fasalka |
| | 29 | NS20 | Xadgudubka Xeerka Labisk |
| | 29 | NS8 | Xadgudubka Baska |
| | 29 | NS04 | U Hogaansami La'aanta |
| | 29 | NS01 | Dhaqan Xumo Meelaha Waxbarashada Ka Baxsan |
| | 30 | NS17 | Kicinta ama Ka Qayb Qaadashada Foodo |
| RABSHADA/ DASA | 31 | NS07 | Dagaal |
| | 31 | NS03 | Weerar Arday (Dhaawac La'aan) |
| | 31 | NS18 | Taabasho Aaan loola Jeedin ee Shaqaalaha Dugsiga |
| | 31 | SSEC3 | Weerar |
| | 32 | NS21 | Dhaawac Jiro o Xun |
| | 32 | SSEC1 | Dil |
| | 32 | NS13 | Anshax Xumada Galmada |
| | 32 | SSEC2 | Dambi Galmo |
| | 33 | SSEC5a | Dhacdooyinka Takoorka, Xadgudubka iyo Caatinta (Marka laga reebo Caatinta Internetka) |
| | 33 | SSEC5b | Caatinta Internetka |
| DAROOGADA/ MAANDOORIYADA | 34 | SSEC10 | Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Khamriga |
| | 34 | SSEC9 | Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Daroogada |
| | 35 | NS20 | Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Walxaha Neefsashada |
| SHARCIGA/ XEERKA | 36 | NS16 | Khamaarka |
| | 36 | SSEC7 | Digniin Been Ah (Kicinta Digniinta Dabka) |
| | 36 | NS19 | Bilaabista Dabka/Gubista |
| | 36 | NS06 | Dhibaato Hanti, ay ku jirto Sawir Gacmeed |
| | 36 | NS10 | Xaditaan |
| | 37 | NS11 | Gelitaan Aan La Ogoleyn |
| | 37 | SSEC6 | Hanjabaad Bombo |
| | 37 | SSEC8 | Hanjabaad Rabshad Dugsiga (Aan ahayn Bambo ama Digniin Been Ah) |
| | 37 | SSEC4 | Haysashada Hubka |
| | 37 | NS14 | Haysashada Wax La Mid ah Hub |

| WAXBARASHADA/FASALKA | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS05 – Waxbarasho Daacad la'aan (tusaale ahaan, khiyaano ama koobi gareyn)** | | | | | |
| khiyaano ama koobi gareyn | ✓ | ✓ | | | |
| **NS01 – Qashqashaadka Fasalka*** | | | | | |
| Ku hadalka fasalka aan xiligiisa ahayn; tuurista shayada; dhibaataynta, kaftanka, ama mashaqaynta ardayda kale iyo dhaqamada kale ee carqaladeynaya waxbarashada ardayda; ciyaar aan haboonayn. | ✓ | ✓ | | | |
| **NS09 – Dhaqanka Ixtiraam la'aanta (Ee Shaqalaha Iskoolka)** | | | | | |
| Isticmaalka aflagaado hadal ah ama hoos u dhigid; beenta, timaam khaldan ama siinta xog khaldan. | ✓ | ✓ | | | |
| Hanjabaad Dhaawac jirka ah (Fasalada K ilaa 6). | ✓ | ✓ | | | |
| Hanjabaad Dhaawac jirka ah (Fasalada 7 ilaa 12). | ✓ | ✓ | ✓ | | |
| **NS15 – Isticmaalka Qalabka Elektarooniga Waqtiga Aan La Ogolayn** | | | | | |
| Isticmaalka taleefanada gacanta, Ipad yada, kombiyuutarada, ciyaaraha internetka, tooshashka dhibacda, PDAs, iPods, iyo qalabyada kale ee elektrooniga. *Marka ugu horeysa ee uu ardaygu jabiyo xeerka, waa in kaliya loo digaa. Kaliya kadib jabinta koowaad ayaa laga qaadi karaa talaabooyin Heerka 1. Marka xadgudubka labaad dhaco, waa in waalidka lala socodsiiyo.* | ✓ | ✓ | | | |
| **NS15 – Isticmaalka Qalabka Dugsiga Ogolaansho La'aan** | | | | | |
| Isticmaalka tignoolajiyada dugsiga iyo qalabka isgaarsiinta. | ✓ | ✓ | | | |

**Hadii carqaladeyntu ay ku jirto dhaqan xadgudub, hanjabaad, ama rabshad, fadlan tixraac qaybahaas ee Xeerka Anshaxa si loo qaato talaabooyinka ku haboon.**

| AAN WAXBARASHADA AHAYN/MAAMULKA | | | |
|---|---|---|---|
| DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA | | | |
| FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS02 – Maqnaanshaha** | | | | | |
| Daahitaan la sharaxin ama ka maqnaansho iskoolka. | ✓ | X | X | X | X |
| Maqnaansho joogto ah ama xad dhaaf leh ee dugsiga. | ✓ | Faragelin hagid kaliya | X | X | X |
| **NS12 – Jarjaritaanka Fasalka** | | | | | |
| Ku guuldareysiga soo xaadirista fasalka jadwalka ku qoran. | ✓ | Faragelin hagid kaliya | X | X | X |
| **NS20 – Xadgudubka Xeerka Labisk** | | | | | |
| Tixraac heerarka xeerka labiska ee ku qoran Lifaaqa A. | ✓ | Faragelin hagid kaliya | X | X | X |
| **NS8 – Xadgudubka Baska*** | | | | | |
| Foodeyn xoogan ee baska (dhaqan sababa in darawalku joojiyo baska). | X | ✓ | Ceyrinta KALIYA Baska | Ceyrinta KALIYA Baska | X |
| **NS04 – U Hogaansami La'aan (tusaale: Diidka Amarka Shaqaale Dugsiga –Rabshad La'aan /Jir La'aan)** | | | | | |
| Diidka in la raaco tilmaamaha shaqaalaha dugsiga ee awoodda leh. | ✓ | ✓ | X | X | X |
| Diidka in la baaro (Fasalada 7 ilaa 12). | ✓ | ✓ | ✓ | X | X |
| **NS01 – Dhaqan Xumo Meelaha Waxbarashada Ka Baxsan (tusaale: hoolka, qolka cuntada, jaranjarada)** | | | | | |
| Ordaya, samaynta buuq xad dhaaf leh, tuuritaanka shay; daandaansi, dhibaateyn, ama kaftam ee ardayda kale. | ✓ | ✓ | X | X | X |
| Ku guuldareysiga raacida tilmaamaha, taasoo keeni karta hanjabaad dhaawac qof kale ah ama si toos ah u horseedi karta dhaawac dadka kale (Fasalada K ilaa 6). | ✓ | ✓ | X | X | X |
| Ku guuldareysiga raacida tilmaamaha, taasoo keeni karta hanjabaad dhaawac qof kale ah ama si toos ah u horseedi karta dhaawac dadka kale (Fasalada 7 ilaa 12). | ✓ | ✓ | ✓ | X | X |

***Ogeysiis: Ardayda Naafada ah, ganaaxida gaadiidka ama ka saarista gaadiidka gaarka ah ee ay Degmada bilowdo waxay noqon kartaa ka saarida waxbarasho. Sidaas darteed, habraacyo gaar ah oo cadaaladeed ayaa khusayn kara – Eeg Lifaaqyada C iyo D.**

| AAN WAXBARASHADA AHAYN/MAAMULKA | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS17 – Kicinta ama Ka Qayb Qaadashada Foodo** | | | | | |
| Sababida foodo weyn oo wax u dhimaysa jawiga nidaamka iyo anshaxa dugsiga ee lagama maarmaanka u ah waxbarasho waxtar leh, marka laga reebo foodo fasalka ah, ama hor istaagid (Fasalada K ilaa 6). | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Sababida foodo weyn oo wax u dhimaysa jawiga nidaamka iyo anshaxa dugsiga ee lagama maarmaanka u ah waxbarasho waxtar leh, marka laga reebo foodo fasalka ah, ama hor istaagid (Fasalada 7 ilaa 12). | | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Isticmaalka qalab isgaarsiineed shaqsi ahaan loo leeyahay si loo soo jiito dad kale inay ka qayb qaataan ama ay ku marqaati furaan foodo (Fasalada K ilaa 6). | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Isticmaalka qalab isgaarsiineed shaqsi ahaan loo leeyahay si loo soo jiito dad kale inay ka qayb qaataan ama ay ku marqaati furaan foodo (Fasalada 7 ilaa 12). | | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Isticmaalka qalab isgaarsiineed shaqsi ahaan loo leeyahay si loo muujiyo, loo xayeysiiyo, ama loo faafiyo foodo (sida duubista foodada, gelitaanka baraha bulshada, ama dirista muuqaalo dadka kale, iwm) (Fasalada K ilaa 6). | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | |
| Isticmaalka qalab isgaarsiineed shaqsi ahaan loo leeyahay si loo muujiyo, loo xayeysiiyo, ama loo faafiyo foodo (sida duubista foodada, gelitaanka baraha bulshada, ama dirista muuqaalo dadka kale, iwm) (Fasalada 7 ilaa 12). | | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | |

| RABSHADA/DASA | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS07 – Dagaal** | | | | | |
| Dagaal Gacan ka hadal ee Arday Kale (tusaale, riixid ama tuuris). | ✓ | ✓ | | | |
| Dagaal Yar (waxaa ku jiri karo dhacdooyin keena dhaawacyo yaryar). | ✓ | ✓ | ✓ | | |
| **NS03 – Weerar Arday (DHAAWAC LA'AAN)<br>(tusaale ahaan: garaacid, laadid, ama feerid arday kale iyada oo digniin haysanin ama aan wax kicinin)** | | | | | |
| Dhaawac la'aan (mala arko wax dhaawac jir ama muuqaal ah; waxaa ku jira dhacdooyinka rabshadaha qoyska ama khilaafaadka xiriirka). | ✓ | ✓ | ✓ | | |
| **NS18 – Taabasho Aaan loola Jeedin ee Shaqaalaha Dugsiga** | | | | | |
| Taabasho aaan loola jeedin shaqaalaha dugsiga | ✓ | ✓ | | | |
| **SSEC3 – Weerar<br>(si kas ama taxdar la'aan oo sababo dhaawac geysto, iyadoo la adeegsanayo ama aan la adeegsan hub halis ah ama qalab khatar ah)** | | | | | |
| Weerar lagu qaadayo shaqaalaha dugsiga; weerar jir ahaan lagu shaqaale ka tirsan Dugsiyada Magaalada Rochester ama qof kale oo weyn (da'da 9 iyo ka hooseeya). | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | |
| Weerar jir ah (da'da 9 iyo ka hooseeya). | | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada | |
| Weerar lagu qaadayo shaqaalaha dugsiga; weerar jir ahaan lagu shaqaale ka tirsan Dugsiyada Magaalada Rochester ama qof kale oo weyn (da'da 10 iyo ka weyn). | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Weerar jir ah (da'da 9 iyo ka weyn). | | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |

| **RABSHADA/DASA** | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS21 – Dhaawac Jiro oo Xun** | | | | | |
| Si kas ahayn keenista halis weyn oo dhimasho ama sababa dhaawac joogto ah ama muuqaal xumo daran, luminta dhaqdhaqaaqa shaqada qayb ka mid ah jirka, ama curyaaminta shaqada qayb ka mid ah jirka. | | | ✓ | ✓ | ✓ |
| Si kas ah keenista halis weyn oo dhimasho ama sababa dhaawac joogto ah ama muuqaal xumo daran, luminta dhaqdhaqaaqa shaqada qayb ka mid ah jirka, ama curyaaminta shaqada qayb ka mid ah jirka. | | | | ✓ | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA |
| **SSEC1 – Dil** | | | | | |
| Dhaqan kasto oo rabshad ah oo si kas ah loo sameeyay oo keena dhimashada qof kale | | | | ✓ | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA |
| **NS13 – Anshax Xumada Galmada** | | | | | |
| Xadgudub galmo (tusaale, galmo oo aan la rabin, codsiyo galmo, hadal, qoraal, ama taabasho aan haboonayn oo xiriir la leh galmo, ama muuqaal xun oo ceeb ah). | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| Dhaqan galmo oo wada ogaal ah (Fasalada K ilaa 12) | ✓ | ✓ | ✓ | | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| **SSEC2 – Dambi Galmo** | | | | | |
| Galmo qasab ah (isticmaalka jirka xoog, hanjabaad oo waxyeelo si loogu qasbo in qofku aqbalo) (Fasalada K ilaa 6) **(Xiriir galmo oo aan la rabin, oo ay ku jirto taabasho xubnaha taranka iyadoon la adeegsanaynin xoog)** | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA |
| Galmo qasab ah (isticmaalka jirka xoog, hanjabaad oo waxyeelo si loogu qasbo in qofku aqbalo) (Fasalada K ilaa 12) **(Xiriir galmo oo aan la rabin, oo ay ku jirto taabasho xubnaha taranka iyadoon la adeegsanaynin xoog)** | | | | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA |

**RABSHADA/DASA**

**DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA**

**FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE**

| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |
|---|---|---|---|

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **SSEC5a – hacdooyinka Takoorka, Xadgudubka iyo Caatinta (Marka laga reebo Caatinta Internetka)** | | | | | |
| Xadgudub Yar (tusaale, hadalo takoorka muujinaya). **Warbixinta Sharciga Karaamada Ardayda oo Dhan (DASA) ayaa la gudbin karaa.** | ✓ | ✓ | ✓ | | |
| Dhaqan kas ama taxader la'aan (ku jiro hadal ama qoraal hanjabaad, cabsi gelin, ama ceebeyn) oo laga yaabo inuu si weyn u foodeeyo nidaamka iyo kala dambeynta dugsiga. **Warbixin Sharciga Karaamada Ardayda oo Dhan (DASA) waa in la gudbiyaa.** | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Taabasho jir kas ah in lagu ceebyeeyo, loogu hanjabo, ama lagu cabsi geliyo, taasoo si weyn u foodeyn karta nidaamka iyo hawlaha dugsiga. **Warbixin Sharciga Karaamada Ardayda oo Dhan (DASA) waa in la gudbiyaa.** | | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Caatin xoogan iyo/ama xadgudub joogto ah (tusaale ahaan, dhaqamo taban oo si kas ah loogu celceliyo mudo dheer kuwaasoo si weyn u saameeya awooda arday kale ee ka qayb qaadashada ama ka faa'iidaysiga waxbarashada dugsiga ama barnaamijyada dheeraadka ah; ama dhacdooyin xoogan oo gooni ah sida dhaqamo hanjabaad ah oo arday ka dhigaya inuu ka baqo dhimasho ama dhaawac culus, ceebeynta, takoorka, ama dhaqano loogu talagalay in ardayga kale lagu dilo ceeb bulsho).**Warbixin Sharciga Karaamada Ardayda oo Dhan (DASA) waa in la gudbiyaa.** | | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| **SSEC5b – Caatinta Internetka** | | | | | |
| Caatin ama dhibaateyn qaab kasta oo isgaarsiineed oo elektaroonik ah (sida ku cad Xeerka Waxbarashada §11[8]), oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, taleefanada gacanta, kumbuyuutarada, Ipad yada, iyo qalabka kale ee isgaarsiinta, oo ay ku jiraan bogaga warbaahinta bulshada, fariimaha qoraalka, qolalka sheekeysiga, iyo website yada.**Warbixin Sharciga Karaamada Ardayda oo Dhan (DASA) waa in la gudbiyaa.** | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |

| DAROOGADA/MAANDOORIYADA | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA | | | | | |
| FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE | | | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |
| **DHAQANKAAAN HABOONAYN** | **HEERKA 1** | **HEERKA 2** | **HEERKA 3** | **HEERKA 4** | **U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH** |
| **SSEC10 – Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Khamriga*** | | | | | |
| Hoos yimaada saameynta (baaritaan ayaa la sameyn doonaa si go'aan loo gaaro). Shaqaalaha caafimaad waa in isla markiiba la ogeysiiyo hadii arday la helo isagoo hoos yimaada saameynta ama isticmaalaya walxaha neefsashada. | | U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | | | |
| Haysta | ✓ | U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Qaybinaayo ama gadaayo | | | ✓ | ✓ | ✓ |
| **SSEC9 – Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Daroogada*** | | | | | |
| Hoos yimaada saameynta (baaritaan ayaa la sameyn doonaa si go'aan loo gaaro). Shaqaalaha caafimaad waa in isla markiiba la ogeysiiyo hadii arday la helo isagoo hoos yimaada saameynta ama isticmaalaya walxaha neefsashada. | | U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | | | |
| Haysta | ✓ | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Qaybinaayo ama gadaayo | | | ✓ | ✓ | ✓ |

***Dhamaan ardayda lagu ogaado ama hoos yimaada saameynta khamriga, daroogada, maandooriyaha la xakameeyo, ama walxaha neefsashada, waxaa looga baahan yahay in la sameeyo qiimeyn lagu go'aaminayo baahida ka hortaga, daaweynta, ama adeegyada caafimaad, waxaana loo baahan yahay in si degdeg ah loola xiriiro adeegyada ku haboon iyada oo loo marayo shaqaalaha taageerada dugsiga ee la aqoonsan yahay, sida kalkaaliso, shaqaale bulsho, lataliye, ama maamulaha waqtiga dhacdada.**

| DAROOGADA/MAANDOORIYADA | | | |
|---|---|---|---|
| DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA | | | |
| FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS20 – Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Walxaha Neefsashada*** | | | | | |
| Hoos yimaada saameynta (baaritaan ayaa la sameyn doonaa si go'aan loo gaaro). Shaqaalaha caafimaad waa in isla markiiba la ogeysiiyo hadii arday la helo isagoo hoos yimaada saameynta ama isticmaalaya walxaha neefsashada. | | U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | | | |
| Haysta | ✓ | ✓ | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ IYO U Gudbi Adeegyada Taageerada Ardayga ee RCSD / Ururada Bulshada | ✓ |
| Qaybinaayo ama gadaayo | | | ✓ | ✓ | ✓ |

***Dhamaan ardayda lagu ogaado ama hoos yimaada saameynta khamriga, daroogada, maandooriyaha la xakameeyo, ama walxaha neefsashada, waxaa looga baahan yahay in la sameeyo qiimeyn lagu go'aaminayo baahida ka hortaga, daaweynta, ama adeegyada caafimaad, waxaana loo baahan yahay in si degdeg ah loola xiriiro adeegyada ku haboon iyada oo loo marayo shaqaalaha taageerada dugsiga ee la aqoonsan yahay, sida kalkaaliso, shaqaale bulsho, lataliye, ama maamulaha waqtiga dhacdada.**

| **SHARCIGA/XEERKA** | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| **DHAQANKAAAN HABOONAYN** | **HEERKA 1** | **HEERKA 2** | **HEERKA 3** | **HEERKA 4** | **U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH** |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS16 – Khamaarka** | | | | | |
| Codsanaayo isticmaalka lacag ama badeecooyin isweydaarsi. | ✓ | ✓ | | | |
| **SSEC7 – Digniin Been Ah (Kicinta Digniinta Dabka)** | | | | | |
| Fasalada K ilaa 6 | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | **Waa in la Wargiliyaa Waaxda Dab Damiska.** |
| Fasalada 7 ilaa 12 | | ✓ | ✓ | ✓ | **Waa in la Wargiliyaa Waaxda Dab Damiska.** |
| **NS19 – Bilaabista Dabka/Gubista** | | | | | |
| Bilawga dab; burbur hantiyeed oo ka dhasha bilawga dabka. | | ✓ | ✓ | ✓ | **WAA** IN LA WARGELIYAA WAAXDA DAB DAMISKA<br>Xeerka Dabka NYS §401.3 |
| **NS06 – Dhibaatayn Hanti, ay ku jirto Sawir Gacmeed** | | | | | |
| Qasaaro yar ama taxadir la'aan (ka hooseeya $50). | ✓ | ✓ | | | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Qasaaro kas ah ee qof kale ama hantida iskoolka ($50 ilaa $250). | | ✓ | ✓ | | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Qasaaro kas ah ee qof kale ama hantida iskoolka (Ka badan $250). | | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| **NS10 – Xaditaan** | | | | | |
| Qaadashada hanti aan qofkaas lahayn. (Fasalada K–6). | ✓ | ✓ | ✓ | | |
| Qaadashada hanti aan qofkaas lahayn. (Fasalada 7–12) | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |

| SHARCIGA/XEERKA | | | |
|---|---|---|---|
| **DHAQAMADA AAN HABOONAYN, FOODEYNTA, IYO HEERARKA JAWAABTOODA** | | | |
| **FURAHA: ISTICMAAL HEERKA UGU HOSEEYA MARKA HORE** | | | |
| **Heerka 1**: Taageerada Fasalka iyo Kooxda Taageerada Ardayga – waxa uu ku habboon yahay marka ardaygu aanu lahayn wax dhacdooyin hore ah iyo marka aan tallaabooyin hore la qaadin. | **Heerka 2:** Shaqaalaha Taageerada Xoogan iyo Maamulka Ku Haboon – waxa uu ku haboon yahay marka taageerooyin la siiyay fasalka si loo xaliyo dhaqanka, laakiin dhaqankaasi uu sii wado inuu si xun u saameeyo waxbarashada ardayda iyo dadka kale. | **Heerka 3:** Ceyrin waqti gaaban – waxa uu ku haboon yahay marka talaabooyin iyo taageerooyin la siiyay, balse dhaqanka uu sii xumaanayo (dembiyo soo noqnoqda). | **Heerka 4:** Codsi Ceyrin Waqti Dheer. |

| DHAQANKAAAN HABOONAYN | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | U GUDBINTA CIIDAMADA AMAANKA TALO, LEEXIN, AMA TALAABO DHEERAAD AH |
|---|---|---|---|---|---|
| **NS11 – Gelitaan Aan La Ogoleyn** | | | | | |
| Joogitaanka hantida dugsiga ogolaansho la'aan | | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Joogitaanka hantida dugsiga iyadoo la ceyriyay ama la ganaaxay. | | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| Jibinta iyo Gelida | | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ |
| **SSEC6 – Hanjabaad Bombo (Fariin telefoon, qoraal, ama elektaroonik ah oo sheegaysa in bambo, qarax, ama hub kiimiko ama nool la geliyey ama la gelin doono dhulka dugsiga.)** | | | | | |
| K ilaa fasalada 6 | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | |
| Fasalada 7 ilaa 12 | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| **SSEC8 Hanjabaad Rabshad Dugsiga (Aan ahayn Bambo ama Digniin Been Ah) (Fariin afka, telefoon, qoraal, ama elektaroonik ah oo hanjabaad rabsho dhulka dugsiga ama dhacdo la xiriirta dugsiga.)** | | | | | |
| K ilaa fasalada 6 | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | |
| Fasalada 7 ilaa 12 | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | ✓ Qiimeynta Hanjabaada | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |
| **SSEC4 – Haysashada Hubka** | | | | | |
| Firearms (haynta hub sida ku qeexan 18 USC 921 ee xeerka federaalka – tusaale ahaan, bamka gacanta, rasaasta, qoryaha, iyo bamamka) Ganaax waxbarasho oo ka yarayn hal sano ee jadwalka ayaa waajib ah sharci ahaan marka lagu xadgudbo sharciyada hubka, balse waxaa lagu bedeli karaa kiiskiiba kiis iyadoo ogolaansho laga helaayo Madaxa Dugsiga Degmada Magaalada Rochester (Xeerka Waxbarashada §3214(3)(d)). | | | | ✓ | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA<br><br>Xeerka Waxbarashada §3214(3)(d) |
| Qoryo kale ama hubyo dhaawac jir keeni kara (tusaale ahaan, qoryaha BB, qoryaha buufiska, mindiyaha, qoryaha rinjiga, qalabka aamusan, ama hub kale oo dhaawac culus keeni kara ama u eg hub). | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | **WAA** IN LOO SHEEGAA CIIDAMADA AMAANKA |
| **NS14 – Haysashada Wax La Mid ah Hub** | | | | | |
| Haysashada agab u eg qori ama hub balse aan u badnayn inuu dhaawac keeno (tusaale ahaan, qoryaha biyaha, qoryaha ciyaarta, qoryaha BB ga ee aan xabada ku jirin ama shaqeyneynin, iyo qoryaha caaga). | ✓ | ✓ | ✓ | ✓ | Waa la isticmaali karaa hadii uu ogolaado Madaxa Dugsiyada |

## Xeerarka Amaanka Ku Saleysan Iskuulka

Dhamaan dhismayaasha Degmada waxay leeyihiin xeerar amni oo loo dejiyay in lagu maareeyo arimaha la xiriira amaanka dhismayaasha iyo u diyaar garowga xaaladaha degdega ah. Dhismayaasha qaarkood waxay yeelan karaan xeerar anshax oo dheeraad ah oo kabaya *Xeerka Anshaxa* ee Degmada. Ardayda, shaqaalaha Degmada, iyo booqdayaasha dhamaantood waxaa laga filayaa inay u hogaansamaan xeerarka dhismaha, iyo sidoo kale xeerar dheeraad ah oo loo dejiyay si looga jawaabo digniinaha ay soo saaraan Waaxda Amaanka Gudaha ee Mareykanka, hay'adaha sharciga fuliya, ama hay'adaha kale ee dawladda ee leh awood sharciyeed, ayna ka qeyb qaataan abuurista deegaan amaan ah.

## Warbixinta Xadgudubyada

Dhamaan ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay si degdeg ah ugu soo waramaan jebinta Xeerka Anshaxa iyagoo la xiriiraya macalin, lataliye, Madaxa Dhismaha ama qofka uu xilkiisa u xilsaaray. Hadii arday uu arko qof wata hub, khamri ama walax sharci daro ah gudaha dugsiga ama xaflad dugsiyeed, waa in uu si degdeg ah ugu soo wargeliyaa macalin, Madaxa, qofka uu Madaxu u xil saaray, maamule dhisme/barnaamij ama Madaxa Guud ee Dugsiyada. Aqoonsiga qofka soo sheegaya xogta waa la ilaalin doonaa intii suuragal ah.

Dhamaan shaqaalaha Degmada ee loo ogol yahay inay qaadaan talaabooyin anshaxeed waxaa laga filayaa inay si degdeg ah, cadaalad ah, oo sharci ah u fuliyaan. Shaqaalaha aan loo ogolayn in ay ciqaab toos ah saaraan waxay waajib ku tahay inay si degdeg ah ugu warbixiyaan jebinta Xeerka Anshaxa kormeerahooda, kaas oo hadii uu leeyahay awooda ku habboon, saari doona ciqaabta ku haboon ama wuxuu u gudbin doonaa qof kale oo leh awooda ku haboon si uu u qaado talaabada anshaxeed ee loo baahan yahay.

## Dhaqangelinta Sharciga Burista Ardayda iyo Habraaca Sharciga

Maamulaha ama qofka uu magacaabo waa inay mas'uul ka ahaadaan fulinta Xeerka Anshaxa. Marka Maamulaha ama wakiilkiisa uu arko ama loo sheego in qof uu ku jiro dhaqan mamnuuc ah, taasoo ay iyagu u arkaan inaysan halis degdeg ah ku ahayn dadka ama hantida, Maamulaha ama wakiilkiisu wuxuu qofkaas u sheegaa in ficilkaas yahay mid mamnuuc ah, wuxuuna isku dayaa inuu ku qanciyo inuu joojiyo. Sidoo kale, Maamulaha ama wakiilkiisu wuxuu qofka uga digi karaa cawaaqibka ka dhalan kara hadii uusan joojin, taasoo lagu faahfaahiyay qaybta shaxda ee Xeerka Anshaxa.

Hadii qofku uu diido inuu joojiyo dhaqanka mamnuuca ah, ama hadii dhaqan qabadkiisa — sida uu Maamulaha ama wakiilkiisu u arko oo uu go'aansado — uu khatar degdeg ah ku yahay amaanka dadka, hantida, ama kala dambeynta guud, Maamulaha ama wakiilkiisu waa inuu si degdeg ah uga saaraa qofkaas dhismaha dugsiga ama goobta munaasabada dugsiga. Waxa kale oo uu wici karaa booliska hadii uu u arko in loo baahdo in laga caawiyo saarka qofkaas.

Degmada waxay bilaabi kartaa talaabo edbin ah oo dhanka arday kasta ama shaqaale kasta, iyadoo ku saleysan xeerarka sharciga ee khuseeya, iyo marka ay ku timaado shaqaalaha, heshiiska wadajirka ah ee shaqada hadii uu jiro. Sidoo kale, Degmadu waxay xaq u leedahay inay raacdo talaabo sharci ah – ha ahaato mid madani ah ama ciqaabeed – ee qof kasta oo ku xadgudba *Xeerka Anshaxa*.

## Qalabka Elektarooniga Ardayda

Qalabka elektarooniga ee ardayga waxaa laga qaadi karaa iyadoo la raacayo habraacyada dugsiga hadii Maamuluhu go'aamiyo in hayntiisu ay carqaladaynayso ama mashquulinayso jawiga waxbarasho. Qalabka elektarooniga waxaa ka mid ah: taleefanada gacanta, taleefanada casriga ah, ciyaaryahanada mp3, iPods, iPads, Kindles, Nooks, PDAs, kombuyuutaro, qalabka fariimaha gaaban, qalabka duubista, ciyaaraha iyo qalab kale oo la qaadan karo. Qalabka la qaaday waa in si sax ah loo aqoonsadaa lahuna kaydiyaa meel qufulan. Dugsigu wuxuu yeelanayaa nidaamyo kaydin iyo soo celin oo la soconaayo siyaasadan. Sheegasho kasta oo ku saabsan

qalab lumay oo sababtu tahay dugsiga oo aan u hogaansamin siyaasadan waa in laga bixiyaa lacagta iskoolka.

Iyadoo la raacayo tilmaamaha dowlada iyo si loo hubiyo daacadnimada imtixaanka, ardayda looma ogola inay la soo galaan fasalada ama goobaha imtixaanada taleefanada gacanta ama qalab elektaroonig kale inta lagu jiro qaadashada imtixaanada NYS ama imtixaanada kale ee la xiriira.

Kormeerayaasha imtixaanada, ilaalayaasha iyo mas'uuliyiinta dugsiga waxay xaq u leeyihiin inay ka qaadaan taleefanada gacanta iyo qalabyada kale ee elektarooniga ah ee mamnuuca ah ka hor inta aan imtixaanka la bilaabin, isyo ay hayaan inta uu imtixaanku socdo. Arday kasta oo wata taleefan gacan ama qalab kale oo elektaroonig ah oo aan dhiibin waa in laga diidaa gelitaanka imtixaanka.

Ardayda leh Qorshayaasha Waxbarasho ee Shaqsiyeed (IEP), Qorshayaasha 504, ama dukumentiyo ka yimid dhakhtar oo si gaar ah u ogolaanaya isticmaalka qalabka elektarooniga ah, waxay isticmaali karaan sida ugu xusan shuruudahaas.

## Qalabka Kumbuyuutarka Degmada/Website yada/Email ka Ay Isticmaalaan Qof Kasta [5]

Qof kasta oo adeegsanaya fakisyada, qalabka kombiyuutarada, ama barnaamijyada softweerka ah ee ay Degmadu leedahay, kiraysatay, ama ay maamusho, ama website yada, emailka, ama gelitaanka internet ka ee ay bixiso Degmadu, ma laha wax filasho macquul oo sir ah isticmaalka qalabkaas, softweerkaas, website yadaas, email yadas, ama internet kaas. Qofna looma ogola inuu ku daro barnaamij ama qalab dheeri ah (oo ay ku jiraan aaladaha wireless ka) qalab kasta oo ay Degmadu leedahay, kireysatay ama maamusho, iyada oo aan ogolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Maareynta Xogta iyo Tiknoolajiyada ee Degmada; sidoo kale, qofna looma ogola inuu u isticmaalo software gaar ah oo xiran ee qalabka Degmada, hadii aan la haysan ruqsad sax ah oo ogolaanaysa isticmaalka software ka qalabkaas; sidoo kale, qofna looma ogola inuu ugu furo qalabka Degmada fayrasyo, dircusho ama wax kale oo halis u ah tiknoolajiyada. Ma loo agola in qof isticmaala qalabka degmada uu u adeegsado mashaariic ama raad raac internet oo aan ahayn kuwo waxbarasho ama shaqo, hadii isticmaalkaasi noqdo mid xad dhaaf ah ama xadgudub ah, maadaama ay taasi hoos u dhigto ama dhaawici karto hab maamuuska, taasoo ka dhigeysa in si fudud aan loogu heli karin adeegyada waxbarasho iyo shaqo ee Degmada. Degmadu waxay xaq u leedahay inay kormeerto isticmaalka qalabkeeda iyo barnaamijyadeeda, sidoo kale inay la socoto email yada, website yada, iyo isticmaalka internet ka ee laga sameeyo qalabka degmada ama laga isticmaalo gudaha dhismayaasha dugsiyada, iyada oo aan wax ogolaansho ama ogeysiis hore loo bixinin. Isticmaal kasta oo qalabka kombuyuutarka ee Degmada, barnaamijyadeeda, ama internet ka laga galo qalabka Degmada ama laga isticmaalo gudaha dhismayaasha dugsiga oo jebiya sharciyada federaalka ama kuwa gobolka, waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo hay'adaha fulinta sharciga ee ku haboon. Waxa kale oo uu keeni karaa talaabo anshaxeed iyo in laga mamnuuco isticmaalka mustaqbalka ee qalabkaas iyo adeega internet ka. Intaa waxaa dheer, Degmadu waxay qaadi kartaa talaabo sharci ah si ay u soo ceshato waxyeelo kasta, ganaax, ama ciqaab lacageed oo lagu soo rogay Degmada sabab la xiriirta jebintaas sharciyeed. Sidoo kale, isticmaal kasta oo qalab ama xarumo Degmadu leedahay oo lagu sameeyo xadgudub ka dhan ah *Xeerka Anshaxa* waxa uu keeni karaa talaabo anshaxeed iyo in laga mamnuuco isticmaalka qalabkaas iyo internet ka mustaqbalka.

## Hubka, Khamriga & Maandooriyeyaasha Sharcidarada ah

Qofka kaliya ee loo ogol yahay in uu qori sito gudaha hantida Degmada waa sarkaalka sharciga ee ku sugan goobta isagoo gudanaya waajibaadkiisa rasmiga ah, iyo sidoo kale qof kasta oo kale oo si cad loogu ogolaaday in uu qori la yimaado xarunta dugsiga iyadoo lagu saleynayo awood sharciyeed oo qeexan ama ogolaanshaha tooska ah ee Gudiga Waxbarashada.

Hub kasta, khamri, ama walax sharci daro ah oo laga helo hantida Degmada ama qof kasta oo ku haysta gudaha

[5] Tixraac isdhaafsan.: *Isticmaalka La Aqbali Karo ee Shabakada Degmada* (1950)
Xeerka Internet ka (4526)

hantida Degmada, waa in si degdeg ah loo qabtaa hadii ay suurta gal tahay. Hadii walxahaasi ay haystaan arday, qabashada waxaa raaci doona ogeysiis waalidka ardayga iyo ciqaabta anshaxa ee ku haboon, taasoo ka mid noqon karta hakinta joogtada ah iyo gudbinta dacwada. Hadii walxaha lagu helo shaqaale ama shaqaale ka tirsan Degmada, qofkaasi waxa uu wajahayaa ciqaab waafaqsan sharciga iyo heshiiska shaqo wadaaga ee khuseeya (hadii ay jirto), sidoo kalena waxa loo gudbin doonaa dacwad sharciyeed.

## Ceyrinta Ardayda iyo Habraaca Sharciga

Mararka qaarkood, arday waxa uu ku dhaqmi karaa hab dhaqan halis gelinaya amaanka dadka kale ee bulshada dugsiga ama si weyn u carqaladeynaya jawiga dugsiga, taasoo u baahan in laga saaro fasalka si ku meel gaar ah, hakis, ama ka reebitaan. Si kastaba ha ahaatee, qoraalada la gudbiyo ma aha in loo isticmaalo in lagu diiwaangeliyo taageerada la siiyay ardayda gudaha fasalka (tusaale, waqti qaadasho iyo talaabooyin kale oo aan rasmi ahayn). Eeg Lifaaqa F si aad u ogaato macnaha erayga "ka saarista."

Waxaa jira afar hab oo dugsiyadu ardayga uga saari karaan fasalka sababo anshax daro darteed:

1. Ka saarid ku meel gaar ah oo uu sameeyo macalinka (ilaa1/2 maalin ah)
2. Ceyrin gaaban ee maamulaha (1–5 maalmood), gudaha ama dibada dugsiga
3. Ceyrin mudo dheer oo uu go'aamiyo Madaxa Guud (6 ilaa 365 maalmood)
4. Ka saarid rasmi ah oo uu go'aamiyo Madaxa Guud

***Hababka anshax marinta*** waxay ka mid yihiin ceyrinta gudaha ama dibada dugsiga, ama qaab kasta oo ardayga looga saaro fasalka, taasoo keenta in ardaygu:

1. usan helin fursad uu si haboon ugu sii qaybqaato manhajka guud;
2. uusan helin adeegyada lagu cadeeyay Barnaamijkiisa Waxbarasho ee Shakhsiyeed (IEP); ama
3. usan sii wadin ka qaybgalka ardayda aan naafada ahayn sida uu ugu ka qayb qaadan lahaa booskiisa hada.

Tani waxaa ka mid ah in waalidka laga codsado inuu ardayga guriga geeyo si xaalada loo dejiyo, ama in ardayga loo diro "Goobta Caawinta" mudo dheer, taasoo loo tixgelinayo ceyrin iyo ay tahay in lagu dhaqmo nidaamka saxda ah ee sharciga.

Xaaladahan, ardaygu wuxuu leeyahay xaq uu ku maro habraac cadaalad ah, taasoo micnaheedu yahay in shaqaalaha dugsigu ay qaadaan talaabooyin ay ku baaraan dhacdada oo ay la hadlaan ardayga kahor inta aan laga saarin dugsiga. Habraac cadaalad ahi guud ahaan wuxuu ka koobanyahay in qofka la siiyo ogeysiis cad oo sheegaya sababta looga saarayo dugsiga iyo fursad uu ku sharxo aragtidiisa kahor inta aan go'aanka kama dambaysta ah la gaadhin. Waalidiinta waa in lagu wargeliyaa fal dhaqanka ardayga iyo talaabada edbin ee la qaadayo. Hadii laga saarayo mudo dheer, dugsigu waa inuu raacaa talaabooyin dheeraad ah. Ardayda naafada ah waxay xaq u leeyihiin habraac cadaalad dheeraad ah.

Si aad u aragto dhamaan talaabooyinka la waajibinayo, fiiri lifaaqyada C (Habraaca Cadaalada) iyo D (Ardayda Naafada ah).

## Ka Qaybgalka Joogtada ah Inta Lagu Gudajiro Ceyriska

Habraacyada ceyrinta waa in ugu yaraan ay ka mid noqdaan isgaarsiin joogto ah oo lala yeesho ardayga iyo qoyska ka hor, inta lagu jiro, iyo kadib ceyrinta; taageerooyin lagu xaqiijinayo in ardaygu uu la socdo waxbarashada; ka qaybgalka ardayga iyo qoyskiisa ee diyaarinta qorshaha guusha; iyo muujinta xiriir daryeel iyo wadajir ah oo ku saabsan bulshada ay ardaygu ka tirsan yahay.

## Waxbarashada Badalan [6]

Hadafka Degmada waa in la baro dhamaan ardayda si ay u gaaraan heerka ugu sareeya ee waxqabadkooda. Degmada waxay ka go'an tahay inay gaarto ama ka sareyso goolasha waxqabadka ee ay dejisay, iyo sidoo kale tilmaamaha waxqabadka ee ay dejisay Gobolka New York; sidoo kale waxay qaadi doontaa dhamaan talaabooyinka macquulka ah si loo hubiyo in ceyrinta aysan noqon sabab arday kasta u dib uga dhacaya gaarista goolalkaas.

Gudigu wuxuu ka filayaa ardayda, maamulka, macalimiinta, iyo waalidiinta inay dadaal kasta sameeyaan si loo ilaaliyo horumarka waxbarasho ee ardayga hadii laga saaro ama la ceyriyo, iyo inay taageeraan dib u soo celinta ardayga ee dugsiga iyo fasalka marka talaabada edbinta la dhameeyo.

Marka macalin ka saaro arday fasalka, ama arday ku jiro da'da qasabka ah ee waxbarashada laga joojiyo iyadoo la raacayo Xeerka Waxbarashada § 3214, Degmadu waxay qaadi doontaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo siiyo waxbarasho kale oo bedelan, sida ku xusan Xeerkan iyo sharciga khuseeya. Habka waxbarashada bedelan wuxuu ku xirnaan doonaa xaalada (tusaale, ceyrinta mudo gaaban ama mudo dheer ee gudaha ama banaanka iskuulka, ama ka saarista fasalka). Dhamaan xaaladaha, waxaa masuuliyad ka saaran shaqaalaha dhismaha dugsiga inay hubiyaan in arday kasta haysto shaqooyin waxbarasho oo diyaar u ah mudada laga saaray ama la ceyriyay; iyo marka uu ardaygu ku soo laabto fasalada caadiga ah, shaqooyinkaasi la keeno meesha loogu talagalay fursadaha lagu buuxin karo shaqooyinka maqnaanshaha cudur daaran. Ardayga ayaa leh masuuliyada dhamaystirka shaqooyinkaas, waxaana laga rabaa in hadii lagu wareejiyo goob kale ama la siiyo macalin gaar ah, inuu si joogto ah u xaadiro oo uu uga qeyb qaato waxbarashada sida ugu wanaagsan ee uu awoodo.

## Dib Usoo Noqoshada Iskuulka Kadib Ceyrinta

Kormeeraha ayaa diyaarin doona xeer ku saabsan habraaca dib u soo celinta ardayga kadib marka la ceyriyo.

## Baarista Ardayga

Gudiga Waxbarashada waxaa ka go'an in lagu sugo jawi amaan oo nidaamsan gudaha hantida dugsiga iyo hawlaha dugsiga. Si jawi noocaas ah loo xaqiijiyo, shaqaalaha dugsiga ee haysta ogolaanshaha in ay talaabo ciqaabeed qaadaan waxay xaq u leeyihiin in ay arday su'aalo weydiiyaan hadii lagu tuhmo in uu jebiyey Xeerarka Anshaxa ama sharciga.

Sidoo kale, Gudigu wuxuu ogol yahay in kormeeraha guud, madaxda dugsiyada, iyo saraakiisha amaanka ee Degmada ay baari karaan ardayda iyo agabkooda hadii mas'uulka dugsiga ee awooda u leh uu haysto shakina macquul ah oo sababa in baaristu keeni doonto cadeyn muujinaysa in ardaygu jebiyey *Xeerka Anshaxa* ama sharciga. Maamulaha ama sarkaalka amaanka oo ka shaqeynaya kormeer iyo hagid maamule kale ayaa sameyn kara baaritaan kooban oo aan si weyn u faragelinayn, sida taabashada banaanka boorsada buugaagta, xitaa hadii uusan jirin shaki macquul ah, hadii uu jiro sabab sharci ah oo suurtagal ka dhigaysa baaritaanka xadidan. Shaqaalaha kale ee dugsiga waxay samayn karaan baaritaan oo keliya marka ay jiraan duruufo aan suurta gal ka dhigayn in lala xiriiro kormeeraha guud, maamulaha dugsiga, ama sarkaalka amaanka.

Hadii ay suuragal tahay, masuulka dugsiga ee baaritaanka sameynaya waa inuu la tashadaa Madaxa Dugsiga ama Waaxda Sharciga si loo xaqiijiyo in laga shakisan yahay si macquul ah, sidoo kalena waa inuu qof weyn oo kale markhaati ka ahaadaa baaritaanka. Mar kasta oo ay suuragal tahay, kahor inta aan la baadhin ardayga ama alaabtiisa, masuulka dugsiga ee ogolaatay baaritaanka waa inuu marka hore weydiiyo ardayga hadii uu hayo

[6] Tixraac isdhaafsan.: Goolasha Waxbarasho (4000)
Xeerka Imaanshaha Ardayda iyo Ka Tegida Dugsiga (5100)
Tixraac.: Xeerka Waxbarashada §3214(3)(e)

cadayn muuqata oo muujinaysa inuu jabiyey sharciga ama *Xeerka Anshaxa*, isla markaana ka codsado inuu si ikhtiyaari ah u dhiibo cadaaynta/qalabka ama ogolaado baaritaanka.

Baaritaanada waxaa lagu xadidi doonaa talaabooyinka lagama maarmaanka u ah helitaanka cadaynta la raadinayo. Marka ay suuragal tahay, baaritaanada waxaa lagu sameyn doonaa meel gaar ah ardayguna wuu joogi doonaa marka alaabtiisa la baadhayo.

Xeerarka ku saabsan baaritaanka ardayda iyo alaabtooda ma khuseeyaan sanduuqa ardayda, miisaska iyo meelaha kale ee kaydinta dugsiga. Ardaydu maku lahaan karaan sir meelahan, iyo masuuliyiinta dugsigu si buuxda ayey u maamuli karaan. Taas macnaheedu waa in saduuqa ardayda, miisaska iyo meelaha kale ee kaydinta dugsiga la baari karo waqti kasta iyada oo aan ardayda la ogeysiinin iyo ogolaansho la weydiisanin.

Baadhitaano waxaa lagu samayn karaa hantida dugsiga ama dhacdooyinka dugsiga, oo ay ku jiraan baadhitaanada sanduuqyada, qolalka hoteelada, gaadiidka ama goobaha kale ee ay ardaydu isticmaalaan inta lagu jiro safarada ay dugsigu qabanayo, ama dhacdooyinka ciyaaraha ama tacliinta, iyadoo xubnaha shaqada, kormeerayaasha, ama tababarayaasha ku lug leh hawshaas loo tixgelinayo inay leeyihiin awooda la mid ah tan uu leeyahay maamulaha dhismaha ama masuulka amaanka ee hantida dugsiga.
Baadhitaanka  ardayda ee dharka laga qaadayo si cad ayaa looga mamnuucay dhamaan xaaladaha hoos yimaada siyaasadan. "Baadhitaanka dharka laga qaadayo" waxaa loola jeedaa baadhitaan ardayga looga baahan yahay inuu iska siibo dhamaan dharkiisa.

Hadii maamulaha dugsiga ama qofka uu u xilsaaray go’aansado in ay jirto khatar degdeg ah oo ku wajahan amaanka ardayga ama dadka kale, waxaa qasab ah in lala xiriiro hay’adaha amniga si ay u farageliyaan.

Dhamaan xaaladaha, waa in la dhameystiraa warbixin ku saabsan duruufaha iyo natiijada baaritaanka. Wixii hanti khatar ah ama sharci daro ah sida hubka ama maandooriyaha oo laga helo intii uu socdo baaritaanka waa in loo gudbiyaa Agaasimaha Amniga iyo Badbaadada ama hay’adaha fulinta sharciga.

Mas’uuliyiinta dugsiga ee la ogolaaday ee baaritaanka sameeya waa inay si degdeg ah u diiwaangeliyaan macluumaadka soo socda ee ku saabsan baaris kasto:

1. Magaca, da’da iyo fasalka ardayga la baaray;
2. Sababaha faahfaahsan ee keentay baaritaanka;
3. Magaca qofka xogta bixiyay;
4. Ujeedada baaritaanka (tusaale ahaan, waxa la raadinayay);
5. Nooca iyo baaxada baaritaanka;
6. Qofka baaritaanka sameeyay iyo xilkiisa shaqo iyo booskiisa;
7. Marqaatiyaal, hadii ay jiraan, marka baaritaanka;
8. Waqtiga iyo goobta uu baaritaanku ka dhacay;
9. Natiijada baaritaanka (tusaale ahaan, wixii la helay);
10. Sida loo maareeyay waxyaabihii la helay;
11. Waqtiga, habka, iyo natiijada lagu wargeliyay waalidka.

Madaxa Iskuulka ama qofka uu magacaabay ayaa mas’uul ka ah ilaalinta, xakameynta iyo sida loo maareeyo walxaha halista ah ee laga qaaday ardayga, sidoo kale waa inuu si dhaqso ah ugu wareejiyaa walxaha sharci darada ah ama walxaha laga yaabo inay cadeyn u noqdaan dambiyo, Booliska Rochester ama hay’adaha kale ee sharci fulinta ee awooda leh. Madaxa Iskuulka ama qofka uu magacaabay waa inuu si cad u calaamadiyaa walxaha laga qaaday ardayga iyo ilaaliyaa ilaa inta walxahaasi la gaarsiinaayo hay’adaha sharci fulinta. Waxa kale oo uu masuul ka yahay in uu si shaqsi ahaan ugu geeyo walxaha halista ah ama sharci darada ah Agaasimaha Amniga iyo Ilaalinta ama hay’adaha sharciga.

## Nidaamyada Aqoonsiga Kumbuyuutarka iyo Baaritaanka Biraha Aan Qorshaysnayn[7]

Dhamaan dugsiyada sare (fasalada 7aad ilaa 12aad), nidaamyada baarista kombiyuutarada waa in loo adeegsadaa sidii lagu xoojin lahaa dadaalada kale ee amniga, iyo loo hubin lahaa inta suurtagalka ah in la yareeyo gelitaanka aan la oggolayn ee gudaha dugsiyada. Dhamaan ardayda waxaa laga rabaa inay haystaan kaarka aqoonsiga ardayga, isla markaana ay soo bandhigaan marka uu dalbado qof ka tirsan shaqaalaha Degmada. Nidaamyada baarista biraha, oo ay ku jiraan ulaha gacanta lagu hayo, albaabada baarista, iyo qalabka awooda u leh baarista raajada, waxaa isticmaali kara shaqaale tababaran oo ku sugan dugsi kasta si aan joogto ahayn, ama si joogto ah oo ku saleysan tuhun macquul ah. Dhamaan ardayda waxaa lagu sameyn karaa habraacyada baarista, waxaana laga qaadi karaa wixii walxo ah ee sharci, siyaasada dugsiga, ama xeerka mamnuucaya. Hadii ardaygu diido inuu baarista ama habka baaritaanka jirka ee la ogolaaday, waxaa loo yeeri doonaa shaqaalaha taageerada si ay u sameeyaan dhexdhexaadin iyo xalinta arinta. Hadii ardaygu sii wado diidmada, waxaa loo gudbin karaa talaabo anshaxeed.

## Taabashada Jirka ee Mamnuuca ah iyo Kan La Ogolyahay [8]

Ciqaabta jirka waa ficil kasta oo xoog jireed lagu saaro arday, ujeedadiisuna tahay in ardaygaas lagu ciqaabo. In arday kasta ciqaab jidheed loogu adeegsado shaqaale ka tirsan Degmada si adag waa laga mamnuucay.

Ciqaabta jirka waa ficil kasta oo xoog jireed ah oo lagu qaado arday, ujeedadiisuna tahay in ardaygaas lagu ciqaabo. In arday loo adeegsado ciqaab jidheed oo ay fuliyaan shaqaalaha Degmadu si adag ayaa loo mamnuucay. Si kastaba ha ahaatee, sida ku xusan 8 NYCRR 19.5(d)(2)(v), xaaladaha ay suuragal noqon weydo in la adeegsado habab iyo siyaabo kale oo aan ku lug lahayn isticmaalka xoog jireed, xeerarka gobolka ayaa ogolaanaya in xoog jireed oo macquul ah la adeegsado si:

1. In la difaaco nafta, arday kale, macalin, ama qof kasta oo laga ilaalinayo dhaawac jireed.
2. In la ilaaliyo hantida dugsiga ama tan dadka kale.
3. In la xakameeyo ama la buriyo arday oo dhaqankiisu carqaladaynayo fulinta iyo habsaminaayo socodka hawlaha, awoodaha, iyo waajibaadka Degmada Dugsiga, hadii ardaygaasi diido inuu ka waantoobo falal kale oo carqaladeyn ah.

Degmadu waxay dhamaan cabashooyinka la xiriira adeegsiga ciqaabta jirka u gudbin doontaa Gudoomiyaha Waxbarashada, iyadoo la raacayo xeerarka Gudoomiyaha.

## Xariga iyo Gudbinta Sharci Fulinta

Lifaaqa E ee siyaasadan waxa uu ka kooban yahay hagitaan dhamaystiran oo ku saabsan fulinta sharciga gudaha dugsiyada.
Xiritaanka la xiriira dhaqan gudaha dugsiga waa in loo adeegsadaa keliya xalka ugu dambeeyo marka ay jirto khatar dhab ah oo culus ee amaanka. Dhacdadu waa in la xaliyaa iyada oo aan la samayn xabsi intii suurtagal ah.

Si kastaba ha ahaatee, saraakiisha fulinta sharcigu waxay leeyihiin awood xadidan oo ay ku wareystaan ama ku baaraan arday gudaha dugsiyada ama hawlaha dugsiga, ama ay u adeegsadaan xarumaha dugsiga baaritaano dambiyeed. Iyadoo la raacayo Siyaasada Gudiga 5600 iyo Xeerka Kormeeraha 5600-R, saraakiisha fulinta sharciga waxay geli karaan hantida dugsiga ama goob hawleed dugsi si ay u wareystaan ama u baaraan arday ama u fuliyaan baaritaan dambiyeed oo arday ku lug leh oo keliya hadii ay haystaan:

1. Amar baaritaan ama amar xabsi; ama

[7] Cross-ref.: Safe Schools (8135)
[8] Ref.: 8 NYCRR §§19.5(a)-(d); 100.2(l)(3)(i)

2. Sabab macquul ah oo lagu rumaysan karo in dambi ka dhacay hantida dugsiga ama goob hawleed dugsi

Maamulaha dugsiga, ama wakiilka uu magacaabo, ayaa si degdeg ah ula xiriiri doona waalidka/mas'uulka marka saraakiisha fulinta sharcigu doonayaan inay wareystaan ama baaraan arday qayb ka ah baaritaan dambiyeed. Hadii aan la heli karin waalidka/mas'uulka, ama uu waalidku diido inuu ogolaado baaritaanka ama wareysiga, lama samayn karo baaritaan ama wareysi ardayga, hadii aan ardaygu ugu yaraan 18 jir ahayn ama ay jirto khatar degdeg ah oo amaanka. Marka ay suuragal tahay, waalidka/mas'uulka (ama maamulaha ama wakiilkiisa, hadii waalidka la waayo) ayaa joogaya inta lagu guda jiro wareysi ama baaritaan.

Ardayda ay saraakiisha sharci fulinta ku wareystaan gudaha dugsiga ama goob hawleed dugsi, waxaa la siin doonaa xuquuqaha ay ku leeyihiin meelaha ka baxsan ee dugsiga.

Jadwalku wuxuu muujinayaa duruufaha lagu tixgelinayo ama looga baahan yahay in warbixin loo gudbiyo saraakiisha sharcin fulinta.

Mas'uuliyiinta dugsiga waa inay si taxadar leh uga fiirsadaan ka hor inta aysan la xiriirin saraakiisha fulinta sharciga, islamarkaana ay tixgeliyaan arrimaha soo socda:

1. Da'da, caafimaadka, iyo xaalada naafonimada ama waxbarashada gaarka ah ee ardayga;
2. Ku haboonaanta booska waxbarasho ee ardayga;
3. Dhaqanka iyo rikoodhka hore ee ardayga ee anshaxa;
4. Fahamka ardayga ee saameynta dhaqankiisa;
5. Diyaar ahaanshaha ardayga inuu hagaajiyo dhaawaca sababay dhaqankiisa;
6. Miisaanka xadgudubka anshaxa iyo heerka dhaawaca oo geystay;
7. Hadii dhaqanka uu ka hor imanayo Xeerka Ixtiraamka Dhamaan Ardayda (DASA), iyo hadii ay taasi jirto, jawaabta looga baahan yahay si loo fuliyo waajibaadka Degmada ee hoos yimaada DASA;
8. Duruufaha iyo macnaha guud ee dhaqanku u dhacay;
9. Hadii ardaygu uu isku difaacayay;
10. Hadii dambiga ardayga uu halis geliyey amaanka arday kale ama shaqaale;
11. Saameynta dhacdada ee guud ahaan bulshada dugsiga;
12. Suurtagalnimada in faragelin ka yar si ku filan u xalin karto xadgudubka;
13. Hadii dugsigu uu isku dayay inuu dhaqanka ardayga ku xaliyo habab fiican oo ka hortag ah ka hor dhacdada la sheegay; iyo
14. Duruufaha kale ee yareyn kara ama sii xumeeyn kara ee khuseeya.

Maamulaha dugsiga, ama qofka wakiilkiisa, ayaa si degdeg ah ula xiriiri doona waalidka/mas'uulka arday kasta oo la xiray ama ku lug leh baaritaan dambiyeed gudaha hantida dugsiga xaaladaha aan degdega ahayn, ama sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah marka ay tahay xaalad degdeg ah. Iyadoo la waafajinayo Siyaasada Gudiga 5600 iyo Xeerka Kormeeraha 5600-R, mar kasta oo saraakiisha sharci fulinta doonayaan inay xirtaan arday, maamulaha ama qofka wakiilkiisa waa inuu la xiriiro Waaxda Sharciga, xubna ka tirsan Waaxda Sharcigana waa inuu, hadii suuragal tahay, goobta joogaa waqtiga xiritaanka.

Ardayda iyo qoysaskooda looma diido inay la xiriiraan saraakiisha sharci fulinta hadii ay aaminsan yihiin in ardayga loogu xadgudbay dambi. Faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helaa Lifaaqa E (Fulinta Sharciga).

## Anshaxa Dadweynaha Hantida Iskuulka

Degmadu waxay ka go'an tahay inay bixiso deegaan nidaamsan oo ixtiraam leh, caawiya barashada. Si loo abuuro iyo loo ilaaliyo deegaan noocaas ah, waa lagama maarmaan in la xakameeyo dhaqanka dadweynaha ee hantida dugsiga iyo hawlaha dugsiga, oo ay ku jiraan kulamada ama dhageysiyada ay qabato Gudiga Waxbarashada. Qaybtan Xeerka, "dadweynaha" waxaa loola jeedaa dhamaan dadka ku sugan hantida dugsiga ama ka qayb galaya hawl kasta oo dugsiga ah meel kasta ha joogaan, oo ay ku jiraan booqdayaasha, ardayda,

waalidiinta, macalimiinta, iyo shaqaalaha kale ee Degmada.

Xayiraadaha ku saabsan dhaqanka dadweynaha ee hantida dugsiga iyo hawlaha dugsiga ee ku jira *Xeerkan* ma loola jeedo inay xadidaan xoriyada hadalka ama isu imaanshaha amman leh. Degmadu waxay aqoonsan tahay in baadhitaan xor ah iyo muujinta fikradaha ay lagama maarmaan u yihiin ujeedooyinkeeda. Ujeedada *Xeerkan* waa in la ilaaliyo nidaamka guud iyo in laga hortago xadgudubka xuquuqda dadka kale.

Dhamaan dadka ku sugan hantida dugsiga ama ka qayb galaya hawl kasta oo dugsiga ah, kulan, shir, ama dhageysi waa inay isu dhaqmaan si ixtiraam leh oo nidaamsan. Sida waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo booqdayaasha kale ay uga filayaan maamulayaasha, macalimiinta, iyo shaqaalaha inay si sharaf leh oo edeb leh ula dhaqmaan, booqdayaashu waa inay sidoo kale siiyaan isla ixtiraamkaas iyo iskaashiga shaqaalaha Degmada. Ciyaar wanaag iyo edeb ayaa laga filayaa dhamaan dadka ka qayb qaadanaya, tababaraya, ama ka qayb galaya ciyaaraha, ama ka qayb galaya isu imaatinada iyo barnaamijyada dadweynaha. Intaas waxaa sii dheer, dhamaan dadka ku sugan hantida dugsiga ama ka qayb galaya hawl dugsiga ah waxaa laga rabaa inay xirtaan dhar ku haboon ujeedada ay halkaas u joogaan.

Qodobkan wuxuu kaashanayaa siyaasadaha kale ee Gudiga Waxbarashada ee la xiriira isticmaalka hantida Degmada ee xubnaha bulshada, waxaana si gaar ah loogu  talagalay in la xaqiijiyo intii suurtagal ah in dhamaan dadka isticmaala hantida Degmada, oo ay ku jiraan booqdayaasha, ay isugu dhaqmaan si edeb leh, amaan, oo sharciga waafaqsan.

## Dhaqan Darooyinka Mamnuuca Hantida Iskuulka

Qofna, keli ahaan ama koox ahaan, ma:

1. Si kas ama dayac u dhaawac qof, ama ugu hanjab ama isku day inuu sidaas sameeyo.

2. Si kas ama dayac u dhaawac ama u burburi, ama isku day in la dhaawaco ama burburiyo hanti ay leedahay Degmadu ama hanti shakhsiyeed oo uu leeyahay shaqaale ka tirsan Degmada ama qof kale oo si sharci ah ugu sugan hantida dugsiga, oo ay ku jiraan qoraal sharci daro ama gubid.

3. Qashqashaad habsami u socodka casharada, barnaamijyada dugsiga, ciyaaraha, isu imaatinada, bandhigyada tiyaatarka ama muusiga, kulamada, shirarka, dhageysiyada, kulamada Gudiga Waxbarashada, ama hawlaha kale ee dugsiga.

4. Qaybi ama xir agab ku yaal hantida dugsiga ama hawlaha dugsiga oo aflagaado ah, ama dhiirigeliya ficil sharci daro ah, u muuqda mid been abuur ah oo wax ka sheegaya dadka kale, xaniba xuquuqda dadka kale, ama qashqashaado barnaamijka dugsiga.

5. Cabsigelin, dhibaatayn ama takoorka qof kasta iyad oo lagu saleynayo qowmiyadiisa dhabta ah ama la tuhunsan yahay, midabkiisa, caqiidadiisa, miisaankiisa/muuqaalka, asal qaran, xaalada muwaadinimo, kooxdiisa qowmiyadeed, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, jinsiga (oo ay ku jiraan muujiinta jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga), jihada galmada, naafonimada, astaamaha hide sidaha ee hore loo yaqaan, xaalada guur, xaalada lamaane, xaalada dhibanaha rabshadaha guryaha, shaqada ama xaalada ciidanka, xaalada halyeeynimada, ama xidhiidhka siyaasadeed; ama isticmaalka hadal ama dhaqdhaqaaq qof caadi ah uu u arki lahaa si mid takooreya qof ama koox xaq u leh in laga ilaaliyo marka ay helayaan waxbarasho sida uu dhigayo Sharciga Fulinta ee Gobolka New York. Cabsigelintan waxay noqon kartaa mid qof ka qof ah, ama si dadban loo gudbiyo iyadoo la adeegsanayo qoraal, ama hab teleefon ama elektaroonik ah, oo ay ku jirto isticmaalka kombiyuutarada ama Internet ka.

6. Cabsigelin ama "caatin" ka dhacda hntida dugsiga ama hawl dugsiga, taas oo ku jirta dhibaatayn carqaladeysa waxbarashada ardayga ama khatar gelisa amaanka ardayga. Dhibaatayntu waxaa ku jiro ku

lug lahaanshaha falal ama sheegisyo loogu talagalay in qof lagu abuuro cabsi ama loogu geysto dhaawac shucuureed; hanjabaad, dabagal, ama isku day lagu qasbayo qof inuu sameeyo wax; ama dhaqan xadgudub ah ama isticmaalka aflagaado, hanjabaado, ama hadalo takooreed oo lagu saleeyay qowmiyada dhabta ah ama la tuhunsan yahay, midabka, culayska/muuqaalka, asal qowmiyadeed, asal qaran, xaalada muwaadinimo, caqiido, diin, ku dhaqanka diinta, da'da, jinsiga, aqoonsiga ama muujiinta jinsiga, jihada galmada, naafonimada, astaamaha hide sidaha ee hore loo yaqaan, xaalada guur, xaalada lamaane, xaalada dhibanaha rabshadaha guryaha, shaqada ama xaalada ciidanka, xaalada halyeeynimada, ama xidhiidhka siyaasadeed. Dhibaatayntan waxay noqon kartaa mid qof ka qof, ama si dadban loo gudbiyo iyadoo la adeegsanayo qoraal, ama hab teleefon ama elektaroonik ah, oo ay ku jirto isticmaalka kombiyuutarada ama Internet ka.

7. In la soo galo qayb ka mid ah hantida ama dhismaha dugsiga ogolaansho la'aan, ama la sii joogo dhisme kasto ama ka dib marka la xiro caadi ahaan.

8. Carqaladeynta dhaqdhaqaaqa ee qof kasta ee meel kasta oo xeerkan khuseeyo.

9. Jebinta sharciyada taraafikada, xeerarka baarkinka ama xadidaadaha kale ee gaadiidyada.

10. In la haysto cabitaan, iibiyo, qaybiyo ama isdhaafsado cabitaanada khamriga ama maandooriyaha la xakameeyo, ama iyadoo lagu jiro xaalad saameyn ee hantida dugsiga ama munaasabad dugsiga.

11. In la haysto ama isticmaalo hub gudaha ama hantida dugsiga ama munaasabad dugsiga, marka laga reebo saraakiisha sharci fulinta marka ay shaqada ku jiraan, ama si gaar ah looga ogolaaday Gudiga Waxbarashada ama si sharci ah.

12. In lagu wareego hantida dugsiga iyadoo aan ujeedo sharci ah loo haysanin.

13. In khamaar lagu ciyaaro dhulka dugsiga ama munaasabadaha dugsiga.

14. In la diido raacitaanka amarka macquulka ee masuuliyiin laga aqoonsan yahay Degmada marka ay gudanaya waajibaadkooda.

15. In la si kas ah ugu dhiirigeliyo dadka kale inay fuliyaan waxyaabaha Xeerkan mamnuucay.

16. In la jebiyo sharci federaal ama gobol, xeer deegaan ama siyaasada Gudiga iyadoo lagu sugan yahay hantida dugsiga ama munaasabad dugsiga.

17. In isku dhaqmo ka hor imanaya xeerarka Degmada, gaar ahaan ku saabsan goobaha dadweynaha ee xadidan ee uu Gudigu sameeyey; ama jebiya shuruudaha ruqsad isticmaal.

18. In loo hanjabo isticmaalka hub; ama qori ama wax kale oo muujinaayo hub.

19. In la isku dayo in hantida ama adeeg ka helo qof kale isagoo hanjabaad ama xoog adeegsanaya.

20. In lagu hanjabo dhaawac jir ee shaqaale ama arday. Hanjabaadu waxay jirtaa marka qof macquul ah uu u fasiran karo hadalkaas inuu yahay muujin dhab ah oo niyad ah in la waxyeeleeyo ama la weeraro.

21. In la isticmaalo erayo ama tilmaamo cay, aflagaado, aflagaado qowmiyadeed ama anshax xumo, ama edeb daro, gaar ahaan inta lagu jiro shirar, wada hadal ama dood macalin, maamule, shaqaale ama arday.

22. In la dhigo bambo, walax qarax ah, hub kiimiko ama bay'ooloji ah, ama qalab gubasho ah hantida Degmada, ha shaqeyo ama uusan shaqeynin; ama inuu sameeyo wicitaan, qoraal ama fariin elektaroonik

ah oo sheegaysa in bambo, walax qarax ah, hub kiimiko ama bay'ooloji ah, ama qalab gubasho ah la dhigay ama la dhigi doono hantida ama agagaarka Degmada.

23. In lagu dhaqmo fal kale oo ka dhaca hantida Degmada ama munaasabad dugsiga oo Xeerkan ka mamnuucayo hadii uu arday ku samayn karo.

**Booqdayaasha Iskuulada**

Gudigu waxa uu dhiirigelinayaa waalidiinta iyo muwaadiniinta kale in ay booqdaan dugsiyada iyo fasalada Degmada si ay u daawadaan shaqada ardayda, macalimiinta iyo shaqaalaha kale. Si kastaba ha ahaatee, maadaama dugsiyadu yihiin goob shaqo iyo waxbarasho, waa in la dejiyo xuduudo gaar ah oo lagu maamulo booqashooyinka noocaas ah. Maamulaha dhismaha ama wakiilkiisa ayaa mas'uul ka ah dhamaan dadka ku sugan dhismaha iyo hantida dugsiga. Sababahan awgood, waxaa la raacayaa xeerarka soo socda ee ku saabsan booqdayaasha dugsiyada:

1. Qof kasta oo aan ahayn shaqaale joogto ah ama arday ka tirsan dugsiga gaar ahaan ayaa loo tixgelinayaa booqde (ku jira shaqaalaha Xafiiska Dhexe).

2. Dhamaan booqdayaasha dugsiga waa inay marka ay yimaadaan dugsiga iska xaadiriyaan xafiiska Maamulaha. Halkaas ayay ku saxeexi doonaan diiwaanka booqdayaasha. Hadii aqoonsi sumadaysan lagu isticmaalo dhismaha, waxaa loo soo bixin doonaa kaarka aqoonsiga booqdaha, kaas oo ay tahay in la xirto mar walba inta lagu jiro dugsiga ama dhulkiisa. Kaarka aqoonsiga booqdaha waa in dib loogu soo celiyaa xafiiska Maamulaha ka hor inta aan laga bixin dhismaha.

3. Booqdayaasha ka qeyb galaya hawlo dugsiga ah oo u furan dadweynaha, sida shirarka ururka waalidiinta iyo macalimiinta, tartamada ciyaaraha ama isu imaatinada dadweynaha, loogama baahna in ay xirtaan kaarka aqoonsiga.

4. Waalidiinta ama muwaadiniinta doonaya inay kormeeraan fasal inta uu socdo casharka waa inay balan ka qabsadaan booqashadaas macalinka fasalka, si looga fogaado carqaladeynta casharka.

5. Macalimiinta lagama filayo inay waqtiga casharka ku bixiyaan ka hadal arimo gaar ah ee booqdayaasha.

6. Qof kasta oo ogolaansho haysanin oo ku sugan hantida dugsiga waa in lagu soo wargeliyaa Maamulaha ama wakiilkiisa. Qofka aan ogolaanshaha lahayn waxaa lagu amri doonaa inuu ka tago. Booliiska ayaa la xiriiri doonaa hadii xaaladu sidaas u baahan tahay.

7. Dhamaan booqdayaashu waa inay u hogaansamaan xeerarka ku qoran *Xeerka Anshaxa*.

**XOG URURINTA**
**Ururinta iyo Dib u eegista Xogta Sanadlaha**

Dugsiyada ayaa sanadkii laba jeer dib u eegi doona xogtooda la xiriirta edbinta, waxayna warbixin qoraal ah u gudbin doonaan Degmada iyo Gudiga Waxbarashada, taas oo loo heli doono dadweynaha. Dugsiyada iyo Degmadu waxay dadweynaha u soo bandhigi doonaan xogta iyo warbixinada soo socda. Iyadoo lagu saleynayo dib u eegistaas, dugsiyadu waxay samayn doonaan isbedelo ku saabsan hirgelinta Xeerka Anshaxa si waafaqsan ujeedada xeerkan iyo siyaasadaha kale ee la xiriira.

Degmada, Madaxa Sare ee Waxbarashada, iyo Gudiga Dugsigu waxay dib u eegi doonaan waxyaabaha soo socda:

1. Tirada guud ee ardayda dugsiga ka diiwaangashan;
2. Celceliska imaanshaha joogtada maalinlaha ee ardayda;

3. Ardayda waxbarashada ka tagay ee fasalada todobaad ilaa laba iyo tobnaad;
4. Barnaamijka dugsiga ee ka hortaga caatinta iyo ka wacyigelinta;
5. Istaraatiijiyadaha faragelinta iyo ka hortaga;
6. Tirada jebinta xeerka anshaxa iyo edbinta, oo loo kala saaray iyadoo lagu salaynayo nooca dembiga, kala dugsiyada lagu jebiyay, jinsiyada, qowmiyada, da'da, fasalka, naafonimada, heerka ELL, iyo jinsiga ardayda, hadii xogtu la heli karo.
    a. Haynta hub khatar ah;
    b. Isticmaalka ama haynta khamri, daroogo ama walxo la xakameeyo;
    c. U hogaansami la'aan ula kac ah ama muujin caasinimo joogto ah;
    d. Dhaqan la mid ah weerar darajo koowaad, labaad, sadexaad, ama weerar gaadiid;
    e. Dhaqan waxyeelo u leh daryeelka ama amaanka ardayda kale ama shaqaalaha kale ee dugsiga;
    f. Burburinta ama xumeynta hanti dugsi oo kas ah;
    g. Dhaqan la mid ah dhac; iyo
    h. Jebinta kale ee xeerka anshaxa iyo edbinta oo sababtay in dhaqankaas lagu diiwaangeliyo faylka ardayga.
7. Heerka siyaasada, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn talaabooyinka anshaxa, si joogto ah loogu dabaqo dhamaan ardayda.
8. Natiijooyinka laga helay xog aruurinta ku saabsan jawiga iyo amaanka dugsiga.

## Kormeerka Deegaanka Iskuulka iyo Anshaxa

Degmadu waxay kormeeri doontaa jawiga iyo dhaqanka guud ee dugsiyada oo dhan iyadoo:

1. Samaynta xog aruurin sannadle ee ardayda iyo shaqaalaha dugsiga ee jawiga iyo amaanka dugsiga;
2. Dib u eegista cabashooyinka ay soo gudbiyeen gudiyaasha ku salaysan dugsiyada ee ku saabsan habraacyada edbinta ama dhaqanka shaqaalaha dugsiga iyo saraakiisha amaanka dugsiga;
3. Horumarinta, kormeerka, iyo qiimeynta siyaasadaha iyo habraacyada edbinta dugsiyada ee dhamaan dugsiyada Degmada; iyo
4. Dib u eegista cabashooyinka iyo racfaanada ganaaxyada ceyrinta mudada dheer ee ay soo gudbiso Golaha Waxbarashada.

## DIB U EEGID SANADEEDKA, FAAFINTA, IYO XEERARKA[9]

Iyada oo loo marayo Gudiga Horumarinta iyo Dib u eegista Siyaasada ("Gudiga Siyaasada"), Gudiga Waxbarashadu waxa uu dib u eegi doonaa Xeerka Anshaxa sanad walba, inta lagu jiro ama ka dib dhamaadka sannad dugsiyeedka.

Madaxweynaha Gudiga waxa uu magacaabi doonaa Gudi Latalin si ay u caawiyaan Gudiga Siyaasada dib u eegista *Xeerka Anshaxa*. Gudiga Latalinta waxoo ka koobnaan doonaa wakiilo arday, macalimiin, maamulayaal, waalidiin iyo ururo bulshada ku salaysan, shaqaalaha amaanka dugsiga iyo shaqaalaha kale ee dugsiga. Gudiga Latalinta waxa uu soo gudbin doonaa natiijooyinkiisa iyo talooyinka uu hayo Gudiga Waxbarashada iyo Madaxa Sare ee Waxbarashada ugu dambayn Abriil 1 (taariikhda lagu qiyaasi karo in gudigu dib u eegis ku sameeyo hirgelinta *Xeerka* iyo soo jeedinta talooyin) ee sanad dugsiyeed kasta iyo waqtiyada kale ee loo arko inay haboon yihiin.

Gudiga Siyaasada iyo Gudiga Latalinta waxa ay tixgelin doonaan xogta heerka dugsiga, oo ay ku jiraan xogta la soo ururiyey si loo muujiyo isbedelada, iyo xog heer Degmo. Inta lagu guda jiro dib u eegista, Gudiga Siyaasada iyo Gudiga Waxbarashada oo buuxa waxay qiimeyn doonaan waxtarka qodobada *Xeerka* iyo in heerarka si cadaalad iyo joogto ah lagu dabaqay. Wax ka bedelka *Xeerka Anshaxa* waxa lagu samayn doonaa ugu yaraan hal dhegaysi dadweyne, kaas oo siinaya fursad kaqeybgalka shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, ardayda iyo cid kasta oo

[9] Sharciga Waxbarashada § 2801(5); Xeerka Gudoomiyaha 8 NYCRR § 100.2(l)(2)(iii)(a)

daneynaysa. Ogeysiis ugu yaraan 10 maalmood oo dugsiga ah ayaa la bixin doonaa ka hor inta aan la qaban dhegaysiga dadweynaha ee lagu tixgelinayo isbedelada *Xeerka Anshaxa*.

## Faafin[10]

Gudiga Waxbarashadu waxa uu ku soo bandhigi doonaa *Xeerka Anshaxa* oo dhameystiran (oo ay ku jiraan dhamaan isbedelada iyo cusboonaysiinta sanadlaha ah) boga siyaasadaha ee internetka. Degmadu waxay ku soo bandhigi doontaa soo koobida *Xeerka Anshaxa* boga internetka ee Degmada iyo barnaamijyada kale ee waalidiinta heli karaan marka ay suurtagal tahay; waxay siin doontaa waalidiinta koobi ka hor bilowga sanad dugsiyeed kasta, waxaana la heli karaa koobiyo ka dib; waxay siin doontaa macalin kasta oo cusub koobi dhameystiran oo dijital ah ama mid daabacan ee *Xeerka*; iyo ardayda, waalidiinta, shaqaalaha Degmada iyo xubnaha bulshada waxaa loo diyaarin doonaa koobiyo si ay u eegaan. Degmadu waxay u gudbin doontaa koobi *Xeerka Anshaxa* iyo isbedelida Gudoomiyaha, iyadoo la raacayo habka uu Gudoomiyuhu qeexay, ugu dambeyn sodon (30) maalmood ka dib ansixintiisa.

## Soo Saarista Xeerarka Maamulka

Iyadoo la raacayo tilmaamaha siyaasadeed ee kor ku xusan, Madaxa Sare ee Dugsiyada waxaa loo ogol yahay inuu soo saaro, dib u habeeyo, ilaaliyo, una dhaqan geliyo guud ahaan Degmada xeerar iyo tilmaamo maamul oo waafaqsan shuruucda dastuuriga ah kuwaas oo ka hadlaya arimo gaar ah oo ku saabsan maamulka, fasiraada iyo dhaqan gelinta qayb kasta oo ka mid ah siyaasadan.

## Xalinta Is waafaq La'aanta Siyaasadaha ama Xeerarka Kale

Hadii siyaasada ama xeerka maamulka ee Degmadan, wakhti kasta, gebi ahaanba ama qayb ahaan ka hor imaanayaan ama aan waafaqsanayn siyaasadan ama xeerarka maamulka ee halkan ogol yahay, qaybta ka hor imaanaysa waxaa loo arki doonaa in *Xeerka Anshaxa* ka sareeyo; si kastaba ha ahaatee, hadii qodobada ama ujeedooyinka siyaasadaas ama xeerkaas aanay is waafaqsanayn ama si madax banaan loogu dhaqan gelin karo iyada oo aan loo eegin qaybta ka hor imaanaysa, qodobadaas iyo ujeedooyinkaas waxaa loo arki doonaa inay weli si buuxda u dhaqan leeyihiin.

## Kala Soocid

Hadii qodob kasta oo *Xeerkan* ama sida qodobkaas loogu dabaqayo qof ama xaalad la helo in uu ka hor imanayo dastuurka ama aan lagu dhaqan gelin karin Maxkamad, sharci dejin ama wax ka bedel, ama Aragti kasta oo Gudoomiye Waxbarasho, ujeedada Gudiga Waxbarashadu waa in go'aankaas uusan saameyn ama dhaawac ku yeelan qodob kale oo ka mid ah *Xeerkan* ama sida qodobkaas loogu dabaqayo qof kale ama xaalad kale.

## HIRGELINTA IYO KORMEERKA

Gudiga Waxbarashadu waxa uu Madaxa Sare farayaa inuu horumariyo oo hirgeliyo qorshe fulinta Xeerka Anshaxa ee guud ahaan Degmada, kaas oo dhaqan gelinaya siyaasadan 1400 isla markaana dejinaya cabiro lagu go'aaminayo horumarka la taaban karo ee ardayda iyo shaqaalaha RCSD oo dhan, iyadoo diirada la saarayo jawiyo amaan, taageero leh, iyo farxad leh oo lagu baro laguna barto. Madaxa Sare waxa uu sanad walba soo bandhigi doonaa warbixin ku saabsan horumarka qorshaha fulinta Xeerka Anshaxa iyo natiijooyinkiisa, taas oo lala wadaagi doono Gudiga Waxbarashada iyo Gudiga Xeerka Anshaxa.

[10] Tixraac.: Sharciga Waxbarashada §2801(4)(5); 8 NYCRR 100.2(1)(iii)

| | |
|---|---|
| Tixraac aan toos ahayn: | Siyaasada Degmada Mamnuuca Takoorka ama Dhibaateynta Ardayda ama Shaqaalaha (0100)<br>Gudbinta Cabashooyinka Takoorka ama Dhibaateynta (0100-R)<br>Siyaasada Ka Hortaga iyo Faragelinta Caatinta iyo Dhibaateynta Ardayda (0115)<br>Hadafka Xiriirka Bulshada (1000)<br>Ka Qaybgalka Bulshada (1200)<br>Booqdayaasha Dugsiyada (1240)<br>Xeerka Anshaxa Yar (1400-E1)<br>Lifaaqa C – Habraaca Cadaaladda (1400-E2)<br>Qiimeynta Han jabaada (1400-R)<br>Dib Usoo Noqoshada Iskuulka Kadib Ceyrinta (1400-R2)<br>Adeegsiga Dadweynaha ee Goobaha Dugsiga (1500)<br>Anshaxa Dadweynaha ee Hantida Dugsiga (1520)<br>Sigaar, Ku neefsashada iyo Isticmaalka Kale ee Tubaakada ee Hantida Dugsiga (1530)<br>Isticmaalka La Aqbali Karo ee Shabakada Degmada (1950)<br>Dhaqdhaqaaqa Doorashada ee Dugsiyada (2120.1)<br>Hadafka Waxbarashada (4000)<br>Ardayda Naafada ah (4202)<br>Waxbarashada Muwaadinimada (4311.2)<br>Siyaasada Internet ka (4526)<br>Hadafka Siyaasadaha Ardayda (5000)<br>Siyaasada Soo galka iyo Ka tagista Ardayga (5100)<br>Daabacaadaha Ardayda (5220)<br>U qalmitaanka Hawlaha ka Baxsan Manhajka (5305)<br>Dugsiyada Aan Daroogo Lahayn (5312.1a)<br>Helitaanka Waxbarashada, Sirta Ardayga, Sharciga iyo Fulinta Arimaha Socdaalka (5600)<br>Helitaanka Waxbarashada, Sirta Ardayga, Sharciga iyo Fulinta Arimaha Socdaalka (5600-R)<br>Qorsheynta Maalka ee Wadaaga Dhismaha (7050)<br>Caafimaadka & Amaanka (8100)<br>Dugsiyo Amaan Leh (8135)<br>Kaamirooyinka Fiidiyowga ee Baska Dugsiga (8414.4)<br>Goob Shaqo oo Aan Daroogo Lahayn (9320) |
| Tixraaca NYSSBA: | Xeerka Anshaxa (5300) – Siyaasad Loo Baahan Yahay<br>Xuquuqda iyo Waajibaadka Ardayda (5300.15) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Xeerka Labiska (5300.25) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Anshaxa Ardayga (5300.30) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Anshaxmarinta Ardayda (guud ahaan) (5300.40) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Anshaxmarinta Ardayda Naafada ah (5300.50) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Baarista iyo Wareysiga (5300.60) – Siyaasad Lagu Taliyay<br>Booqdayaasha Dugsiyada (5300.65) – Siyaasad Lagu Taliyay |
| Tixraac: | Sharciga Waxbarashada §§10-18 (Sharciga Sharafta Ardayda oo Dhan)<br>Sharciga Waxbarashada §13[3]<br>Sharciga Waxbarashada §310<br>Sharciga Waxbarashada §2801<br>Sharciga Waxbarashada §2802 (Nidaamka Mideysan ee Warbixinta Dhacdooyinka Rabshadaha)<br>Sharciga Waxbarashada §3214<br>Dastuurka Mareykanka |

Wasaarada Amaanka Gudaha ee Mareykanka
8 NYCRR19.5(a)-(c); 100.2(l); 100.2(l)(2)(ii)(o); 100.2(1)(iii); 100.2(l)(3)(i); 100.2(gg)
8 NYCRR §185.15 (Lifaaqa L) (Jadwalka Kaydinta iyo Tirtirida LGS-1 ee Diiwaanada Dowlada Hoose ee New York)
8 NYCRR 201, iwm.
8 NYCRR Qaybta 275
18 USC 921 ee Xeerka Federaalka
Qodobka 130 ee Xeerka Dambiyada
P.L. 108-446 "Sharciga Hagaajinta Waxbarashada Dadka Naafada ah ee 2004"
Sharciga Dugsiyada Aan Hubka Lahayn, 18 USC §§3351, 8921, 8922, 921
Buuga Shaqaalaha ee RCSD
Erey bixinta Nidaamka Warbixinta Amaanka Dugsiga iyo Jawiga Waxbarashada (SSEC)
https://www.nyssba.org/news/2025/01/10/on-board-online-january-13-2025/commissoner-pre-k-students-should-not-be-suspended/

Xusuusin: La ansixiyay Agoosto 16, 2001 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2001-02: 184; Wax laga bedelay Maajo 20, 2002 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2002-03: 845; Wax laga bedelay Luuliyo 17, 2003 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2003-04: 64; Wax laga bedelay Luuliyo 15, 2004 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2004-05: 92; Wax laga bedelay Agoosto 18, 2005 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2005-06: 179; Wax laga bedelay Juun 15, 2006 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2005-06: 882; Wax laga bedelay Agoosto 16, 2007 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2007-08: 148; Wax laga bedelay Oktoobar 23, 2008 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2008-09: 365; Wax laga bedelay Nofeembar 19, 2009 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2009-10: 340; Wax laga bedelay Febraayo 16, 2012 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2011-12: 558; Wax laga bedelay Juun 28, 2012 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2011-12: 851; Wax laga bedelay Nofeembar 15, 2012 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2012-13: 324; Wax laga bedelay Luuliyo 29, 2013 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2013-14: 81; Wax laga bedelay Juun 16, 2016 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2015-16: 856; Wax laga bedelay Juun 24, 2021 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 932; Wax laga bedelay Juun 29, 2023 iyo Sebteembar 5, 2023 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2022-23: 917a; Wax laga bedelay Juun 20, 2024 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2023-24: 963; Wax laga bedelay Juun 26, 2025 iyada oo loo marayo Go'aanka No. 2024-25: 887

ct/sg

# LIFAAQA A

# Xeerka Labiska

## XEERKA LABISKA

**Sababta**

Xeerka labiska iyo hirgelintiisu waxay saameyn ku leeyihiin xuquuqda dastuuriga ah ee ardayda iyo waajibaadka masuuliyiinta dugsiga ee ilaalinta jawi ku haboon waxbarasho. Sidaas darteed, ujeedada xeerkan labiska waa in la helo isku dheeli tirnaan wanaagsan oo u dhaxaysa xaqa ardayga ee muujinta xoriyada iyo hadafka waxbarasho ee degmada.

Ardayda iyo waalidiintooda ayaa leh mas'uuliyada ugu weyn ee ku saabsan labiska iyo muuqaalka ardayga ee haboon. Macalimiinta iyo dhamaan shaqaalaha Degmada waa inay ugu yaraan raacaan xeerka labiska, sidoo kale muujiyaan labis haboon oo tusaale u noqdaan, isla markaana ka caawiyaan ardayda inay fahmaan muuqaalkooda ku haboon goobta dugsiga.

Dharka, agabka ama muuqaalada ka hor imaanaya hadafka waxbarasho ee degmada, keenaya carqalad muuqata ama weyn oo ku timaada habka waxbarashada, ama xadgudbaya xuquuqda ama amaanka dadka kale, waa la maamuli karaa.

Waa muhiim in la ogaado in kaliya neceb ama xanaaqa aanay ku filnayn in la xadido hadalka ama la muujiyo, oo ay ku jiraan labiska ama muuqaalada. Dhamaan waxa xadididan waa inay ka yimaadaan sabab ka weyn doorashada shakhsiyeed, aaminsanaanta ama dhadhanka. Tani waxay ka dhigan tahay in si sharci ahaan loo maamuli karo, labiska ama dharka waa inuu dhab ahaantii keenaa carqalad muuqata ama weyn, xadgudub sameeyaa xuquuqda saxda ah ama amaanka dadka kale, ama ka hor imaanayaa hadafka waxbarasho ee dugsiga.

Xeerkan labiska wuxuu khuseeyaa ardayda iyo dadka waaweyn marka ay joogaan hantida Degmada, oo ay ku jiraan dhismayaasha dugsiyada iyo Xafiiska Dhexe, iyo sidoo kale marka ay ka qaybgalayaan dhacdo kasto ee dugsiga, meel kasta oo ay ka dhacayso.

Heerarka: (oo ay ku jiraan kuwa lagu dejiyay dugsi kasto) waxaa si siman loogu dabaqi doonaa ardayda dhamaan jinsiyada, da'da, jinsiyada, muujinta jinsiga, jihada galmada ama aqoonsiga jinsiga.

Marka uu qof ku sugan yahay hantida dugsiga ama ka qaybgalayo dhacdo dugsiga ka dhaceyso, labiska iyo muuqaalkiisa, oo ay ku jiraan dahabka, qurxinta wejiga iyo cidiyaha, waa inay:

1. Daboolaan dhabarka hoose, dhexda iyo xabadka.
2. Ka koobnaanin dhar, koofiyad ama dahab la xiriira ama lagu garto calaamad muujinaysa xubinimada gaangistarka.
3. Ka fogaadaan erayo aflagaado, tilmaamaya rabshad ama cay, calaamado muujinaya maandooriyaal sharci daro ah, ama erayo, calaamado ama hal ku dhigyo kale oo carqaladeynaya jawiga waxbarashada ama diidaya sharafta iyo ixtiraamka dadka kale.
4. Oo ku jiro kabo, kuwaas oo mar walba la xirto sababo la xiriira caafimaadka iyo amaanka.

**Tilmaamaha Heerarka Dheeraadka ah**

Marka laga soo tago heerarkii kor ku xusan, dugsiyadu waxay dejin karaan heerar labis oo macquul ah oo heer dugsiyeed ah, hadii heerarkaas si macquul ah loola xiriirinayo ujeedooyin sax ah, si gaar ah loo qeexay, aan ku xirnayn waxa la sheegay, aan si sharci daro ah ugu xadgudbaynin xuquuqda dastuuriga ah ee ardayga ee la xiriirta hadalka, xoriyada, diinta ama xuquuq kale oo aasaasi ah, si siman loogu dabaqo dhamaan xubnaha bulshada dugsiga, isla markaana lagu horumariyo wada shaqeynta ardayda, waalidiinta, macalimiinta, shaqaalaha kale iyo xubnaha kale ee bulshada dugsiga. Ka dhaafitaano macquul ah waa in loo sameeyaa ardayda leh baahiyo caafimaad hadii ay khilaafaan xeerka labiska ee dugsiga. Horumarinta wada jirka ah ee heerarka labiska ee dugsiyeedka waa fursad ay bulshada dugsigu kaga wada hadasho arimaha la xiriira labiska iyo muuqaalka, sida dhaqanka, aqoonsiga diimeed, jinsiga, muujinta jinsiga, sharafta iyo ixtiraamka.

Heerarka labiska ee heer dugsiga waa in lagu taageeraa walaaca sharciga ee la xiriira caafimaadka ama amaanka ama carqalad muuqata oo weyn, kor loogu qaadaa sharafta, ixtiraamka iyo xasaasiyada dhaqamada iyo diinta, isla markaana macalimiinta iyo ardayda diirada loogu saaro waxbarashada, aan kormeerin labiska si adag.

Heerarka labiska ee uu dugsi dejiyo waa inuu ansixiyaa Kormeereha, lagu daabacaa laguna wargeliyaa bulshada dugsiga, isla markaana waafaqsan yihiin qodobada *Xeerka Anshaxa*.

**Xadgudubyada Xeerka Labiska**
Xadgudubyada xeerka labiska waa in loo arkaa fursado ama "waqtiyo waxbarasho" si looga wada hadlo arimaha la xiriira labiska iyo muuqaalka, sida dhaqanka, aqoonsiga diimeed, jinsiga, muujinta jinsiga, sharafta iyo ixtiraamka.

Ardayda ku xadgudba xeerka labiska, ay ku jiraan heerarka labiska dugsiga waxaa laga dooni doonaa inay bedelaan muuqaalkooda iyagoo daboolaya ama ka saaraya shayga xadgudubka leh, hadii loo baahdona isku bedelaan shay la aqbali karo. Arday kasta oo diida inuu sameeyo waxaa lagu dabaqi doonaa jawaab heerka 1 ama heerka 2. Ardayda maloo ceyrin doono ama malaga saari doono barnaamijkooda waxbarasho sababo la xiriira xadgudubka xeerka labiska.

**Ururinta iyo Warbixinta Xogta**
Sida lagu xusay meelo kale oo ka mid ah *Xeerka Anshaxa*, dugsiyadu waa inay ururiyaan iyo u gudbiyaan Degmada iyo Gudiga Warbixinta xogta qayb ahaan warbixinahooda laba jeer sanadkii:

1. Xadgudubyada xeerka labiska ee keena jawaab Heerka 1 ama Heerka 2.
2. eeyrinta ardayda ee ka dhalatay kororka khilaafaadka la xiriira xadgudubyada xeerka labiska.

# LIFAAQA B

# Habka Dib u Hiishiisiinta

## HABKA DIB U HISHIISIINTA

Hababka dib u heshiisiinta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah anshaxa horumarsan iyo jihada Degmadu ka go'an tahay inay ku socoto. Hababkan dib u heshiisiinta waxay ka soo jeedaan dhaqamada asalka ah ee muujinaya aadananimadeena iyo wadaaga guud ee bulshada. Marka si firfircoon loo isticmaalo, waxay dhisaan dhaqan wanaagsan oo firfircoon. Marka laga hadlayo cadaalada, hababka dib u heshiisiinta waxay isticmaalaan aasaaska xiriirka iyo isku xirnaanta si loo saxo waxyeelada loona soo celiyo iskaashi.

Habka dib u heshiisiinta waxaa loo isticmaali karaa labadaba sidii talaabo ka hortag iyo faragelin. Hababka dib u heshiisiinta waxay ka caawin karaan iskuulada dhisida xiriirada, awoodsiinta xubnaha bulshada inay ka mas'uul noqdaan daryeelka dadka kale, ka hortaga ama xalinta khilaafaadka ka hor inta aysan kordhin, wax ka qabashada sababaha hoose ee dhalinyarada ku kalifiya dhaqamo aan haboonayn iyo dhisida adkaysiga, kordhinta xirfadaha kuwa waxyeeleeyay, iyo siinta kuwa khaldan fursad ay ugu xisaabtamaan dadka ay waxyeeleeyeen isla markaana ay u saxi karaan waxyeelada sida ugu macquulsan.

Marka la isticmaalo habka faragelinta, qaadashada habka dib u heshiisiinta ee anshaxa waxay bedeshaa su'aalaha aasaasiga ah ee la waydiiyo marka dhacdo anshaxeed dhacdo. Halkii la weydiin lahaa cida lagu eedaynayo iyo sida kuwa ku lugta leh dhaqanka xun loo ciqaabi doono, habka dib u heshiisiinta wuxuu waydiinayaa afar su'aalood oo muhiim ah:

1. Maxaa dhacay?
2. Yaa dhaawacmay ama uu dhaqanka saameeyay?
3. Maxaa la sameeyaa si arinta loo saxo?
4. Sidee ayay dadku u dhaqmi karaan si ka duwan mustaqbalka?

Dhamaan dhinacyada waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaataan mas'uuliyada qaybtooda ka ahayd dhacdada keentay faragelinta.

### Noocyada Dhaqamada Dib u Hishiisiinta

**Habka Goob wareega:** Goob wareegyada waa kuwo waxtar leh labadaba sida istiraatiijiyad ka hortag iyo hab wax ka qabasho. Goob wareegyada waxaa loo isticmaali karaa caado joogto ah oo koox arday (ama macalimiin, ama arday iyo macalimiin) ka qaybqaataan. Goob wareega sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa arin gaar ah oo saameysa iskuulka. Habkani wuxuu kooxaha ka caawiyaa dhisida xiriirka, fahamka iyo kalsoonida, abuurista dareen bulsho, barashada sida go'aamada loo wada gaaro, dejinta heshiisyo wadajir ah, xalinta arimaha adag, iwm.

**Wadahadal Iskaashi:** Isticmaalka habka wadahadalka iskaashiga wuxuu qofka u ogolaanayaa inuu si toos ah ula hadlo qofka uu khilaafku ka dhexeeyo si ay u gaaraan xalin wada qanciso. Tababarka wadahadalka iskaashiga wuxuu ka kooban yahay barashada dhegeysiga firfircoon iyo xirfadaha kale ee isgaarsiinta xalinta khilaafaadka.

**Dhexdhexaadinta Saaxiibka:** Dhexdhexaadiye aan eex lahayn (sida arday iskuulka ku jira oo tababaran si uu u noqdo dhexdhexaadiye saaxiib) ayaa fududeeya habka wadahadalka ee dhinacyada isku khilaafsan si ay u gaaraan xalin wada qanciso. Dhexdhexaadintu waxay aqoonsan tahay saxnimada aragtiyada kala duwan ee labada dhinac iyo in la helo xal dabooli kara baahiyaha labada dhinac. Dhinacyadu waa inay si ikhtiyaari ah uga qaybqaataan dhexdhexaadinta. Dhexdhexaadinta laguma isticmaalo xaaladaha uu qof keliya dhibane ka noqdo (tusaale ahaan, kiisaska ku lug leh dhibaatayn ama caatin) qof kale.

**Shirka Dib u Hishiisiinta Rasmiga ah:** Shirka waxaa qabto qof si gaar ah loogu tababaro in uu isu keeno dadka qirtay in ay waxyeelo geysteen iyo kuwa la waxyeeleeyay. Xaalad kasta, caafimaadka maskaxda, jirka, amaanka, iyo daryeelka qofka waxyeelada soo gaartay ayaa ah mudnaanta koowaad marka la tixgelinayo habkan iskuulka. Labada dhinac waxay keeni karaan taageerayaal ku jira goob wareega oo sidoo kale saameynta ku yeeshay dhacdada. Ujeedada shirka waa in qofka waxyeelada geystay iyo kan la waxyeeleeyay ay fahmaan aragtida midba midka kale iyo in la gaadho heshiis wadajir ah oo dib u hagaajinaya waxyeelada inta la awoodo.

Wixii kheyraad kale oo ku saabsan dhaqamada dib u hishiisiinta, eeg boga RocRestorative ee Degmada: https://www.rcsdk12.org/rocrestorative iyo/ama kooxda.

# LIFAAQA C

# Hanaanka Cadaalada

**ILAALINTA HANAANKA CADAALADA**

Hadii waalidku aaminsan yahay in ka saarista ama talaabada edbin kale aan lagu samayn si waafaqsan Xeerka Anshaxa, waxay la xiriiri karaan Xafiiska Madaxa Dugsiyada. Hadii waalidku aanu ku raacsanayn ganaax gaaban, ganaax dheer ama buris, waxay tixraaci karaan qaybta ku saabsan arintan ee lifaaqa si ay uga helaan hagida habka cabashada.

## U Gudbinta Talaabo Anshaxeed

Hadii shaqaalaha dugsigu ay aaminsan yihiin in hab dhaqanka ardaygu u baahan yahay in si anshaxeed wax looga qabto, waa in ay buuxiyaan gudbin talaabo anshaxeed si loo bilaabo baaritaan ku saabsan dhacdadaas. Ujeedada gudbintu waa in la diiwaan geliyo iyo la daba galo xaqiiqooyinka iyo talaabooyinka ay shaqaaluhu qaadeen, si loo ogaado jidka ugu haboon ee wax looga qaban karo marka qalad culus dhaco oo keena in arday laga saaro fasalka. Si kastaba ha ahaatee, gudbinta qoraal looma adeegsan doono in lagu diiwaan geliyo taageerooyinka lagu siiyo ardayga gudaha fasalka (tusaale, waqti dhamaad ama talaabooyin aan rasmi ahayn).

Marka arday laga saaro fasalka si loo tixgeliyo ganaax gaaban lagu fulinaayo gudaha dugsiga ama dibadiisa, ama ganaax dheer, macalinku waa inuu ardayga raacsiiyaa foomka u gudbinta. Foomkan waa in la buuxiyaa ka hor inta aysan maamulaha go’aan ka gaarin, iyo waqtiga ugu dhaqsiyaha badan ee macalinku marka ay hubiyaan in fasalkooda si nidaamsan u shaqaynayo.

Foomka uu macalinku buuxiyo wuxuu noqon doonaa foom midaysan oo guud ahaan Degmada ah, kaasoo ka koobnaan doona hababka wanaagsan ee horay u isticmaalay faragelinta macalinka.

Warbixinada waxaa la gelin doonaa nidaam dijitaal ah. Barnaamij kombuyuutar ayaa soo saari kara warbixin guud oo raaci karta tirada warbixinaha uu macalin kastaa sameeyay waqtiyo cayiman. Maamulayaasha waxa ay la kulmi doonaan dhowr macalimiin oo hayso warbixino badan ama kooxyada ardayda heerarka farqiga weyn u dhexeeya (tusaale, jinsiyad, qowmiyad, xaaladda naafada, iwm.) si loo siiyo taageero dheeraad ah loona ogaado caqabadaha.

Macluumaadka laga soo ururiyo habka raadraaca waxaa loo isticmaali doonaa in lagu wargeliyo macalimiinta iyo maamulayaasha ku saabsan ardayda iyo shaqaalaha u baahan taageero, iyo sidoo kale in lagu wargeliyo macalimiinta iyo maamulayaasha waxtarka istiraatiijiyadaha iyo taageerada la hirgeliyey.

**Habraacyada Baaritaanka Anshaxa Dugsiga**

Mas’uuliyada baaritaanka waxay saaran tahay Madaxa Dugsiga ama qof uu magacaabay, waxaana loo baahan yahay in la qaado talaabooyinka soo socda ka hor inta aan go’aan la gaarin:

1. Waa in la weydiiyaa dhibanaha iyo markhaatiyaasha kale dhacdada, hadii suurtagal tahay, in la helo bayaan qoraal ah oo ay saxiixeen.
2. Habraacyada baaritaanka waa in lagu dadaalaa in la fahmo dhacdada oo dhan, oo ay ku jiraan waxyaabihii keentay.
3. In dib loo eego lana haysto wixii dukumiinti, sawiro, ama muuqaal ah mudo macquul ah.
4. Hadii suurtagal tahay, in ardayga lagu eedeeyay lagu wargeliyo anshax xumada loo haysto iyo in la sharaxo cadeymaha loo haysto.
5. Hadii suurtagal tahay, in ardayga lagu eedeeyay la siiyo fursad uu ku soo bandhigo dhinaciisa dhacdada iyo inuu tilmaamo markhaatiyaal.
6. Xaaladaha ardayga la xidhay, waa in lagu wargeliyaa in hadal kasta oo uu bixiyo laga yaabo in maxkamad lagu isticmaalo, isla markaana waalidka ardayga waa in isla markiiba la ogeysiiyaa.

## Ka Buriska Fasalka

### Shuruuda Ogeysiiska:

Dugsiyadu waa inay waalidiinta siiyaan ogeysiiskan marka arday laga buriyo fasalk:

1. Dhamaan dadaalada macquulka ah waa in lagu wargeliyaa waalidka ee ka saarista fasalka, iyo waa in lagu sameyaa telefoon, email, ama hab kale oo elektaroonik ah isla maalinta ka saarista fasalka;
2. Ogeysiis qoraal ah waa in la bixiyo 24 saacadood gudahood ka saarista fasalka, hadii mudada 24 ka saac ay ku dhamaanayso maalin aan dugsigu shaqaynin, ogeysiiska waa in lagu sii dheereeyaa waqtiga u dhigma maalinta dugsiga ee xigta;
3. Ogeysiiska qoraalka ah waa in lagu bixiyo afka hooyo ee waalidka hadii ay suurtagal tahay; sidoo kale waa inuu ka koobnaadaa sharaxaad ku saabsan dhacdada, mudada ka saarista fasalka, iyo qoraal sheegaya in waalidku codsan karo kulan si looga hadlo ka saarista;
4. Dugsigu wuxuu diiwaangelin doonaa dhamaan ka saarista fasalka, iyadoo diiwaankaas uusan ka mid noqonaynin faylka guud ee ardayga.

### Codsiga Kulan[11]:

Marka waalidka ama ardaygu codsado, macalinka iyo/ama maamulaha dugsiga ayaa la qaban doona kulan waalidka iyo/ama ardayga.

1. Dugsigu wuxuu jadwaleyn doonaa kulanka si uu u qabsoomo 48 saac gudahood laga bilaabo codsiga waalidka ama ardayga, hadii 48 ka saac aysan ku dhamaan maalin dugsiyeed, waqtigaas waxaa lagu kordhin doonaa waqtiga ku haboon ee maalinta labaad ee dugsiga ee ku xigta kasaarista ardayga, hadii aan waalidka ama ardaygu ogolaanin taariikh dambe; iyo
2. Waalidka iyo ardayga waxaa si dhab ah loogu wargelin doonaa taariikhda kulanka.

## Burinta Waqtiga Gaaban Gudaha ama Dibada Dugsiga[12]

Burinta waqtiga gaaban waa talaabo anshaxeed oo aad u daran oo loo isticmaalo marka dhaqanka ardayga aan lagu xalin karin farsamooyinka togan ee caadiga ah. Burista waqtiga gaaban ma dhaqan geli doono ilaa waraysi hordhac ah, ogeysiis iyo shir la qabto, marka laga reebo marka joogitaanka ardaygu dugsiga uu khatar ku yahay dadka ama hantida ama uu hanjabaad ku yahay habka waxbarasho; ardayga waa la burin karaa ka hor kulanka aan rasmiga ahayn, iyadoo kulanka la qabanayo 2 maalmood oo dugsiga ah gudahood laga bilaabo bilowga marka la buriyo. Ogeysiiska iyo fursada kulanka aan rasmiga ahayn waa inta la burinin ardayga, ilaa hadii joogitaanka ardaygu dugsiga uu keeno khatar joogto ah oo dadka ama hantida ah ama hanjabaad joogto ah oo carqaladeynaysa habka waxbarasho, markaa ogeysiiska iyo fursada shirka aan rasmiga ahayn waa in la qabtaa sida ugu dhakhsaha badan marka burista la sameeyo.

1. Waraysiyo Hordhac ah: Marka la tuhunsan yahay in arday uu ku kacay dhaqan u qalma burin, waa masuuliyada Kuxigeenka Dugsiga ama qofka uu magacaabay inuu qaado talaabooyinka baarista loo baahan yahay oo uu go'aan ka gaadho anshaxa suurtagalka ah, oo ay ku jirto burista waqti gaaban, hadii ay xaaladuhu ogol yihiin. Kuxigeenka Dugsiga ama Kuxigeenka ku meel gaarka ah waa inuu tixgeliyo dhamaan qodobada ku xusan qeybta cinwaankeedu yahay, "Heerarka Faragelinta & Jawaabaha Anshaxa" marka uu samaynayo talo hordhac ah oo ku saabsan talaabo anshaxeed.

2. Ogeysiinta Waalidka:
    a. Madaxa Iskuulka (ama qofka u xilsaaran) waa inuu dadaal kasta sameeyaa si uu waalidka ugu wargeliyo telefoon, email, ama hab elektaroonik kale oo ku saabsan gudbinta ardayga ee burinta isla maalinta go'aanka lagu gaaray in la go'aansado buritaan.
    b. Ogeysiis qoraal ah waxaa waalidka la gaarsiin doonaa hal maalin oo iskuul gudahood ah laga

---

[11] Tixraac: Sharciga Waxbarashada §3214(3-a)
[12] Tixraac: Sharciga Waxbarashada §3214(3)(b)

bilaabo go'aanka lagu gaaray in buris la sameeyo;

c. Ogeysiiska qoraalka ah waxaa lagu bixin doonaa luqada ugu waalidka yaqaano marka ay suurta gal tahay.

d. Ogeysiiskaas waa inuu ku qornaadaa foomka ogolaaday ee RCSD wuxuuna ka koobnaan doonaa waxyaabaha soo socda:
   i. sharaxaad ku saabsan dhacdada, oo ay ku jirto qaybta *Xeerka Anshaxa* ee ardaygu la sheegay inuu ku xadgudbay;
   ii. mudada ganaaxa suurtogalka ah;
   iii. warqad sharxaya hababka iyo talaabooyinka togan ee la isticmaalay, ama hadii aan la isticmaalin, sababta aan loo isticmaalin, iyo sababta isticmaalka hababka kale ee ganaaxa laga yaabo inuu xaalada ku haboon yahay;
   iv. warqad ogeysiinaya waalidiinta xaqooda ay ku codsan karaan kulan aan rasmi ahayn oo ay la yeeshaan Maamulaha;
   v. warqad xaqa ardayga iyo waalidka oo lagu qoray luqad fudud, oo ay ku jiraan xaqa ay ku weydiin karaan markhaatifurta dacwada, helitaanka diiwaanada dugsiga, keenista garsoore ama u doode, xaqa turjumaad shirka ee turjumaan aqoon leh ama qof uu waalidku doorto, iyo xaqa cabashada;
   vi. warqad habka ardayga loogu siin doono waxbarasho kale inta uu ganaaxu socdo;
   vii. warqad hadii ilmaha la xiray ama baaritaan dambi oo socda, hadal kasta oo qoraal ama af ah waxa loo isticmaali karaa ardayga dhanka maxkamada;
   viii. liiska looyaro iyo u doodayaal bilaash ah ama kharash yar oo deegaanka ku sugan; iyo
   ix. habraaca cabashada go'aanka ganaaxa

3. Kulan aan rasmi ahayn:

   a. Kulanka aan rasmiga ahayn waa fursad lagu qiimeeyo xaqiiqooyinka ku saabsan dhacdada keentay in ardayga la ganaaxo, lagu go'aamiyo hadii ganaaxa sax u yahay, lagu wada shaqeeyo sidii xal waafaqsan loogu heli lahaa ku soo celinta ardayga barnaamijkiisa iyo ka hortaga carqalad kale oo waxbarasho

   b. Shirka aan rasmiga ahayn waa in la qabtaa sida ugu dhakhsaha badan, laakiin aan ka badnayn shan maalmood oo iskuul ah laga bilaabo taariikhda ogeysiiska qoraalka ah, hadii dib u dhaca uusan ahayn codsiga waalidka.

   c. <u>Qodobada Shirka Aan Rasmiga Ahayn:</u>

      i. Ardayga iyo waalidku waxay xaq u leeyihiin inay wacaan markhaatiyaal oo soo bandhigo cadaymo qoraal ah, oo ay ku jiraan duubista codka iyo muuqaalka, iyo inay su'aalo weydiiyaan markhaatiyaasha aqoonta tooska ah u leh dhacdada.
      ii. Ardayga iyo waalidku waxaa matali kara looyer ama u doode.
      iii. Haddii waalidka ama ardaygu codsado, iskuulka waa inuu bixiyo adeegyada turjumaadda ee luqadda ugu badan ee ay ku hadlaan.
      iv. Ardayga iyo waalidku waxay xaq u leeyihiin inay helaan go'aan qoraal ah hal maalin gudaheeda oo iskuul kadib shirka.
      v. Hadii Madaxa Iskuulka uu go'aansado in burin gaaban ay sax tahay, go'aanka qoraalka waa inuu sheegaa mudada burinta iyo habraaca cabashada go'aanka, oo ay ku jirto taariikhda ugu dambeysa ee cabashada la gudbin karo.

4. Cabashada Go'aanka Burinta Waqti Gaaban:

    a. Ardayda iyo waalidiinta waxay cabasho u gudbin karaan burinta waqtiga gaaban Gudoomiyaha Waxbarashada ee Gobolka New York.
    b. Cabashada waa in lagu gudbiyaa 30 maalmood gudahood ka dib go'aanka shirka burinta.

5. Laga Reebo Xaaladaha Degdega ah: Hadii joogitaanka ardayga dugsiga uu khatar joogto ah ku yahay dadka ama hantida ama uu yahay hanjabaad joogto ah oo carqaladaynaysa habka waxbarashada, ardayga waa la burin karaa isla markiiba, shir aan rasmi ahayn ayaa la qaban doonaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah ka dib burista, balse aan ka badneen 48 saacadood. Hadii ka burinta degdegga ah ee ardayga loo baahdo, dugsigu waa inuu isla markiiba ogeysiiyaa waalidka si loo go'aamiyo habka ugu wanaagsan ee loogu wareejiyo ardayga waalidka.

## Burinta Waqtiga Dheer (LTS) iyo Ka Saarida[13]

Burinta waqtiga dheer iyo ka saarida dugsiga waa talaabooyin anshaxeed oo aad u daran oo loo isticmaalo marka dhaqanka ardaygu aanu si haboon looga xalin karin iyadoo la adeegsanayo hababka caadiga ah ee dhiirigelinta togan, ka saarista fasalka, ama burinta waqtiga gaaban. Burinta waqtiga dheer iyo ka saarida dugsiga ma dhaqan geli doonaan ilaa baaritaan, ogeysiis, iyo dhegeysi lagu sameeyo iyadoo la raacayaayo shuruudaha soo socda:

1. Baaritaan: Marka arday uu ku dhaqmo dhaqan u qalma burinta waqtiga dheer ama ka saarida dugsiga, Kuxigeenka Maamulka ama Madaxa Dugsiga waa inuu sameeyaa baaritaan sida ku cad shuruudaha #1 ee burinta wakhtiga gaaban gudaha ama dibada dugsiga, sida kor ku xusan. Madaxa Dugsiga wuxuu tixgelin doonaa dhamaan qodobada lagu qeexay Heerarka Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa marka uu samaynayo talo hore oo ku saabsan talaabo anshaxeed. Hadii Madaxa Dugsiga uu go'aansado in u gudbinta LTS ay ku haboon tahay, waa inuu ardayga ogeysiiyaa u gudbinta LTS iyo sababta u gudbinta.

2. Ogeysiinta Waalidka:

Dugsiyadu waa inay bixiyaan ogeysiiska soo socda marka la soo jeediyo burinta waqtiga dheer ama ceyrinta:

a. Madaxa Iskuulka (ama qofka u xilsaaran) waa inuu dadaal kasta sameeyaa si uu waalidka ugu wargeliyo telefoon, email, ama hab elektaroonik kale oo ku saabsan gudbinta ardayga ee burinta isla maalinta go'aanka lagu gaaray in la go'aansado buritaan.

b. Ogeysiis qoraal ah waxaa waalidka la gaarsiin doonaa hal maalin oo iskuul gudahood ah laga bilaabo go'aanka lagu gaaray in buris la sameeyo;

c. Ogeysiiska qoraalka ah waxaa lagu bixin doonaa luqada ugu waalidka yaqaano marka ay suurta gal tahay.

d. Ogeysiiskaas waa inuu ku qornaadaa foomka ogolaaday ee RCSD wuxuuna ka koobnaan doonaa waxyaabaha soo socda:

    i. sharaxaad ku saabsan dhacdada, oo ay ku jirto qaybta *Xeerka Anshaxa* ee ardaygu la sheegay inuu ku xadgudbay;

    ii. mudada ganaaxa suurtogalka ah;

[13] Tixraac.: Sharciga Wabdarashada §3214(c)
Sharciga Waxbarashada §310
8 NYCRR Qeybta 275

iii. warqad sharxaya hababka iyo talaabooyinka togan ee la isticmaalay, ama hadii aan la isticmaalin, sababta aan loo isticmaalin, iyo sababta isticmaalka hababka kale ee ganaaxa laga yaabo inuu xaalada ku haboon yahay;

iv. warqad xaqa ardayga iyo waalidka oo lagu qoray luqad fudud, oo ay ku jiraan xaqa ay ku weydiin karaan markhaatifurta dacwada, helitaanka diiwaanada dugsiga, keenista garsoore ama u doode, xaqa turjumaad shirka ee turjumaan aqoon leh ama qof uu waalidku doorto, iyo xaqa cabashada;

v. sharaxaad ku saabsan waxbarashada bedelan ee ardayga la siin doono ilaa go'aan laga gaaro hadii ardaygu dembi u uku leeyahay waxa uu sameeyay iyo hadii ciqaab ku haboon la fulin doono.

e. Xafiiska Dhageysiga Burinta Waqtiga Dheer wuxuu u diri doonaa ogeysiis waalidka, kaasoo ka koobnaan doona:

i. taariikh, waqti, iyo goob loogu talagalay dhageysiga xaqiiqooyinka;

ii. bayaan ah hadii ardayga la xiray ama baaritaan dembiyeed uu socdo, in wixii bayaan qoraal ah ama afk ah loo isticmaali karo ardayga ee dhanka maxkamada;

iii. liiska Looyaro iyo u doodayaal bilaash ah ama qiimo jaban oo ku yaalo deegaanka; iyo habraacyada cabashada go'aanka anshaxa

3. Dhageysiga:

a. Dhageysigu waa fursad uu sarkaal dhexdhexaad ah oo aan eex lahayn ku go'aamiyo hadii iskuulku buuxin karo culeyska cadeynta si loo taageero eedaha, iyo hadii burinta waqtiga dheer ama ka saarista ay ku haboon tahay.

b. Dhageysigu waa in uu dhaco mudo shan maalmood oo iskuul ah ka dib taariikhda ceyrinta, ilaa iyo hadii uu waalidka codsado taariikh dambe. Hadii dhageysigu dhaco ka dib maalinta shanaad oo waalidka ogolaanin dib u dhaca, ardayga waa in dib loogu celiyo barnaamijkiisa caadiga ah ilaa dhageysiga la qabto iyo ilaa Maamulaha Guud ama wakiilkiisu go'aan ka gaaro eedaha.

c. **<u>Qodobbada Dhegeysiga:</u>**

i. Dhegeysiga waxaa qabanaya sarkaal dhegeysi oo dhexdhexaad ah oo cadaalad leh. Marka la magacaabo, dhamaan saraakiisha dhegeysiga waxaa loo ogol yahay inay dhaqan geliyaan dhaarta oo ay soo saaraan amaro maxkamadeed oo ku saabsan dacwada hortooda.

ii. Dugsigu waa inuu cadeeyaa dhaqanka ardayga ee la sheegay iyadoo la adeegsanayo cadeymo sax ah oo qancinaya.

iii. Dugsigu ma ku tiirsanaan karo kaliya warar an toos aheyn soo u buuxiyo waajibaadka cadeynta.

iv. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay wacaan markhaatiyaal oo soo bandhigaan cadeymo qoraal ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, bayaanada markhaatiyaasha, warbixinada dhacdada, iyo duubista codka iyo muuqaalka; iyo inay weydiiyaan dadka haysta macluumaad la xiriira dhacdada.

v. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan, markii ay codsadaan Degmadu waa inay ku qasbtaa joogitaanka iyo markhaatifurka goobjoogayaasha ee ka tirsan shaqaalaha iskuulka.

vi. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan joogitaanka iyo markhaatifurka goobjoogayaasha ka tirsan shaqaalaha amniga ama sharciga ee ku sugan iskuulka, waxaana iskuulku qaadi doonaa dhamaan talaabooyinka macquulka ah si loo hubiyo joogitaankooda.

vii. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan joogitaanka iyo markhaatifurka ardayda kale ama goobjoogayaasha dhacdada, waxaana iskuulku qaadi doonaa dhamaan talaabooyinka macquulka ah si loo hubiyo joogitaankooda.

viii. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inoo matalo looyar ama u doode.

ix. Sarkaalka dhegeysiga waa inoo tixgelinayaa kaliya cadeymaha la soo bandhigay inta lagu guda jiro dhegeysiga, iyo waa inoo soo saaraa natiijooyinka xaqiiqada iyo talooyinka uu u gudbinayo Kormeeraha ama qofka uu magacaabay ee ku saabsan talaabada anshaxa ee ku haboon. Mudada la soo jeediyay ee burinta ama ka saarista waxaa laga yaabaa in la joojiyo, la yareeyo, ama la ansixiyo.

x. Sarkaalka dhegeysiga waa inuu joojiyaa burinta la soo jeediyay hadii uu go'aamiyo:

*1)* Burinta waxaa lagu soo rogay dhaqan hoos yimaada oo aan laga ogolaan karin *Xeerka Anshaxa.*

2) Iskuulku ma soo bandhigin cadeymo ku filan si uu u buuxiyo waajibaadkiisa cadaynta.

3) Burinta ma aysan ku haboonayn, iyadoo la tixgelinayo qodobada lagu sheegay *Xeerkan*.

xi. Sarkaalka dhegeysiga ama wakiilka kormeereyaasha guud ayaa joojin kara ama yarayn kara burinta la soo jeediyay hadii ay go'aamiyaan:

1) Dugsigu ma aanu adeegsan nidaam ciqaabeed oo tartiib ah oo u dhigma, hadii aanay falka sababay burinta uu aad u culusayn si nidaamka tartiib tartiibka ah aanu ugu haboonayn.

2) Burinta ma aysan ku haboonayn iyadoo la tixgelinayo xaqiiqooyinka la soo bandhigay inta lagu guda jiray dhegeysiga.

3) Dugsigu ma raacin habraacyada xuquuqda ku haboon ee hoos imaada qaybtan.

xii. Marka waalidka ama ardaygu codsado, dugsigu waa inuu bixiyo adeegyo turjumaad ee luqada hooyo ee waalidka.

xiii. Ardayda iyo waalidkooda waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan go'aanka cadaalada ama dambi la'aanta iyo ciqaabta, hadii dambiga la xaqiijiyo. Hadii Kormeeraha ama qofka uu magacaabay go'aansado in burinta mudo dheer ama ka saarista ardayga dugsiga la ansixinayo, go'aanka qoraalka ah waa inuu ka koobnaadaa mudada burinta, dhaqanka ardayga lagu helay, iyo habraaca cabashada go'aanka, oo ay

ku jirto taariikhda ugu dambeysa ee cabashada la gudbin karo.

xiv. Go'aanka qoraalka ah waa in loo soo diraa ardayga/waalidka sadex maalmood oo iskuul gudahood kadib markii qofka uu Kormeeraha magacaabay helo go'aanka ciqaabta.

xv. Dugsigu waa inuu hayaa diiwaan sax ah oo dhameystiran oo dhegeysiga ah, laakiin diiwaan qoraal ah lagama doonayo; duubista codka ama muuqaalka ayaa loo arkaa inay tahay diiwaan ku filan. Ardayda iyo waalidiintooda waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan iyo helaan diiwaankan si bilaash ah.

4. Qodobada Cabashada:

a. Waalidiinta ama ardayda waxay cabasho ka qaadan karaan go'aanka ganaaxa mudo 30 maalmood gudahooda oo iskuul ah laga bilaabo taariikhda waalidka helo warqada go'aanka ganaaxa oo soo saaray Madaxa Sare.

b. Go'aan qoraal cabasho, oo ay ku jirto sababta go'aanka loo gaaray, ayaa la soo saari doonaa mudo 30 maalmood gudahooda oo iskuul ah laga bilaabo taariikhda cabashada la gudbiyay.

c. Cabashada waxay fiirin doontaa in diiwaanka muujinayo in xuquuqda ardayga lagu xadgudbay inta lagu jiray baaritaanka, dhagaysiga, ama habraaca cabashada.

d. Go'aanka cabashada waa in lagu saleeyaa keliya diiwaanka dhagaysiga.

e. Burinta ama ka saarista waa la taageeri karaa, waa la burin karaa, ama waa la dhimi karaa.

f. Gudiga Waxbarashada waa inay ganaaxa buriyaan hadii la go'aansado:

i. Diiwaanka ma hayo cadeyn ku filan oo taageera go'aanka la gaaray.
ii. Ganaaxa waxaa lagu soo rogay fal dabeecadeed oo *Xeerka Anshaxa* ee iskuulka mamnuucayo in lagu ganaaxo.
iii. Diiwaanka waxoo muujinayaa in iskuulku aanu raacin habraacyada cadaalada ee ku xusan qaybtaan.
iv. Ganaaxa ma ahayn mid ku haboon marka la tixgeliyo qodobada ku taxan Heerarka Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa.

g. Gudiga Waxbarashada woo burin karaa ama yareyn karaa ganaaxa hadii uu go'aansado:

i. Dugsiga ma adeegsanin ciqaab tartiib ah oo heerar heerar leh ku haboonayn.
ii. Ganaaxa ma ahayn mid ku haboon iyadoo la tixgelinayo xaqiiqooyinka lagu soo bandhigay dhageysiga.

h. Hadii qoyska uu ka soo horjeesto go'aanka Gudiga, cabasho leh oo ku haboon, ilaa hadii dhaqanka sababay ganaaxa uu ahaa mid aad u culus oo aan ciqaab waxaa loo gudbin karaa Gudiga Waxbarashada ee Gobolka New York mudo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda go'aanka Gudiga.

## Ardayda Soo Galaysa Degmada Ee Hada Ku Maqan Burinta Waqti Dheer ama Ka Saaran Dugsiga[14]

1. Baaritaan: Marka arday uu ku lug yeesho dhaqan keeni kara in la ganaaxo mudo dheer ama laga eryo Degmo hore, Agaasimaha Guud ama wakiilkiisa waa inuu ka codsadaa Degmada hore xogta tixraaca ganaaxa. Agaasimaha Guud ama wakiilkiisu waxay baari doonaan ganaaxa mudada dheer iyagoo dib u eegaya dhacdada diiwaanada Degmada hore. Agaasimaha Guud ama wakiilkiisa waxay tixgelin doonaan dhamaan qodobada lagu sheegay heerarka faragelinta iyo jawaabaha edbinta marka ay go'aaminayaan talaabada edbin ee la qaadayo. Agaasimaha Guud wuxuu go'aamin doonaa inuu burburiyo ama sii hayo ganaaxa mudada dheer ee Degmada hore 5 maalmood iskool gudaheed laga bilaabo marka ardaygu isdiiwaangeliyo.

2. Ogeysiinta Waalidka:

   Degmada waa inay bixisaa ogeysiiska soo socda marka la soo jeedinayo in la sii hayo ganaaxa mudada dheer ama ka saarista ardayga ee Degmadii hore:

   a. Kormeeraha Guud (ama wakiilkiisa) waa inuu dadaal kasta sameeyaa si uu waalidka ugu soo wargeliyo telefoon, email, ama hab kale oo elektaroonig ah isla maalinta go'aanka lagu gaadho in ganaaxa Degmadii hore la sii hayo;

   b. Ogeysiis qoraal ah waa in loo diraa waalidka hal maalin oo dugsi ah gudahiisa marka la gaaro go'aanka in la sii wado ganaaxa ama burista;

   c. Ogeysiiska qoraalka ah ayaa loogu diri doonaa luqada hooyo ee waalidka hadii ay suurtagal tahay;

   d. Ogeysiiskaas waa inuu ka koobnaadaa waxyaabaha soo socda:

      i. sharaxaad ku saabsan dhacdada, oo ay ku jirto qaybta *Xeerka Anshaxa* ee ardaygu la sheegay inuu ku xadgudbay;

      ii. mudada ganaaxa suurtogalka ah;

      iii. warqad xaqa ardayga iyo waalidka oo lagu qoray luqad fudud, oo ay ku jiraan xaqa ay ku weydiin karaan markhaatifurta dacwada, helitaanka diiwaanada dugsiga, keenista garsoore ama u doode, xaqa turjumaad shirka ee turjumaan aqoon leh ama qof uu waalidku doorto, iyo xaqa cabashada;

      iv. Sharaxaad ku saabsan waxbarashada bedelan ah ee ardayga la siin doono ilaa go'aan laga gaaraayo inuu ardaygu dembi galay iyo haddii ganaax la saari doono.

   e. Xafiiska Dhageysiga Burinta Waqtiga Dheer wuxuu u diri doonaa ogeysiis waalidka kaasoo ka koobnaan doona:

      i. taariikh, waqti, iyo goob loogu talagalay dhageysiga xaqiiqooyinka;

      ii. bayaan ah hadii ardayga la xiray ama baaritaan dembiyeed uu socdo, in wixii bayaan qoraal ah ama afk ah loo isticmaali karo ardayga ee dhanka maxkamada;

---

[14] Tixraac.: Sharciga Waxbarashada §3214(c)
Sharciga Waxbarashada §310
8 NYCRR Part 275

iii. liiska Looyaro iyo u doodayaal bilaash ah ama qiimo jaban oo ku yaalo deegaanka; iyo habraacyada cabashada go'aanka anshaxa.

3. Dhageysiga:

a. Dhageysigu waa fursad uu sarkaal dhexdhexaad ah oo aan eex lahayn ku go'aamiyo hadii iskuulku buuxin karo culeyska cadeynta si loo taageero eedaha, iyo hadii burinta waqtiga dheer ama ka saarista ay ku haboon tahay.

b. Dhageysigu waa in uu dhaco mudo shan maalmood oo iskuul ah ka dib taariikhda ceyrinta, ilaa iyo hadii uu waalidka codsado taariikh dambe. Hadii dhageysigu dhaco ka dib maalinta shanaad oo waalidka ogolaanin dib u dhaca, ardayga waa in dib loogu celiyo barnaamijkiisa caadiga ah ilaa dhageysiga la qabto iyo ilaa Maamulaha Guud ama wakiilkiisu go'aan ka gaaro eedaha.

c. **<u>Qodobada Dhageysiga:</u>**

i. Dhegeysiga waxaa qabanaya sarkaal dhegeysi oo dhexdhexaad ah oo cadaalad leh. Marka la magacaabo, dhamaan saraakiisha dhegeysiga waxaa loo ogol yahay inay dhaqan geliyaan dhaarta oo ay soo saaraan amaro maxkamadeed oo ku saabsan dacwada hortooda.

i. Cadeymaha laga helay Degmada Hore, hadii ay jiraan, waa in dib loo eego inta lagu jiro dhageysiga si loo cadeeyo dhaqanka ardayga ee la sheegay iyadoo la adeegsanayo cadeymo sax ah oo qancinaya.

ii. Sarkaalka Dhageysanaayo ma ku tiirsanaan karo go'aanka kaliya ee Degmadii Hore ee ardayga lagu buriyay si uu u buuxiyo miisaanka cadeynta.

iii. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay soo wacaan markhaatiyaal iyo inay soo bandhigaan cadayn qoraal ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn, hadalada markhaatiyaasha, warbixinada dhacdada, iyo duubista codka iyo muuqaalka; iyo inay su'aalo weydiiyaan dadka haysta macluumaad ku saabsan dhacdada.

iv. Ardayda iyo waalidiinta waxay xaq u leeyihiin in ay wakiil ka dhigtaan looyer ama u doode.

v. Sarkaalka dhegeysiga waa inoo tixgelinayaa kaliya cadeymaha la soo bandhigay inta lagu guda jiro dhegeysiga, iyo waa inoo soo saaraa natiijooyinka xaqiiqada iyo talooyinka uu u gudbinayo Kormeeraha ama qofka uu magacaabay ee ku saabsan talaabada anshaxa ee ku haboon. Mudada la soo jeediyay ee burinta ama ka saarista waxaa laga yaabaa in la joojiyo, la yareeyo, ama la ansixiyo.

vi. Sarkaalka dhegeysiga waa inuu joojiyaa burinta la soo jeediyay hadii uu go'aamiyo:

1) Burinta waxaa lagu soo rogay dhaqan hoos yimaada oo aan laga ogolaan karin *Xeerka Anshaxa*.

2) Iskuulku ma soo bandhigin cadeymo ku filan si uu u buuxiyo waajibaadkiisa cadaynta.

3) Burinta ma aysan ku haboonayn, iyadoo la tixgelinayo qodobada lagu sheegay *Xeerkan*.

vii. Gudiga Waxbarashada woo burin karaa ama yareyn karaa ganaaxa hadii uu go'aansado:

1) Degmadii hore ma aanu adeegsan nidaam ciqaabeed oo tartiib ah oo u dhigma, hadii aanay falka sababay burinta uu aad u culusayn si nidaamka tartiib tartiibka ah aanu ugu haboonayn.

2) Mudada ganaaxa ardayga ee ay dejisay Degmadii hore waa mid xad dhaaf ah ama aan waafaqsanayn *Xeerka Anshaxa*.

3) Burinta ma aysan ku haboonayn iyadoo la tixgelinayo xaqiiqooyinka la soo bandhigay inta lagu guda jiray dhegeysiga.

viii. Marka waalidka ama ardaygu codsado, dugsigu waa inuu bixiyo adeegyo turjumaad ee luqada hooyo ee waalidka.

ix. Ardayda iyo waalidkooda waxay xaq u leeyihiin inay helaan ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan go'aanka cadaalada ama dambi la'aanta iyo ciqaabta, hadii dambiga la xaqiijiyo. Hadii Kormeeraha ama qofka uu magacaabay go'aansado in burinta mudo dheer ama ka saarista ardayga dugsiga la ansixinayo, go'aanka qoraalka ah waa inuu ka koobnaadaa mudada burinta, dhaqanka ardayga lagu helay, iyo habraaca cabashada go'aanka, oo ay ku jirto taariikhda ugu dambeysa ee cabashada la gudbin karo.

x. Go'aanka qoraalka ah waa in loo soo diraa ardayga/waalidka sadex maalmood oo iskuul gudahood kadib markii qofka uu Kormeeraha magacaabay helo go'aanka ciqaabta.

xi. Dugsigu waa inuu hayaa diiwaan sax ah oo dhameystiran oo dhegeysiga ah, laakiin diiwaan qoraal ah lagama doonayo; duubista codka ama muuqaalka ayaa loo arkaa inay tahay diiwaan ku filan. Ardayda iyo waalidiintooda waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan iyo helaan diiwaankan si bilaash ah.

4. Qodobada Cabashada:

a. Waalidiinta ama ardayda waxay cabasho ka qaadan karaan go'aanka ganaaxa mudo 30 maalmood gudahooda oo iskuul ah laga bilaabo taariikhda waalidka helo warqada go'aanka ganaaxa oo soo saaray Madaxa Sare.

b. Go'aan qoraal cabasho, oo ay ku jirto sababta go'aanka loo gaaray, ayaa la soo saari doonaa mudo 30 maalmood gudahooda oo iskuul ah laga bilaabo taariikhda cabashada la gudbiyay.

c. Cabashada waxay fiirin doontaa in diiwaanka muujinayo in xuquuqda ardayga lagu xadgudbay inta lagu jiray baaritaanka, dhagaysiga, ama habraaca cabashada.

d. Go'aanka cabashada waa in lagu saleeyaa keliya diiwaanka dhagaysiga.

e. Burinta ama ka saarista waa la taageeri karaa, waa la burin karaa, ama waa la dhimi karaa.

f. Gudiga Waxbarashada waa <u>inay</u> ganaaxa buriyaan hadii la go'aansado:

i. Diiwaanka ma hayo cadeyn ku filan oo taageera go'aanka la gaaray.
ii. Ganaaxa waxaa lagu soo rogay fal dabeecadeed oo *Xeerka Anshaxa* ee iskuulka

mamnuucayo in lagu ganaaxo.

iii. Diiwaanka waxoo muujinayaa in iskuulku aanu raacin habraacyada cadaalada ee ku xusan qaybtaan.

iv. Ganaaxa ma ahayn mid ku haboon marka la tixgeliyo qodobada ku taxan Heerarka Faragelinta iyo Jawaabaha Anshaxa.

g. Gudiga Waxbarashada woo burin karaa ama yareyn karaa ganaaxa hadii uu go'aansado:

i. Dugsigu ma aanu adeegsan nidaam ciqaabeed oo tartiib ah oo u dhigma, hadii aanay falka sababay burinta uu aad u culusayn si nidaamka tartiib tartiibka ah aanu ugu haboonayn.

ii. Ganaaxa ma ahayn mid ku haboon iyadoo la tixgelinayo xaqiiqooyinka lagu soo bandhigay dhageysiga.

h. Hadii qoyska uu ka soo horjeesto go'aanka Gudiga, cabasho waxaa loo gudbin karaa Gudiga Waxbarashada ee Gobolka New York mudo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda go'aanka Gudiga.

### Helitaanka Dugsiyada

Marka laga reebo xaaladaha degdega ah, hadii Maamulaha uu doonayo in uu xadido gelitaanka xubnaha qoyska ee dugsiga, waa in kormeeraha Maamulaha uu marka hore ogolaado talaabadaas. Maamuluhu waa in uu si qoraal ah ugu cadeeyaa xubnaha qoyska ee la xadiday sababta xadidida, mudada, iyo shuruudaha xadidida (tusaale, waa in ay horay u balansadaan ama lala socdo gudaha dhismaha).

# LIFAAQA D[15]

# Ardayda Naafada

Gudiga Waxbarashada waxaa ka go'an siyaasada ka mid noqoshada ardayda naafada ah ee dhamaan barnaamijyada uu Dugsiga bixiyo, iyadoo la tixgelinayo baahiyaha gaarka ah ee sharcigu qeexay. Sida ugu macquulsan, iyo iyadoo la raacayo baahida gaarka ah ee ardayga, ardayda naafada ah waa inay wax la bartaan ardayda aan naafada ahayn.

Gudigu wuxuu aqoonsan yahay in mararka qaar loo baahdo in laga joojiyo, laga saaro, ama si kale loo ciqaabo ardayda naafada ah si loola tacaalo dhaqanka qashqashaadaayo ama dhibaato abuuraya.

*Xeerkan Dhaqanka* wuxuu siinayaa ardayda naafada ah ee lagu ciqaabayo xuquuq aan ka badanayn ama ka yarayn tan si cad loogu sheegay shuruucda federaalka iyo gobolka ee quseeya, gaar ahaan Sharciga Waxbarashada Ardayda Naafada ah (IDEA) iyo Xeerarka Gudoomiyaha oo ay ku jirto Qaybta 201 (Ilaalada Habraaca ee Ardayda Naafada ah), sida hoos loogu xusay. Gudiga waxaa ka go'an in la hubiyo in habraacyada loo raaco marka ardayda naafada ah laga joojiyo, laga saaro, ama si kale loo ciqaabo ay waafaqsan yihiin ilaalinta habraaca ee uu sharcigu iyo xeerarku dhigayaan.

Marka arday laga saaro fasalka oo ay ka dhalanayso in ardaygu uu helo in ka badan toban maalmood oo iskuul laga saaray inta lagu jiro sanad dugsiyeedka, ama hal mal ka saarid oo keliya ay keento in ka badan toban maalmood oo ka baxsan barnaamijka caadiga ah ee ardayga, waalidka iyo mas'uul ka tirsan waxbarashada gaarka ah ee Degmada ayaa dib u eegaya faylka ardayga si loo go'aamiyo hadii dhaqanka uu sababay ama uu si toos ah oo xoogan ugu xirnaa naafanimada *waxbarasho* ee ardayga, ama hadii uu ahaa natiijada tooska ah ee fashilka Degmada ee fulinta Qorshaha Waxbarasho ee Shaqsiga (IEP) (Dib u Eegista Go'aanka Muujinta, ama "MDR"). MDR waa in loo sameeyaa arday kasta oo leh Qorshe Waxbarasho Shaqsiyaysan (IEP) ama Qorshe 504 ah oo lagu dabaqay isbedel anshaxeed oo ku saabsan booska. Hadii ardaygu aanu lahayn IEP ama Qorshe 504, laakiin loo maleynayo inuu yahay arday naafo ah iyadoo lagu saleynayo shuruudo gaar ah oo lagu qeexay IDEA, ardayga waxaa la siinayaa ilaalinta habraaca saxda ah sida ardayga leh IEP ee ka saarista sida anshaxeed.

MDR ga waxaa loo qaban doonaa si gooni ah ka dib dhegeysiga ganaaxa, waxaana la qaban doonaa 10 maalmood gudahood laga bilaabo go'aanka anshaxa ee keenay bedelka goobta waxbarasho. Kooxda MDR ga waxay ka koobnaan doontaa xubnaha Gudiga Waxbarashada Gaarka ah (CSE), oo ay ku jiraan waalidka. Hadii lagu go'aamiyo in dhaqanka ilmaha uu yahay muujin ka mid ah naafadiisa, kooxda IEP ga waa inay: (1) qabato qiimeyn shaqo oo ku saabsan dhaqanka iyo hirgeliso qorshe ka hortag ah oo dhaqan, hadii LEA aysan hore u sameyn; (2) dib u eegto qorshaha horay u jiray oo wax ka bedesho si looga jawaabo dhaqanka; iyo (3) marka laga reebo kiisaska hub, daroogo, ama dhaawac jidheed oo culus, ilmaha waa in dib loogu celiyo goobtii laga saaray, ilaa iyo inta waalidka iyo Hay'ada Waxbarashada ee Deegaanka (LEA) ay ku heshiiyaan bedelka goobta waxbarasho oo qayb ka noqota wax ka bedelida qorshaha ka hortaga dhaqanka.

Sharciga IDEA 2004 wuxuu u ogolaanayaa iskuulada, marka lagu go'aamiyo in xadgudubka uusan ahayn muujinta naafanimada ilmaha, in loo adeegsado hababka anshaxa ee la midka ah kuwa ilmaha aan naafada ahayn, iyadoo la hubinayo in shuruudaha FAPE la buuxiyo, isla markaana la siin karo FAPE gaas goob

[15] Cross-ref: Students with Disabilities (4202)
Ref.: P.L. 108-446 "Individuals with Disabilities Education Improvement Act of 2004"
Education Law §3214(3)(g)
8 NYCRR 201, *et. seq*

waxbarasho oo kale oo ku meel gaadh ah hadii ay isku raacaan Degmada iyo Waalidka. Marka dhaqanka ardaygu ku lug leeyahay dhaawac jidheed oo culus, hub, daroogo sharci daro ah ama maadooyinka xakameysan (sida ku qeexan xeerka dambiyada iyo sida lagu kala saaray Koodhkan Anshaxa), ardayga waa lagu ciqaabi karaa iyadoo la raacayo Qaybta 201.7(e) ee Xeerarka Gudiga Waxbarashada.

Ardayda naafada ah ee la cayriyo muddo aan ka badnayn toban (10) maalmood oo iskuul ah, waa in la siiyo xuquuqaha la midka ah kuwa ardayda aan naafada ahayn. Xaalad kasta, Degmadu waa inay tixgelisaa duruufaha gaarka ah ee ardayga marka la go'aaminayo hadii lagu go'aamin lahaa isbedel anshax ee arday naafo qabo oo ku xadgudbay Koodhkan Anshaxa.

Hadii ay dhacdo wax ka bedel ama wax ka saxid ku timaada sharciga federaalka iyo kan gobolka, ama amar kasta oo maxkamad awood leh oo saameynaya ardayda naafada ah ee Degmada, Madaxa Sare waxaa loo ogol yahay inuu soo saaro xeerar loogu talagalay in lagu hubiyo isku xirnaanta barnaamijkeena iyo shuruudaha sharcigaas.

# LIFAAQA E

# Sharci Fulinta

## DOORKA SHARCI FULINTA IYO BAARITAANADA DAMBIYADA

Gudiga Waxbarashada waxoo qirayaa doorka ay hay'adaha amaanka ku leeyihiin ka qaybqaadashada ilaalinta badbaadada iyo amaanka dugsiyada. Joogitaanka ciidamada amaanku marka arday la xirayo ama la heysto wuxuu raacayaa Siyaasada Gudiga Waxbarashada 5600 iyo Xeerka 5600-R.

### Iskoolka Degmada iyo Maamulada Iskoolada

1. Maamulaha dugsiga, ama qof uu magacaabo, wuxuu si degdeg ah ula xiriiri doonaa waalidka/ilaaliyaha marka hay'adaha amaanka ay doonayaan in ay wareystaan ama baaraan arday qayb ka ah baaritaan dembiyeed. Hadii aan la heli karin waalidka/mas'uulka, ama uu waalidku/mas'uulka diido inuu ogolaado baaritaanka ama wareysiga, lama samayn karo wareysi ama baaritaan ardayga lagu sameeyo, ilaa ardaygu uu yahay ugu yaraan 18 sano jir ama ay jirto khatar degdeg ah oo amaanka ah. Marka ay suuragal tahay, waalidka/mas'uulka (ama maamulaha dugsiga ama qofka uu magacaabay hadii waalidka/mas'uulka aan la heli karin) ayaa goob joog ka ahaan doona inta lagu jiro wareysi ama baaritaan ay hay'adaha amaanka ku sameenayaan ardayga gudaha hantida dugsiga ama munaasabad dugsiga ah.

2. Sida ugu macquulsan, maamulaha dugsiga, ama qofka uu magacaabay, wuxuu ogeysiin doonaa hay'adaha amaanka ee ku lug leh xarig ama baaritaan dembiyeed hadii ardaygu u baahan yahay adeegyo khaas ah ee Degmada ka warqabto (tusaale ahaan, gargaar caafimaad, daawo, naafo, ama adeeg turjumaan luqad).

### Ka Qaybgalka Hay'adaha Amaanka ee Baaritaanka iyo Wareysiyada Ardayda

Mas'uuliyiinta Degmada waxay la shaqayn doonaan hay'adaha amaanka si loo ilaaliyo jawi dugsiyeed oo amaan ah. Hay'adaha amnigu waxay leeyihiin awood xadidan oo ay ku wareystaan ama ku baaraan ardayda gudaha dugsiyada ama munaasabadaha dugsiga, ama ay u isticmaalaan dhismayaasha dugsiga ujeedooyin la xiriira baaritaano dembiyeed. Hay'adaha amnigu waxay geli karaan hantida dugsiga ama munaasabad dugsiyeed si ay u wareystaan ama u baaraan arday, ama u sameeyaan baaritaan dembiyeed oo ku lug leh ardayda, oo keliya hadii ay haystaan:

1. Warqad baaritaan ama warqad xarig, taas oo Maamulaha dugsigu xaqiijinayo iyadoo lala xiriirayo Waaxda Sharciga;
2. Sabab macquul ah oo lagu aaminsan yahay in dembi ka dhacay gudaha hantida dugsiga ama munaasabad dugsiyeed; ama
3. Ka jawaabid dhacdo iyo/ama xaalad degdeg ah oo dugsigu soo sheegay.

Hadii sarkaal ka tirsan hay'adaha amniga uu doonayo inuu ku wareysto ama baaro arday gudaha hantida dugsiga iyadoo ay qayb ka tahay baaritaan dembiyeed rasmi ah, Maamulaha dugsiga ama qofka uu magacaabo waa inuu marka hore ogeysiiyo waalidka/mas'uulka ardayga si uu waalidka/mas'uulka ugu suurtagalo inuu goob joog ka noqdo wareysiga ama baaritaanka. Hadii aan la heli karin waalidka/mas'uulka, ama uu waalidku/mas'uulka diido inuu ogolaado baaritaanka ama wareysiga, <u>lama</u> fulin doono wareysi ama baaritaan, ilaa uu ardaygu yahay ugu yaraan 18 sano jir. Marka ay suuragal tahay, waalidka/mas'uulka (ama Maamulaha dugsiga ama qofka uu magacaabo hadii waalidka/mas'uulka la waayo) ayaa goob joog ka ahaan doona inta lagu jiro wareysi ama

baaritaan ay hay'adaha amnigu ku sameeyaan ardayga gudaha hantida dugsiga ama munaasabad dugsiyeed.

Ardayda lagu wareysto gudaha hantida dugsiga ama munaasabad dugsiyeed waxaa la siin doonaa isla xuquuqaha ay leeyihiin marka ay ka baxsan yihiin dugsiga. Xitaa hadii waalidka/mas'uulka uu jooggo, ardayda da'da kasto ah waxay xaq u leeyihiin inay aamusnaan karaan iyo inay codsan karaan looyarkooda marka hay'adaha amnigu wareysanayaan, ha ahaato gudaha hantida dugsiga ama meel ka baxsan.

**Baaritaanada Xadgudubka/Dayacaada Caruurta Fuliyaan Adeegyada Ilaalinta Caruurta (CPS) iyo Hay'adaha Sharciga**

Iyadoo la waafajinayo balanqaadka Degmada ee ah in ardayda laga ilaaliyo waxyeelada iyo waajibaadka saraakiisha dugsigu u leeyihiin inay u soo gudbiyaan Adeegyada Ilaalinta Caruurta (CPS) marka ay jirto sabab macquul ah oo looga shakiyo in arday la dayacay, lagu xadgudbay, ama si xun loola dhaqmay, Degmada waxay siin doontaa xog iyo kaalmo shaqaalaha CPS ee deegaanka ama xubnaha kooxaha la shaqeeyo shaqaalahaas oo ka jawaabaya eedeymaha ku saabsan xadgudubka ama dayaca caruurta, iyo/ama baaritaanada ilaalinta masuuliyada caruurta. Xogta iyo kaalmadaas waxaa ka mid ah helitaanka diiwaanada khuseeya baaritaanka, iyo sidoo kale wareysiyo lala yeesho caruurta lagu magacaabay warbixinta dhibanayaasha, walaalaha caruurtaas, ama caruur ku nool isla guriga dhibanaha. Maamulayaasha Degmada Dugsiga looma ogola inay la xiriiraan waalidiinta/mas'uuliyiinta ilaa si cad loogu wargeliyo inay sidaas sameeyaan ay ka imaadeen shaqaalaha CPS ee ku lugta leh baaritaanka.

Dhamaan codsiyada ay CPS ku doonayso inay ku wareystaan arday gudaha hantida dugsiga waa in si toos ah loogu gudbiyaa Maamulaha dugsiga ama qofka uu magacaabo. Shaqaalaha Adeegyada Ilaalinta Caruurta (CPS) iyo xubnaha kooxaha kala shaqo ee la socda waa inay u hogaansamaan nidaamka booqdayaasha ee Degmada, muujiyaan aqoonsigooda, isla markaana magacaabaan ilmaha wareysiga lagu samayn doono. Dadaal macquul ah waa in la sameeyaa si wareysiyadaas loogu qabto meel siisa ardayga asturnaanta ugu badan oo ay ku jirto carqalad yar inta ay suurtogal tahay, iyadoo la tixgelinayo xadidyada dhismayaasha dugsiyada.

Maamulaha dugsiga ama qofka uu magacaabo ayaa go'aamin doona hadii loo baahan yahay ay haboon tahay in xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, maamule ama kalkaaliso, ay goobjoog ka noqdaan wareysiga, gudaha ama dibada qolka wareysiga. Qof kasta oo ka soo qayb gala wareysiga CPS oo lala yeeshanaayo arday wuxuu goob joog ugu yahay keliya inuu si shucuur ah u taageero ardayga, iyo xaq ma u laha inuu ka qaybqaato ama saameeyo habka wareysiga.

Shaqaalaha CPS looma ogola inay ka saaraan arday hantida dugsiga la'aanta amar maxkamadeed, hadii aanay jirin sabab macquul ah oo ay ku aaminsan yihiin in ardaygu ku jiri doono khatar xadgudub hadii aan laga saarin dugsiga ka hor inta aan si macquul ah loo heli karin amar maxkamadeed. Hadii shaqaalaha CPS ay aaminsan yihiin in ardaygu khatar xadgudub ku jiri doono, waxay xaq u leeyihiin inay ka saaraan ardayga iyagoo aan haysanin amar maxkamadeed isla markaana aan haysanin ogolaanshaha waalidka.

Shaqaalaha Degmada waxay la xiriiri doonaan Waaxda Sharciga si ay u helaan cadeyn kasta oo ku saabsan habraacyadan kor ku xusan.

# LIFAAQA F[16]

# Warbixinta Amaanka Iskuulka iyo Deegaanka Waxbarasho (SSEC)

Gudiga Waxbarashada waxaa ka go'an kor u qaadida iyo ilaalinta amaanka dhamaan ardayda, shaqaalaha, iyo booqdayaasha dugsiyada. Gudigu sidoo kale waxaa ka go'an ilaalinta deegaan dugsiyo oo ka madax banaan tacadi, cay, iyo takoor. Iyadoo loo marayo u hogaansanaanta go'aanadan iyo sharciga iyo xeerarka gobolka, Degmada waxay u gudbin doontaa Warbixin Sanadle ah Gudoomiyaha Waxbarashada oo ku saabsan dhacdooyinka rabshadaha iyo carqaladeynta iyo dhacdooyinka muhiimka ah ee tacadi/cay/takoorka, ee qaybta ka ah Ururinta Xogta Soo Koobida Amaanka Dugsiga iyo Deegaanka Waxbarasho (SSEC) ee Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York. Intaas waxaa dheer, Gudiga waxa uu xogtan u adeegsan doonaa si uu u qiimeeyo amaanka iyo deegaanka waxbarasho ee dugsiyadiisa, halka ay ku haboon tahay, u aqoonsado oo uu talaabooyin u qaado si loo horumariyo nabadqabka, amaanka, iyo wanaaga ardayda, shaqaalaha, iyo booqdayaasha.

Shuruudaha Warbixinta

Maamulaha dhismaha dugsiga mid walba waxa uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta dhamaan dhacdooyinka rabshadaha ah iyo kuwa wax carqaladeeya, iyo dhacdooyinka culus ee ku saabsan dhibaataynta, cagajuglaynta, iyo takoorka, ee ka dhacay gudaha hantida dugsiga, xaflad dugsiyeed, ama munaasabad uu dugsigu soo qabanqaabiyey, iyadoo lagu diiwaangelinayo PowerSchool. Madaxa Waxbarashada ama qofka uu magacaabay ayaa mas'uul ka ah soo saarista xogta dhacdooyinka ee laga helo PowerSchool, isku dubaridka warbixinahaas si loogu daro warbixinta sanadlaha ah, iyo u gudbinta warbixintaas Gudiga. Warbixinta kooban waxay ka koobnaan doontaa dhamaan macluumaadka uu sharcigu waajibiyay, iyo waxaa loo gudbin doonaa Golaha ugu dambayn taariikhda uu Golaha cayimay. Madaxa Waxbarashada waxa kale oo warbixinta kooban u soo bandhigi doonaa Gudiga kulankiisa ugu horeeya ee kadib u gudbinta warbixinta Golaha.

Sidoo kale, maamulayaasha dugsiyada waxa looga baahan yahay inay bixiyaan warbixin joogto ah oo ku saabsan xogta iyo isbedelada la xiriira dhibaataynta, cagajuglaynta, iyo/ama takoorka, iyo soo gudbiyaan Madaxa Waxbarashada ugu yaraan hal mar sanad dugsiyeedkiiba.

Degmada waxay mas'uul ka tahay hubinta in koobiyo ka mid ah warbixinada SSEC, ha ahaadaan kuwo dhacdooyin gaar ah ama warbixinada kooban, lagu hayo dugsiga ilaa qofka ugu da'da yar ee ku lugta lahaa dhacdadaas uu gaaro 27 sano jir. Foomamka warbixinta dhacdooyinka shaqsiyeed laguma kaydin doono galka ardayga mana loo diri doono dugsi kale ama degmada oo ardayga wax ka sii baran doono.

Ilaalinta xogta sirta ah

Warbixin kasta oo ku saabsan dhacdo rabshad ama carqaladeyn ah, ama dhibaatayn, cagajuglayn, iyo takoorka oo

[16] Tixraac aan rasmi ahayn: Xeerka Ka Hortaga iyo Faragelinta Caatinta iyo Dhibaataynta Ardayda (0115)

Tixraac: Sharciga Waxbarashada §10-18 (Sharciga Sharafta Dhamaan Ardayda)
Sharciga Waxbarashada §2802 (Nidaamka Wadajirka ah ee Warbixinta Dhacdooyinka Rabshadaha)
8 NYCRR §100.2 (gg) (Nidaamka Wadajirka ah ee Warbixinta Dhacdooyinka Rabshadaha)
8 NYCRR §185.15 (Lifaaqa L) (Jadwalka Kaydinta iyo Maareynta LGS-1 ee Diiwaanada Dowladda Hoose ee New York)

loo diyaariyey si waafaqsan sharciga, waxa laga heli karaa Waaxda Waxbarashada Gobolka marka la codsado. Dhamaan magacyada iyo macluumaadka kale ee qof ahaaneed ee lagu daray warbixin kasta waa sir, iyo waa mamnuuc in loo shaaciyo qof kale si loo isticmaalo ujeedooyin aan ahayn kuwa lagu cadeeyey Sharciga Waxbarashada §2802, marka laga reebo hadii sharcigu si kale u ogolaaday.

Qaamuuska Erayada ee Nidaamka Warbixinta Amaanka Dugsiga iyo Jawiga Waxbarashada (SSEC)[17]

1. Dil: Wax kasta oo ficil rabshad leh oo ula kac ah oo keena dhimashada qof kale

2. Xadgudub Galmo: Ficil kasta oo uu qofka 10 sano ama ka weyn geysto, kaasoo ka mid noqon lahaa dambiga weyn ee Qodobka 130 ee Sharciga Ciqaabta, iyadoo la tixgelinayo awooda horumar ee qofka uu ku samayn karo ujeedada ficilkaas, isla markaana dugsigu uu qofka u gudbiyey booliiska ficilka la soo sheegay.

3. Weerar: Ficil kasta oo uu qofka 10 sano ama ka weyn geysto, kaasoo ka mid noqon lahaa dambiga weyn ee Qodobka 120 ee Sharciga Ciqaabta, iyadoo la tixgelinayo awooda horumar ee qofka uu ku samayn karo ujeedada ficilkaas, isla markaana dugsigu uu qofka u gudbiyey booliiska ficilka la soo sheegay.

4. Haynta Hub: Ficil kasta oo uu qofka 10 sano ama ka weyn geysto, kaasoo ka mid noqon lahaa dambiga weyn ee Qodobka 265.00 ee Sharciga Ciqaabta, iyadoo la tixgelinayo awooda horumar ee qofka uu ku samayn karo ujeedada ficilkaas, isla markaana dugsigu uu qofka u gudbiyey booliiska ficilkaas.

5. Dhacdooyinka Muhiimka ah ee Takoorka, Dhibaataynta iyo Caatinta:
   a. *Dhacdooyinka Muhiimka ah ee Takoorka, Dhibaataynta iyo Caatinta (Marka laga reebo Caatinta Internet ka)*: Dhacdo kaliya oo la xaqiijiyey ama taxane dhacdooyin la xiriira oo la xaqiijiyey, halkaasoo arday lagu dhibay, lagu caaayey, iyo/ama lagu takooray arday kale ama shaqaale ku sugan hantida dugsiga ama munaasab dugsiyeed. Intaa waxaa dheer, eraygan waxa uu sidoo kale ka koobnaanayaa dhacdo la xaqiijiyey ama taxane dhacdooyin la xiriira oo dhibaataayn ama caatin ka dhacda meel ka baxsan hantida dugsiga, sida ku cad xeerka Golaha §100.2(kk)(1)(viii). Dhaqankaas waxa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xadidnayn, hanjabaad, cabsi gelin, ama xadgudub ku saleysan jinsiyada qofka dhabta ah ama la malaynayo, midabka, miisaanka, asal qaran, koox qowmiyadeed, diinta, caado diimeed, naafonimo, jihada galmada, jinsi, ama jihada galmada.
   Xeerka Golaha 100.2(kk)(1)(viii) waxa uu qeexayaa in dhibaataynta ama caatinta tahay abuurida jawi cadownimo iyada oo loo marayo dhaqanka ama hanjabaad, cabsi gelin, ama xadgudub oo:
   (a) si aan macquul ahayn oo weyn uga hor istaaga waxqabadka waxbarasho ee ardayga, fursadaha ama faa'iidooyinka, ama caafimaadka maskaxda, dareenka iyo/ama jirka, oo ay ku jiraan dhaqanka, hanjabaad, cabsi gelin, ama xadgudub keena ama la filayo in uu keeno dhaawac dareen; ama
   (b) si macquul ah u keena ama la filayo in uu keeno dhaawac jireed oo ardayga ah ama in uu ardayga ka cabsi geliyo amaankiisa jir ahaan. Qeexitaankan waxa uu sidoo kale ka koobnaanayaa ficilada dhibaataynta ama caatinta ee ka dhaca hantida dugsiga, munaasabadaha dugsiyada, ama meel ka baxsan hantida dugsiga halkaasoo ficilkaasi abuuro ama la filayo inuu abuuro khatar carqalad weyn ku keeni karta jawiga dugsiga, hadii la saadaalin karo in dhaqanka, hanjabaad, cabsi gelin, ama xadgudub uu gaadhi karo hantida dugsiga. Ujeedada qeexitaankan, erayga "hanjabaad, cabsi gelin, ama xadgudub" waxa uu ka koobnaanayaa ficilada afka ah iyo kuwa aan afka ahayn.
   b. *Caatinta Internet ka:* Waxaa lagu qeexaa dhibaataynta ama caaatinta ka dhacda hab kasta oo isgaarsiin elektaroonik ah (Sharciga. Waxbarashada m §11[8]), oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, taleefanada gacanta, kombiyuutarada, iyo Ipad yada, ama qalab kale oo isgaarsiineed, oo ay ku jiraan bogaga bulshada, fariimaha qoraalka ah, qolalka sheekaysiga, iyo mareegaha internet ka. (Eeg qeexida dhibaataynta ama caatinta sida ku cad 5a iyo xeerka Golaha 100.2(kk)(1)(viii))

6. Hanjabaad Bambada: Fariin telefoon, qoraal, ama elektaroonik ah oo sheegaysa in bambo, qarax, ama hub

[17] Tixraac: Qaamuuska Erayada ee Nidaamka Warbixinta Amaanka Dugsiga iyo Jawiga Waxbarashada (SSEC)

kiimiko ama noole ah la dhigay ama la dhigi doono dhulka dugsiga.

7. Digniin Been ah: ababeynta in digniinta dabka ama digniinta musiibad kale oo la shido iyadoo la ogyahay in khatar jirin, ama iyadoo si been abuur ah loo soo sheegayo dab ama musiibo.

8. Hanjabaad Rabshad Dugsiga (Marka laga reebo Hanjabaada Bambada ama Digniin Been ah): Fariin afka ah, telefoon, qoraal, ama elektaroonik ah oo ku saabsan hanjabaad rabshad ka dhici doonta hantida dugsiga ama xaflad la xiriirta dugsiga.

9. Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Darogo: Si sharci daro ah u isticmaalka, haynta, ama ku jiritaanka saameynta maandooriyaha la xakameeyey ama marihuana, gudaha hantida dugsiga ama xaflad la xiriirta dugsiga, oo ay ku jirto in maandooriyahaas lagu hayo qof, khaanad, gaari, ama meel kale oo shakhsiyeed; iibinta ama qaybinta maandooriyaha la xakameeyey ama marihuana gudaha hantida dugsiga; helida maandooriyaha la xakameeyey ama marihuana gudaha hantida dugsiga ee aan qofna haysan; iyadoo la tixgelinayo waxa ku qoran halkan in aan lagu dabaqi doonin maamulka sharciga ee daawooyinka laqoray gudaha hantida dugsiga.

10. Isticmaalka, Haynta, ama Iibinta Khamriga: Si sharci daro ah u isticmaalka, haynta, ama ku jiritaanka saameynta khamriga gudaha hantida dugsiga ama xaflad la xiriirta dugsiga. Tani waxa ka mid ah haynta khamriga qof, khaanad, gaari, ama meel kale oo shakhsiyeed; iibinta ama qaybinta khamriga gudaha hantida dugsiga ama xaflad la xiriirta dugsiga; iyo helida khamriga gudaha hantida dugsiga halkaas aan qofna haysan.

# LIFAAQA G

# Qaamuuska

**Khiyaanada Waxbarasho**: Bixinta, helida, ama daawashada jawaabaha su'aalaha imtixaanka ama hawlaha madax banaan; haynta ama isticmaalka buugaagta, qoraalo, inta lagu jiro imtixaanka iyada oo ogolaansho laga helin shaqaalaha.

**Maamulaha:** Maamulayaasha dhismaha/barnaamijka (sida Maamulayaasha Dugsiyada, Maamule Ku xigeenada, Cawiyaasha Maamulayaasha, Maamulayaasha Guryaha, Maamulayaasha Barnaamijyada, iyo Agaasimayaasha Ciyaaraha), Agaasimayaasha Degmada oo dhan, Agaasimayaasha Gaadiidka, iyo kormeerayaasha amaanka.

**Khamriga/Daroogada/Maadooriyaha La Xakameeyey**: Wax kasta oo ah maado sharci daro ah, lala qabsada, saameyn ku yeesha niyada, ama halis u keeni karta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, khamri, neefsashada, maadooyinka la xakameeyey, marihuana, cocaine/crack, LSD, PCP, "ecstasy," amphetamines, heroin, steroids, waxyaabaha u eg, iyo noocyada la sameeyay ee maadooyinkaasi, iyadoon loo eegin in si gaar ah sharci daro yihiin ama aan ahayn. Qeexitaankan waxa sidoo kale ka mid ah maadooyinka loo yaqaan "dawooyinka naqshadeeysan", oo ah maadooyin loo sameeyey si ay u sameeyaan saameynta iyo isticmaalka la midka ah ee maandooriyada sharci darada ah. Ujeedada qeexitaankan waxa sidoo kale lagu daray daawooyinka la qoray iyo kuwa aan daawo qornayn ahayn marka si khaldan loo isticmaalo ama, xaga daawooyinka la qoray, marka qof aan ahayn kan loo qoray uu qaato ama isticmaalo. Ardayda dugsiyada hoose looma ogola inay haystaan daawooyinka la qoray ama kuwa aan qornayn. Waalidiinta ardayda dugsiyada hoose ee u baahan daawooyinkan waa in ay si shakhsi ah ugu geeyaan kalkaalisada caafimaad ee dugsiga, si loogu maamulo ardayga sida loogu qoray.

**Weerarka Ardayga:** Arday ama ardayo ku qaada arday kale si xoog leh, xanaaq leh, ama weerar leh iyagoo aan digniin ama wax kiciyo jirin; tani waxay sidoo kale ka mid tahay dhaqamada loo yaqaan guud ahaan "weerar."

**Qorshaha Faragelinta Dhaqanka**: Qorshe firfircoon oo ay diyaariyeen shaqaalaha dugsiga si loo saxo dhaqanka ardayga ee aan haboonayn ama qashqashaada, iyadoo la adeegsanayo faragelino, istiraatiijiyado, iyo taageerooyin wanaagsan ee dhaqanka. Qorshahan waxa uu ku haboon yahay ardayda leh iyo kuwa aan lahayn naafonimo.

**Dhaawac Jirka**: Dhaawac kasta oo jir ah ama la arki karo.

**Hanjabaad Bambo:** Sameynta hanjabaado ama bixinta macluumaad been ah oo ku saabsan jiritaanka maadooyin qarxa ama qalab qarxa gudaha hantida dugsiga iyada oo aan sabab jirin, iyadoo loo marayo qoraal, shakhsi ahaan, telefoon, fariin qoraal ah, ama hab kale oo elektaroonik ah.

**Caatinta/Caatinta Internet ka:** Si kas ah ama kas ahayn ama cadownimo leh oo dhaawac u geysa qof kale jir ahaan ama maskax ahaan, kaasoo lagu garto awooda u kala dhaxaysa ardayda. Hadii labo arday ay si siman ugu lug yeeshaan khilaaf, tani ma ahan xaalad cagajugleyn, balse waxaa loo arkaa "khilaaf" u dhaxeeya labada arday. Marka ay jirto awood kala sareyn, waxa lagu arki karaa siyaabo yaryar mudo dheer ama hal mar si weyn. Caatinta waxa ay ka mid tahay isgaarsiin af, jireed, ama qoraal ah oo hanjabaad ama cabsi weyn leh. Caatinta Internet ka waxaa ka mid ah isticmaalka tignoolajiyada macluumaadka iyo isgaarsiinta (sida email, taleefan gacanta, qalab fariin, fariimaha qoraalka, baraha bulshada, wicitaanada muuqaalka ah, nidaamyada ciyaaraha, fariimaha degdega ah, mareegaha shaqsiga ah ama blog yada, ama isku darka kuwani) si loo taageero dhaqanka ula kac ah ee cadownimada leh ee shakhsi ama koox si ula kac ah ama si aan fiicnayn u dhaawaca ama u cabsi geliya dadka kale jir ahaan ama maskax ahaan.

**Adeeg Bulsho:** Adeeg aan mushaar lahayn oo loogu talagalay danta guud, kaasoo lagu fuliyo qayb ahaan ama dhamaan cawaaqibta ka dhalata ku xadgudubka. Waxa uu ardayga u ogolaanayaa inuu ka qaybqaato hawlo adeeg iyo faa'iido u leh bulshada. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah ka shaqaynta jikada cuntada dadka baahan, nadiifinta qashinka, caawinta xarun dadka waayeelka ah, iwm.

**Shir:** Isgaarsiin ku dhacda shaqsi ka shaqsi, telefoon ama si muuqaal ah. Shirarka waxa ka qaybqaadan kara ardayda, macalimiinta, maamulayaasha, iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta, si looga wada hadlo dhaqanka xun ee ardayga iyo xalalka suurtagalka ah ee wax ka qabta arimaha bulsho, waxbarasho, iyo kuwa shakhsiyeed ee la xiriira dhaqankaas.

**Cawaaqib**: Natiijo ka dhalata ficil ama xaalad.

**Maqnaashaha Fasalka**: Maqnaansho fasal ama hawl dugsiga ee cudur daa a'aan.

**Disciplinary Removal:** means an in-school or out-of-school suspension, or any other removal (ex. asking a parent to pick a student up as a way of deescalating, sending a student to a "Help Zone" for an extended length of time) of a student from class during which the student:

**Buris Anshaxeed**: waxay ka dhigan tahay buris gudaha ama dibada dugsiga, ama ka saarid kale (tusaale, in waalid laga codsado inuu ardayga soo doono si loo dejiyo xaalada, u dirida ardayga "Goobta Caawinta" mudo dheer) inta uu ardaygu:

1. Ma helayo fursad uu si haboon uga qaybqaato manhajka guud;
2. Ma helo adeegyada lagu qeexay Barnaamijka Waxbarasho ee Gaarka ah (IEP) ee ardayga; ama
3. Maka sii wato ka qaybqaadashada caruurta aan naafada lahayn sida ay ugu qaybqaadan lahaayeen goobtooda hada

**Shaqaalaha Degmada:** Dhamaan shaqsiyaadka, meel kasta ku qoran, ee ka shaqeeya Degmada, ama hoos yimaada qandaraas ama hawl u haynta Degmada, ama caawinayo Degmada si ay uga caawiyaan hawlgalka barnaamijyadeeda iyo/ama bixinta adeegyada. Erayga "Shaqaalaha Degmada" waxaa ka mid ah shaqaalaha gaadiidka, iyadoon loo eegin in ay ka shaqeeyaan Degmada ama ku joogaan qandaraasad.

**Arday Qashqashaad**: Arday dugsi hoose ama sare oo ka yar 21 sano, kaasoo si weyn u carqaladeeya habka waxbarashada ama si weyn uga hor istaaga macalinka inuu xukumo fasalka.
Tixraac: Xeerka Waxbarashada §3214(2-a)(b)

**ELL**: Ardayda baranaysa afka Ingiriisiga.

**Xaalad Deg Deg ah**: Xaalad ka dhacda gudaha dugsiga ama meel u dhow, ama dhacdo dugsiga la xiriirta, halkaas oo jirto khatar halis ah, oo degdeg ah oo dhaawac gaarsiin karta qof ama dad. Xaalad degdeg ah badanaa waxay u baahan tahay jawaab degdeg ah oo si xirfad leh loo fuliyo si khatarta looga hortago ama la saaro.

**Shaqaale**: qof kasta oo si toos ah uga shaqeeya Dugsiyada Degmada Magaalada Rochester.

**Cadaalad**: Cadaalad iyo sinaan; iyadoo aan la muujin eex ama takoor.

**Qiimeynta Dhaqanka Shaqeeyo**: Waxay ku lug leedahay ururinta macluumaadka ku saabsan dhaqanka aan haboonayn ama carqaladeynta ardayga iyo go'aaminta hababka ay shaqaalaha dugsigu qaadi doonaan si loo saxo ama loo maareeyo dhaqanka ardayga.

**Muujinta Jinsiga**: Habka qofku uu ku matalo ama ku muujiyo jinsigiisa, badanaa iyadoo loo marayo dhaqan, dhar, habka timaha, hawlaha, codka, ama dabeecada.

**Aqoonsiga Jinsiga**: Fahamka qofka ee naftooda in uu yahay lab ama dhedig, iyadoo lagu cabirayo miisaanka u dhexeeya lab iyo dhedig, taas oo ka duwan jinsiga dabiiciga ah ama jinsiga loo qoondeeyay marka uu dhashay.

**Dhibaateyn**[18]:

1. **Dhibaateynta Naafada**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox lagu salaynayo xaalad maskaxeed ama jir oo naafonimo ah, iyo waxaa ka mid ah fal kasta oo aan la soo dhaweyn oo lagu beegsanayo astaamaha naafonimada qofka, sida ku dayashada qaabka uu u hadlo ama u dhaqaaqo, ama faragelin lagu sameeyo qalabka uu u baahan yahay.

2. **Dhibaateynta Qowmiyad ama Asal Qaran**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox ka tirsan qowmiyad ama asal qaran, kuwaas oo wadaaga astaamo, luqado, caadooyin, iyo dhaqamo la mid ah, kuna saleysan qowmiyada, asal qaran, caadooyinka, iyo dhaqamadaas.

3. **Dhibaateynta Muujinta Jinsiga ama Aqoonsiga Jinsiga**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox qaababka muujinta jinsiga ama aqoonsiga jinsiga, sida faalooyin ceebaynaya dadka labeebka ah, dhaqdhaqaaqa, dharka, ama hawlo ku salaysan aqoonsiga qofka ee u dhexeeya lab iyo dhedig.

4. **Xaalada Guurka**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof iyadoo lagu salaynayo astaamaha xaaladiisa guurka, sida faalooyin ceebaynaya qofka keligiis ah, furan, ama waalid keligiis ah.

5. **Dhibaateynta Jinsiga:** Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox astaamo jireed oo guud (sida midabka maqaarka, indhaha, timaha, iyo muuqaalada wajiga ee dhaxalka ah) kuwaas oo ka soocaya qayb gaar ah oo bini'aadamka ka mid ah, iyadoo lagu salaynayo astaamahan jireed.

6. **Dhibaateynta Diinta**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox, aaminsanaanta diimeed ee ku saabsan asalka iyo ujeedada koonka iyo jiritaanka ama jirin jirka Eebe sare, iyadoo lagu salaynayo aaminsanaanta diimeed.

7. **Dhibaateynta Galmada/Jinsiga:** Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo jinsiga qofka, sida faalooyin ceebaynaya uurka ama ka qaybqaadashada qofka shaqo ama hawl aan caadi u ahayn jinsigiisa.

8. **Dhibaateynta Galmada**: Talaabooyin galmo oo aan la soo dhaweynin, codsiyo galmo, ama dhaqamo kale oo af, qoraal, ama jireed oo galmo ah, oo lagu beegsanayo qof kale.

9. **Dhibaateynta Qaabka Galmada**: Ficil ama hadal xun oo lagu beegsanayo qof ama koox iyadoo lagu salaynayo soo jiidashadooda galmo ama sida ay uga jawaabaan xubnaha jinsiga kale ama isla jinsiga.

**LGBTQIA+**: Lesbian, Gay, Bisexual, Transgender, Su'aalooyo/Queer, labeeb ama qof aan haysanin galmo.

**Dhuminta Xuquuqaha**: Sida ciqaab xadgudubka Xeerka Anshaxa, ardaygu waxoo waan karaa xaqa uu kaga qaybqaato dhacdooyinka iyo hawlaha dugsiga, oo ay ku jiraan ka qaybqaadashada xafladaha qalinjabinta iyo hawlaha ardayda marka qalinjabinta (hadii dhaqanka uu xaq u siiyo ciqaabta, lacagaha la bixiyay ayaa kaliya dib loo

---

[18] Tixraac aan rasmi ahayn: Siyaasada Degmada Mamnuucada Takoorka ama Caytinta Ardayda ama Shaqaalaha (0100); Siyaasada Ka hortaga iyo Faragelinta Caatinta iyo Dhibeynta Ardayda (0115)

siin doonaa).

**Soo guditaanka Shaqada**: Marka arday laga saaro fasalka sababtoo ah dhaqan aan haboonayn ama carqaladeyn, shaqaalaha dugsigu waa inay ardayga siiyaan shaqooyinka la seegay iyo fursad uu ku soo kabto shaqooyinkaas iyada oo aan ciqaab lagu soo rogin. Ardayda leh Barnaamijyada Waxbarasho ee Gaarka ah (IEPs) iyo qorshayaasha 504 waxay leeyihiin ilaalin dheeri ah oo laga yaabo inay u baahan tahay hirgelinta buuxda ee IEP ga, ma aha kaliya bug yaraha guriga. Shaqaalaha dugsiga waa inay tixraacaan Buuga Anshaxa Ardayga iyo Buuga Waafaqsanaanta Waxbarashada Gaarka ah si ay u helaan macluumaad dheeri ah.

**Barnaamijka Latalinta**: Arday waxaa lala xiriiriyaa lataliye (lataliyaha, macalin, arday kale, ama xubno ka tirsan bulshada) oo ka caawiya horumarinta shakhsiyeed, waxbarasho, iyo bulshada ee ardayga.

**Waalid**: Waalid, mas'uul ama qof xiriir waalidnimo la leh ardayga.

**Wcyigelinta Waalidka**: Wacyigelinta waalidka waxay ku qasbeysaa shaqaalaha dugsiga inay waalidiinta ku wargeliyaan dhaqanka ilmahooda iyo inay ka raadiyaan caawimaad waalidiinta si loo saxo dhaqanka aan haboonayn ama qashqashaada.

**Dhexdhexaadin Saaxiib**: Dhexdhexaadinta saaxiib waa qaab xalinta khilaafaadka oo ardayda ku caawiyaan ardayda kale inay la tacaalaan khilaafaadka, iyo la imaadaan xalal hormarsan. Eeg Lifaaqa B: Dhaqamada Soo kabashada.

**Haysashada Khamriga, Daroogada iyo/ama Neefsashada:** Haysashada khamriga, daroogada iyo/ama neefsashada waa in qofku si shaqsi ahaan u haysto ama u leeyahay awood iyo maamul ku saabsan.

**Dhaqan Fiican**: Dhaqan wanaagsan oo faa'iido leh, iyo lagu talagalay in lagu dhiirigeliyo aqbalaada bulshada, caawinta dadka kale, iyo saaxiibtinimada.

**U Gudbinta Adeegyada Latalinta Daroogada**: Ardayda leh dhaqanka la xiriira isticmaalka daroogada, iyo/ama marka ay jirto sabab lagu rumeysan karo in talo bixin daroogo loo baahan yahay, waxaa loo gudbin karaa adeegyada ku saleysan dugsiga ama bulshada.

**U Gudbinta Ururada Bulshada**: Ardayda waxaa loo gudbin karaa ururada bulshada si ay u helaan adeegyo kala duwan, oo ay ku jiraan barnaamijyada ka dib dugsiga, latalin shaqsi ama koox, horumarinta hogaanka, xalinta khilaafaadka, iyo/ama waxbarid.

**U Gudbinta Xarumaha Caafimaadka iyo Maskaxda oo Dugsiga ku Saleysan**: Adeegyadan waxay siiyaan ardayda latalin iyo qiimeyn kuwa u baahan. Ardayda waxaa loo ogol yahay inay si gaar ah u wadaagaan arimaha ama welwelka keena dhaqanka aan haboonayn ama carqaladeynta, ama si xun u saameeya guusha waxbarasho.

**Magdhaw**: Bedelida shayaal la xaday ama la dhaawacay iyadoo la siinayo qiimaha suuqa ee cadaalad ah sida magdhaw ama adeeg.

**Habka Soo Kabashada**:  Eeg Lifaaqa B: Hababka Soo kabashada.

**Maalinta Dugsiga**: Maalin kasta ee ardayga khasab ku tahay inuu yimaado, ilaa hadii lagu sheego "kalandarka." "Maalin" waxay ka dhigan tahay maalin dugsiyeed.

**Hawlasha Dugsiga**: Dhacdo ama hawl kasta oo ay dugsigu maalgeliyo ama qabanqaabiyo, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn dhacdooyinka dheeraadka ah iyo ciyaaraha, shirarka, doodaha, ama dhageysiyo
Tixraac.:  Sharciga Waxbarashada §2801(1)

**Shaqaalaha Degmada**: Dhamaan shaqsiyaadka, meel kasta ku qoran, ee ka shaqeeya Degmada, ama hoos yimaada qandaraas ama hawl u haynta Degmada, ama caawinayo Degmada si ay uga caawiyaan hawlgalka barnaamijyadeeda iyo/ama bixinta adeegyada.

**Hantida Iskoolka**: Gudaha ama wareega dhismo kasta, qaab dhismeed, garoon ciyaareed, goob ciyaareed, baarkin, ama dhul ku dhex jira xadka hantida dhabta ah ee dugsiga dadweynaha ee hoose, sare, waxbarashada dadka waaweyn ama dugsiga kadib dugsiga sare, ama hanti kale oo ay Degmadu leedahay ama kireysatay, ama gudaha ama saaran baska dugsiga, sida lagu qeexay Xeerka Gaadiidka iyo Baabuurta §142, ama gaadiid kale oo ay Degmadu u qoondeysay/ansixisay.
Tixraac.: Sharciga Waxbarashada §2801(1)

**Dhaawac Jir Daran**: Dhaawac jir oo ku lug leh khatar weyn oo dhimasho, xanuun jidheed oo daran, jiro muuqata oo mudo dheer socota, ama lumis/naafonimo mudo dheer ah oo ku timaada shaqada xubinta jidhka, xubin, ama awood maskaxeed.

**Hawlo Galmo**: Dhaqan galmo oo aan haboonayn marka lagu jiro hantida dugsiga ama inta lagu jiro hawlaha oo dugsigu maalgeliyo, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn muuqaalo xun xun, xiriir galmo oo ogolaansho leh, galmo, galmo afka ah, ama haysashada agab galmo si cad u muujinaya.

**Weerar Galmo ama Xoog**: Xiriir galmo oo aan la rabin, fal galmo, ama xiriir galmo la qasbay, lagu qasbay xoog ama hanjabaad, oo ay ku jiraan taabasho aan haboonayn iyo/ama fal ka dhigan dambiyo sida ku qeexan Qodobka 130 ee Xeerka Ciqaabta.

**Jihada Galmada**: Soo jiidashada dhabta ah ama loo maleeyo ee jinsiyada u gaarka ah, ama la'aanta soo jiidashada. Tusaalooyin waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn, toos, lesbian, gay, qof aan haysanin galmo, bisexual, lab iyo dhidig la'aan.

**Daahitaan**: Imaansho ka daaha dugsiga ama fasalka

**Xaditaan**: Qaadashada ama isku dayga qaadashada hanti qof kale ama hay'ad iyada oo aan ogolaansho laga helin ama ogaan lahaansho, iyadoo ujeedadu tahay in laga qaado qofka milkiilaha ah.

**Xadgudub**: Joogitaanka hantida dugsiga iyada oo aan ogolaansho la helin, oo ay ku jirto marka ceyrin ama buris.

**Arday Dagaaltano**[19]:
Arday dugsiga hoose ama sare oo ka yar 21 sano, kaas oo

1. Galo adeegsada rabshad, sida si ula kas ah u garaacida, u laadida, u feerka, iyo/ama u xoqida shaqaalaha dugsiga, ama isku dayo inuu sidaas sameeyo;
2. Marka uu ku sugan yahay hantida dugsiga ama hawlaha dugsigu maalgeliyo, sameeya fal rabshad ah, sida si kas ah u garaacida, u laadida, u feerka, iyo/ama u xoqida arday kale ama qof kale oo si sharci ah ugu sugan hantida dugsiga ama hawsha dugsiga, ama isku dayo inuu sidaas sameeyo;
3. Marka uu ku sugan yahay hantida dugsiga ama hawl dugsigu maalgeliyo, haysta hub;
4. Marka uu ku sugan yahay hantida dugsiga ama hawl dugsigu maalgeliyo, muujinaya waxa u muuqda hub;
5. Marka uu ku sugan yahay hantida dugsiga ama hawl dugsigu maalgeliyo, ku hanjabay inuu isticmaali doono hub;
6. Si kas ah iyo ogaal ah u waxyeeleeya ama u burburiya hanti shaqsiyeed ee shaqaalaha dugsiga ama qof kale oo si sharci ah ugu sugan hantida dugsiga ama hawlaha dugsiga uu leeyahay; ama
7. Si kas ah iyo ogaal ah u waxyeeleeya ama u burburiya hanti ka tirsan Degmada Dugsiga.

[19] Tixraac.: Sharciga Waxbarashada §3214(2-a) (a)

**Hub (oo ay ku jiraan kuwa u ek rasaas)**[20]: Qalab rasaas ah sida lagu qeexay 18 USC §921 ujeedada Xeerka Dugsiyada Aan Hubka Lahayn, qori kasta oo kale, qori BB, qori yar, bistoolad, Qori gacanta rasaasad, qori gaaban, qori dheer, qori mashiin, qori lagu qariyay, mindi, seef, mindi dheer, miinshaar, mindi dhuuban, mindi fur fur, mindi fudud, farta birta ah, fargeeto, mindi bir ah, mindi sanduuq, seef ul, qori elektaroonig ah, xidigta Kung Fu, qori koronto shoog ah, buufin basbaas ama buufin kale oo sun ah, bambo qarxa ama dabka dhaliya, ama qalab, agab, maado ama walax kale (oo ay ku jiraan walxaha kiimikaad iyo noolaha), nool ama aan noolayn, oo loo isticmaali karo ama si fudud ugu awood leh in lagu keeno dhimasho ama dhaawac jidheed oo daran, marka laga reebo mindida jeebka ka yar laba iyo badh inji dhererkiisu.

Hubka, tusaale ahaan iyo iyada oo aan lagu xadidnayn, waa mid ka mid ah kuwa soo socda:

1. Qori Rasaas: Qori sida lagu qeexay 18 U.S.C. 921 ee xeerka federaalka. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah bistoolado, qori dheer, qori gaaban, iyo bamamka. Eeg xeerka federaalka si aad u hesho qeexitaan buuxa.

2. Qori/Hub Kale: Waxay keeni karaan dhaawac jidheed (tusaale, qoriyada BB ee buuxda, qoriyada rasasan, mindiyo, qori rinji ah, qalabka aamusa, ama hub kale oo keeni kara dhaawac jidheed oo daran ama u ekaan kara qori).

3. Haysashada Shay: Waxay u ekaan karaan qori ama hub laakiin aan u badnayn inay keento dhaawac jidheed (tusaale, qoriyada biyaha, qoriyada ciyaarta, qoriyada rasaasta ee aan buuxin ama aan shaqaynayn).

4. Hub loo Adeegsado in Lagu Dhaawaco: Isticmaalka hub si loo dhaawaco qof kasta oo ku sugan hantida dugsiga ama inta lagu jiro hawlaha oo dugsiga maalgeliyo.

[20] Tixraac.: Xeerka Dugsiyada aan Hubka la Hayn, 18 USC §§3351, 8921, 8922, 921
Sharciga Waxbarashada §3214(3) (d)
8 NYCRR 100.2(gg)